International Labour Organization | PROSPECTS

Waxbarashada Maaliyadeed

WAXAA LOOGU TALO GALAY QOXOOTIGA, BARAKACAYAASHA GUDAHA IYO BULSHOOYINKA MARTIDA LOO YAHAY

SI CAQLI LEH LACAGTAADA U MAAMULO!

Ministry of Foreign Affairs of the Netherlands

Daabacaada koowaad 2021

Daabacadaha Xafiiska shaqaalaha aduunku waxay ku haysataa xuquuqda lahaanshaha sida hoos timaada Protocol -ka 2aad ee Heshiiska Xuquuqda daabacaada ee Caalamiga ah. Si kastaba ha ahaatee, qaybo kooban oo iyaga ka mid ah ayaa dib loo soo saari karaa iyada oo aan loo haysan oggolaansho, iyadoo shardi ay tahay in isha xogta la tilmaamayo. Xuquuqda dib u daabacaada ama tarjumaadda, codsiga waa in loo gudbisto waaxda Daabacadaha ILO (Xuquuqda iyo Shati-siinta), Xafiiska Shaqaalaha Caalamiga ah, CH-1211 Geneva 22, Switzerland, ama iimayl: rights@ilo.org. Xafiiska Shaqaalaha aduunku wuxuu soo dhaweynayaa codsiyada noocaas ah.

Maktabadaha, hay'adaha iyo dadka kale ee ka diiwaan gashan Ururka xaga Xuquuqda dib u daabacad waxay ka dhigi karaan nuqulo si waafaqsan shatiga loo soo saaray iyaga, sababtan aawadeed. Booqo www.ifrro.org si aad u hesho ururka xuquuqda dib u daabacida ee dalkaaga.

ISBN: 9789220341827 (Print)
ISBN: 9789220341834 (Web PDF)

Tilmaamaha lagu shaqeeyo daabacaadaha ILO, kuwaas oo waafaqsan dhaqanka qaramada midoobay, iyo soo bandhigida waxyaabaha ku jira ma tilmaamayaan muujinta fikrad kasta ha ahaato dhinaca Xafiiska Shaqaalaha aduunka ee khuseeya xaaladda sharci kasta oo dal, deegaan ama dhul ama maamulkiisa, ama la xiriira xuduudihiisa.

Mas'uuliyadda aaraa'da maqaallada saxiixan, darasaadada iyo taburacaadka kale ee loogu darsado si shaqsi ah keliya waxaa le qorayaasha, daabacaaddaasna ma noqoneyso mid uu ogolaaday Xafiiska Shaqaalaha Adduunka ee fikradaha lagu muujiyay iyaga. Tixraacyada magacyada shirkadaha iyo badeecadaha ganacsi iyo nidaamyadoodu ma aha inay ka turjumayaan Xafiiska Shaqada aduunka, guuldaro kasta oo lagu xuso shirkad gaar ah, badeecad ganacsi ama Habkan ma aha calaamad diidmo.

Warbixin ku saabsan daabacadaha ILO iyo waxsoosaarkooda digitalka waxaa laga heli karaa: www.ilo.org/publns

MAHADNAQ

Buugan la tababaraha loogu talogalay waxa diyaariyay Gustavo Prepelitchi waxa hagidda guud iyo kormeerna ku sameysay Yousra Hamed oo ILO da barnaamijka maaliyada bulshada ka mid ah. Waxa si fiicanna dadaalkan u taageeray oo ku mahadsan gashiyadoda saaxiibada xarunta dhexe ee mashruuca Prospectska iyo fiildhigaba ee dalalka kala ah (Kenya, Uganda, Ethiopia, Sudan, Egypt, Iraq and Lebanon).

Waxaa sidoo kale ka faa'iideysatay taageerada macnaha leh iyo gashiyada muhiimka ah ee dhammaan la hawlgalayaasha kuwaas oo ka qaybqaatay aqoon-isweydaarsiga ansaxinta daneeyayaasha ee bishii Oktoobar 2020, oo ay ka mid yihiin Bangiga Ugandha, DRC, Hand in hand, Longitude finance, Equity Foundation iyo hay'ado kale oo badan oo gaar loo leeyahay.
Barnaamijka ILO ee maalgalinta bulshada ayaa sidoo kale u mahadcelinaya dhammaan kaqeybgalayaashii labadii tababar ee tijaabada ahaa ee tababarayaal lagu kala qabtay Nairobi, Kenya iyo Addis Ababa, Itoobiya oo lagu qabtay rubacii koowaad ee sanadka 2021 aragtidooda iyo soo jeedintooda kuwaas oo gacan ka geystay dhameystirka dukumintiga.

Xaqiijinta akhriska waxaa sameeyay Ines Bentchikou, kartoonnada iyo sawirrada waxaa sameeyay Samba Cisse iyo naqshadeynta Michel de Jesus.

TUSMADA

Hordhac 7

1. Asalka 7
2. Bandhiga buuga la tabobaraha 8
3. Bandhiga shakhsiyaadka 8

Kaarka aqoonsiga Mary 9
Kaarka aqoonsiga Joseph 10
Kaarka aqoonsiga Meshak 11
Kaarka aqoonsiga Jane 12

B) Hadaf samayso oo kala hadal qoyskaaga 13

1. Hadafkaaga xaddid 14
2. Qoyskaaga kala hadal hadafkaaga 16
3. Qiimee kharaska hadafkaaga iyo mudnaantaada 17
4. Si aad hadafkaaga u gaadho wax meel dhigo 17

T) Lacagtaada si caqli leh u maamul 23

1. Noqo kharash gareeye caqli badan 24
2. Miisaniyadaada xaddid 29
3. La soco oo miisaaniyadaada hana ka bixin 38
4. Kharashkaaga oo dhan diiwaan gali 46

Lifaaqa iyo dukumintiyada muhiimka ah 47

J) Baro adeegyada iyo alaabaha maaliyadeed 49

1. Dooro habka ad wax ku kaydinayso 50
2. Dooro alaabaha maaliyadeed eed wax ku kaydinayso si xigmad leh 54

Lifaaqa iyo dukumintiyada muhiimka ah 61
Jawaabaha laylisyada 62

X) Adeegso badeecadaha amaahda 65

1. Dooro Habka aad ku maalgaliso mashrucaga 66
2. Si xigmad leh u dooro amahda! 70
3. Kharashka amaahdaada xisaabi 73
4. Iska jir! Dayn badan yaan laguugu yeelan! 82

Lifaaqa iyo dukumintiyada muhiimka ah 86
Jawaabaha laylisyada 87

KH) Xulo habka lacag bixinta iyo alaabaha xawilaada lacagta 91

1. Isticmaal siyabo lagu bixiyo lacagta tii oo aamin ah 92
2. Baro sida lacagta loo xawilo 97
3. Sida lacagta loo diro iyo sida loo qaato 103

Lifaaqyada iyo furaha dhukumintiyada 107
Jawaabaha laylisyada 108

D) Baro xarumaha maliyadeed oo ku isticmaal kalsooni **111**

1. Baro xarumaha maliyadeed 112
2. Isticmal xarumaha maliyadeed si kalsooni leh! 118

Lifaaqyada iyo furaha dhukumintiyada 131
Jawaabaha laylisyada 132

G) Caymiska iyo mamulka khatarta **135**

1. Maamulka khatarta 136
2. Talooyinka lagu abuuro Sanduuqa wakhtiga deg dega 140
3. Fahan syaasadda caymiskaga 141
4. Isticmaal siyaasadda caymiskaaga 145
5. Dooro alaabta caymiska munaasibka ah 148

Lifaaqyada iyo fraha dhukumintyada 150
Jawaabaha laylisyada 151

Qaybo sawir ah

Qaybta sawirka Mary 151
Qaybta sawirka Joseph 158
Qaybta sawirka Meshak 162
Qaybta sawirka Jane 167

HORDHAC

1. ASAL

Dhukumintayada aad hayso waa buuga la tabobaraha ee waxbarashada maaliyadeed. Waxa loogu talo galay qoxootiga, dadka barokacay (IDPs) iyo dadka martida loo yahay ee raba in ay bartaan sida loo maamulo lacagta.

Buugan loogu talo galay la tabobaraha wuxuu barayaa aqoon aasaasi ah, xirfado iyo qalabyo la xidhiidha lacag helida, lacag bixinta iyo, miisaaniyadda oo la qorsheeyo iyo isticmaalka adeegyada maaliyadeed sida: kaydinta, amaahda, lacag xawilaada iyo caymiska.

Ujeeddada waxbarashada maaliyadeed iyo qalabka tabobarkan waa in la caawiyo hay'adaha tageera qoxootiga iyo dadka barokacay IDPs iyo bulshada marti galisay: dhalin yarada, haweenka, iyo in la baro asaasiyaadka lacagta shakhsiga ah iyo ta qoyska. Buugagani waxay daboolayaan mawduucyadan: xaddidadda ahdaaf maaliyadeed, wada xidhiidhka si kalsooni leh, in la fahmo hababka maaliyadeed ee lacagta lagu maamulo sida (kaydinta, amaahda, lacagaha la bixiyo, waleedyada digitaalka ah, caymiska), in la fahmo oo lala saayiro xarumaha maaliyadeed, lacagta la xawilo iyo in la maareeyo khatarta. Tabobarkani waxaa sidoo kale loogu talo galay in lagu hagaajiyo heerka waxbarasho ee hooseeya iyo xidhiidhyada awood ee aan dheeli tirnayn- ee u dhaxaya raga iyo dumarka iyo waliba dadka dhalin yarada ah iyo dadka waaweyn- kaasoo badanaa saameeya go'aamada lacagta la xidhiidha ee bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa danyarta ah. Sikhaasa buugan guud wuxuu ka hadlayaa caqabadaha iyo fursadaha ay la kulmaan qaxootiga, dadka baracayaasha iyo bulshooyinka martida loo yahay.

Xirmo Tababareedkan ay soo saareen Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO) oo ku salaysan qalabyo kala duwan waxbarashada dhaqaale ILO abuuray kooxo kala duwan. Buug-yarahan ah waxaa laga soo qaatay ay isticmaali Geeska Afrika.
oo ku salaysan qalabyo kaladuwan oo waxbarashada maaliyadeed ee ILO ah oo loo abuuray kooxo kala duwan oo la bartilmaameedsanayo. Buug -yarahan gaarka ah waxaa loo habeeyay isticmaalkiisa Geeska Afrika.

Buugan tabobartaha waa in si wada jira loola isticmaalo buuga tababaraha.Waxaa loogu talagalay kooxo gaar ah. Si loo dhamaystiro buugan guud ee tababaraha, buug -yaraha tabobartuhu wuxuu bixiyaa dhammaan macluumaadka la xiriira jilayaasha khiyaaliga ah, daraasadaha kiisaska, laylisyada iyo tixraacyada gaarka ah ee kooxda la beegsanayo. Buug -yarahan wuxuu kaloo ka kooban yahay qodobbada muhiimka ah ee tababarka iyo qalabka looga baahan yahay isticmaalka iyo u maamulidda lacagta qofka si xikmad leh. Waxaa loo qoray ragga iyo dumarka ka qayb qaadanaya koorsooyinka tababarka. Waa in loo adeegsadaa sidii buug laayli inta lagu guda jiro koorsada iyo sida hage tixraac dambe.

Buug-yarahan Tabobartaha ayaa lagu soo sameeyay qaab -dhismeedka Mashruuca ILO: ee Iskaashiga horumarinta rajooyinka loogu talagalay dadka si khasab ah loo barakiciyay iyo bulshooyinka martida loo yahay (PROSPECTS), waa hindise cusub oo iskaashi oo ay hormuud ka tahay Dowladda Netherlands oo isu keenaya Hay'adda Maaliyadda Caalamiga ah (IFC), Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO), Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR), Sanduuqa Carruurta ee Qaramada Midoobay (UNICEF) iyo Baanka Adduunka.

2. BANDHIGGA BUUGA LA TABOBARAHA

Waxbarashada maaliyadeed, Maxay ku saabsantahay?

Waxbarashada maaaliyadeed waa aqoonta, xirfadaha iyo aaladaha in laguu suurogeliyo in aad si fiican u maamusho lacagtaada. Tababarka ayaa aad u socotan inaad ka qayb gashaan wuxuu awood idiin siin doona si aad u qorsheeysataan una diyaarsataan mashaariicdaada mustaqbalka. Wuxuu idinsiinayaa fursad aad ku barataan xirfadaha la xiriira inaad shaqeystaan, kharash garaysaan, miisaaniyad samaysataan, kaydsataan, amaahataan iyo waxyaabo badan oo ilahaaga dhaqaale ku wajahan.

Waxa kale oo ay siin doonto fursad ah in aad ka fikirto xidhiidhka wanaagsan ee lacagaha la xidhiidha arrimaha qoyska, qaraabada ama dadka aad la shaqayso.

Waxaad baran doontaa ama dib u eegis ku samayn doontaa qalabyada inaad si wanaagsan u maamusho lacagtaada.

Adeegyada maaliyadeed sida daynta, kaydka, wareejinta lacagta ama caymisku ma yeelan doonaan wax sir ah oo kaa qarsoon.

Sida loo isticmaalo Buugga la tabobaraha?

Waa inaad isticmaashaa buuga tababarka inta lagu gudo jiro tababarka waxbarashada maaliyadeed. Nidaamka isdabdhaca cutubyadu waxay muujinayaan cashirada iyo xiisadaha tababarka.si kastaba ha ahaatee, xornimo dareen si aad u akhrido cutub kasta adigoo ku faraxsan!

Qeybaha majaajilada ah ee lagu daray dhammaadka buug -yarahan waxaa ku jira dhammaan mowduucyo la xiriira sida ku cad waayo aragnimada jilayaashayada khayaaliga ah. Waxaad kula kulmi doontaa inta lagu jiro qaybaahaas oo si fiican ayaad u baran doontaa. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad iyaga akhrido. Waxaad u akhrin kartaa si madaxbannaan.

Buugan yarahani wuxuu ka koobanyahay laylisyo badan iyo xaashiyo shaqeedyo kuwaas adigu shaqsi ahaan u buuxin karto.

3. HORDHACA SIFOOYINKA

Barnaamijkan tababar wuxuu isticmaalaa sheekooyin iyo waayo-aragnimada afar sifo oo waaweyn.
Waa kuwan Taariikh nololeedkoodu: taariikh nololeedkoodu.

JILAAGA 1AAD
MARY

MAGAC: Mary

Kooxda Bartilmaameedka: *Qaxooti*

Goobta Deganaanshaha: *Kiraysatay magaalada ku dhow*

Jinsiga: *Dheddig*

Da ': *29*

Xaaladda Guurka: *Xaas ah, wakhti aan dheerayn ka hor, 2 carruur ah*

Waxqabadka Dhaqaale: *Iyadu waa dawaarle. Waxay iibisaa wax soo saarka oo tayo sare leh, laakiin sidoo kale waxay siisaa tababar qaxootiga kale. Tan iyo COVID-19 waxay iibisaa waji xidh aad u badan*

Qoyska:

- *Waxay lacag u dirtaa waalidkeed si joogto ah*

Heerka waxbarashada ay ka gaadhay: *Dugsiga Sare dhameysatay*

Aragtideeda lacageed: *Aad u abaabulan*

Sifooyinkeeda Maaliyadeed:

- *Waxay had iyo jeer maskaxda ku haysaa ugu horaysiinta hadafyadeeda*
- *Isticmaashaa hay'adaha badh-rasmiga ah (ROSCAs, VSLAs)*
- *Waxay Xiiseysaa hay'adaha rasmiga ah*

Ujeeddooyinka:

- *Waxay Isticmaashaa waxyaabo dhaqaale oo rasmi ah si ay ubalaariso ganacsigeeda*
- *Waxay dhoofisaa wax soo saarkeeda*
- *Waxay samaysay NGO bixisa tababaro xirfadeed*
- *Waxay ka qaybqaadataa tababarada shaqa abuurka*

Astaamaha heerka labaad:

- *Ninkeeda Moussa*
- *Carruurteeda*
- *Waalidkeed*

JILAAGA 2AAD
JOSEPH

MAGAC: Joseph

Kooxda Bartilmaameedka: *Qaxooti*

Goobta Deganaanshaha: *Xero – Baadiyaha*

Jinsiga: *Lab*

Da ': *32*

Xaaladda Guurka: *Guursaday, 5 Caruura leh*

Waxqabadka Dhaqaale: *Wuxuu kaqeybqaataa hindisaha khudaarta ee qaxootiga. Wuxuu bixiyaa waa wax yar, laakiin waxa uu sidoo kale isticmaalaa qaar ka mid ah cuntada loogu talagalay qoyskiisa. Weli wuxuu ku tiirsan yahay raashinka, lacag bixinada haaydaha caalamiga ah iyo xawaaladaha*

Qoyska:

- *Xaaskiisu waxay shaqaale maalinle ah ka tahay qotooxiga oolaga aasaasay mashruuc beer digaag*

Heerka waxbarashada ay ka gaadhay: *Dugsiga Hoose*

Aragtideeda lacageed: *Hanti badan. Laakiin wuxuu leeyahay dakhli yar*

Astaamaha Maaliyadeed:

- *Isku daya in uu kaydsado sida ugu macquulsan*
- *Waxa uu uusan si joogto ah sameeynin miisaaniyad*
- *Wuxuu ku kaydsadaa guriga*

Ujeeddooyinka:

- *Waxa uu doonayaa inuu xubin ka mid ah noqdo VSLA*
- *Isaga iyoxaaskiisu waxay doonayaan inay yeeshan beer digaag u gaar ah*

Astaamaha heerka labaad:

- *Xaaskiisa Maarta*
- *Carruurtiisa*
- *Saaxiibadiis Assad iyo Farid*

JILAAGA 3AAD
MESHAK

MAGAC: Meshak

Kooxda Bartilmaameedka: *Bulshada Martida loo yahay*

Goobta Deganaanshaha: *Leh guri aan ka fogayn xerada ka*

Jinsiga: *Lab*

Da ': *48*

Xaaladda Guurka: *Guursaday, 4 Caruura leh*

Waxqabadka Dhaqaale: *Waxa uu leeyahay xoolo iyo dhul weyn oo uu miyiga ku leeyahay. Wuxuu si maalinle ah shaqada uga hayaa qaxootiga maalin kasta, oo ay ku jiraan dadka naafada ah. Sidoo kale waa milkiilaha dukaan raashinka ah ee soo socota si ay xeradii oo dhan*

Qoyska:

- *Carruurtu waa 10 jir (lab), 13 jir (dhedig), 16 jir (dhedig), I yo 18 jir (lab)*
- *Xaaska waxay ku shaqeysa iyada oo dukaanka ku jirta*

Heerka guulaha iyo waxbarashada: *Dhameyso dugsiga sare*

Aragtida Iacagta: *Kharash badan*

Astaamaha Dhaqaalaha:

- *Waxa uu leeyahay wax soo saarka dhaqaale oo rasmi ah oo uyaala bangiga dalka*
- *Sidoo kale wuxuu qayb ka yahay midowga dayn bixiyaasha*

Ujeeddooyinka:

- *Ballaari ganacsigiisa beeraha*
- *Guri weyn iibso*
- *Fur dukaan raashinka labaad*
- *In caruurtiisa jaamacad u diro*

Calaamadaha Sare:

- *Xaaskiisa Sara*
- *Carruurtiisu*

JILAAGA 4AAD
JANE

MAGAC: Jane

Kooxda Bartilmaameedka: *Dadka Gudaha Ku Barokacay (IDP)*

Goobta Deganaanshaha: *Kiraysatay magaalada u dhow*

Jinsiga: *Dheddig*

Da ': *24*

Xaaladda Guurka: *Iyadu waa naag carmal ah, hooyo keli ah oo hal cunugleh*

Waxqabadka Dhaqaale: *Waxay kibis iyo macmacaanka ku dubtaa gurigeeda, wayna ku iibisaa albaabka albaab. Mararka qaarkood, waxay awood u leedahay inay wax ku iibiso xero ilaa xero, mar kasta oo ay awooddo, waxay lacag u dirtaa waalidkeed*

Qoyska:

• *Waalidiinteedu waxay joogaan dalkoodii. Inaadeerkeedna waa barakace oo waa ay is caawiyaan*

Heerka guulaha iyo waxbarashada: *Dugsiga Hoose*

Aragtida in lacageed: *Kala daadsan. Kharash bilaash ah*

Astaamaha Dhaqaalaha:

- *Aad u adag tahay in la abaabulo dhaqaalaheeda*
- *Waxay had iyo amaahataa lacagta*
- *Waa xubin ka mid ah ROSCA ah*

Ujeeddooyinka:

- *Waxay jeclaan lahayd in ay sii wado waxbarashada*
- *Waxay jeclaan lahayd inay kobciso ganacsigeeda*
- *Waxay doonaysaa in ay qabanqaabiso nolosheeda dhaqaale*

Calaamadaha Sare:

- *Ina adeerteed Xaawa sido kale waa barakac*
- *Wiilkeeda*
- *Waalidiinteeda*



B

WAXAAD DEJISAA YOOLKAAGA LANA, WADAAG QOYSKAAGA

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

B1. Muxuu yahay micnaha maahmaada xigta? "Ma helaayo dabayl u hiilisa haddii uusan qofku garanayn jihada uu u socd."

- ☐ **b.** Waxaad u baahantahay dabayl si aad badda u dul maaxdid.
- ☐ **t.** Waxaa kuu dhibyar inaad si fudud uga midha dhaliso mashruucaga, haddii aad garanayso halka aad u socoto iyo haddii aad dejisato yool xaqiiqada ku salaysan.
- ☐ **j.** Si fudud ayaa doonta loo leexin karaa marka ay dabayli jirto.

B2. Yoolal mustaqbal ma leedahay?

- ☐ **b.** Haa, waxan dejistay oo aan leehay yolasha mustaqbalkayga ee xiliga dhow, kuwa xiliga dhexe iyo kuwa xilliga fog, waxanan si joogta u kaydsadaa lacagtayda si aan u gaadho yoolashayda.
- ☐ **t.** Haa waxan dejistay oo aan leehay yoolal, balse uma baahni inaan ka fikiro, maadaama oo aan haysanin lacag ii suurta galisa inaan gaadho yoolashayda.
- ☐ **j.** Aad bay da'daydu u yartahay, mana gaadhin da'da qofka looga baahanyahay in uu yeesho yoolal.

B3. Waalidkaaga ayaa ku soo wacay, si ay mar labaad kaaga codsadaan lacag ay ku tagaan xaflad ka dhacaysa tuulada

- ☐ **b.** Waxan si degdeg walidkay ugu diraa lacagtaas, maadama loo ay muhim tahay in aad yeesho codsiga waalidkaaga.
- ☐ **t.** Si adag ayaan uga hor imaadaa codsigaas, waanan iska diidaa inaan lacagtaas u diro.
- ☐ **jJ.** Waxan kala hadla arintan, si aan bahidooda u ogaado si fiican, waxanan ogada sida aan u caawin karo, aniga oo maanka ku haya yoolasgayda iyo qorshaha aan ku kaydasanaayo lacagta si aan u gaadho yoolashayda.

A4. Maxaad uga jeedaa qorshaaga aad ku kaydsanayso lacagtaada?

- ☐ **b.** Wax soo saar lacageed.
- ☐ **t.** Qorshe uu iiga dhex muuqdo yoolashayda, kharashka ku baxaya, xalliga aan doonaayo inaan gaadho yoolalkayga, iyo cadadka lacagta aan ku qasbanahay inan kaydsado si aan u gaadho yoolkayga.
- ☐ **j.** Sanduuqa lagu kaydiyo lacagta.

Jawabaha sualaha: B1:t; B.2:b; B.3:j; B.4:t

1. DEJISO YOOLASHAADA AD HIIGSANAYSID

SHARAXAAD

Yool waxaa looga jeeda waxa aad doonaysid inaad gaadho, Dejinta yoolku muxuu kaa caawinayaa inaad falanqaysid waxyaabaha aad doonaysid inaad qabsatid inta nooshahay, iyo inaad ogaadit shaqooyinka aad u baahantahay inaad fulisid si aad natiijo uga keento yoolasha aad dajisatay.

Si aan u fahano sharaxadda, bal marka hore aan ogaano Marry, oo ka mid ah magaca aan u isticmaalayno darasad mowduucyada ku jira dukumentigan.

DARASAD MOWUUDCEEDK 1aad

OO KU SAABSAN MARY

Mary waa 29 Jir. Sababo la xidhiidha iskudhacyo jirary, waxay ka soo qaxday dalkeedi, waxayna halkan ku noolayd 5 sanadood. Ka hor intii ay colaadu gaadhin meel xun, ee ay ku noolayd dalkeedii, waxay guursatay Moussa. Waxay isku dhaleen labo caruur ah-Meshak oo 3 sano jir ah iyo Zoe oo 1 sano jir ah.

Mary shaqadeedu waa dawaarle waxay leedahay tukaanka dawaarka. Shaqadan waxay ka hoos baratay hooyadeed, waana ruux aad u maskax badan oo aad uga midha dhalisa shaqadeeda. Waxay ku takhasustay wax soo saarka dawaarka ee aadka u tayada badan, iyada oo dhinaca kale casharo tababar ah siisa qaxootiga kale. Xiliyadii ugu danbaysay ee xanuunkii saf marka ahaa ee dhawaanahan jiray, waxay guulo badan ka gaadhay iibinta afxidhka amaa maaskiga. Mousa, odayga Mary, wuxuu shaqaale ka yahay tukaan lagu iibiyo qalabka nijaarada. Habeenkii xiliyada danbe, marka ay caruurtu ay seexdaan, Marry iyo Mousa waxay wada fadhiistaan qolka fadhiga si ay uga wada tashadaan qorshahooda mustaqbalka. Maray waxay qorshe balaadhan u diyaarsatay tukaankeeda. Waxay jeceshahay in ay la kulanto fursad ay ku hesho lacag ay ku soo gadato makiinad cusub, casri ah oo tosha dharka. Waxa kale oo ay jeceshahay in ay bilowdo dhoofinta dharka ay tosho. Dhinaca tababarada ay bixiso, waxay jeceshahay fikirka ah ah in ay sii wado bixinta tababarada, iyada oo lacag fii ah ka helaysa qaxootiyada kale, ha yeeshe, waxa kale oo ay ku hamiyaysaa in ay aasaasto hay'ad yar oo tababarada farsadama gacanta siini karta hay'adaha caalamiga ah. Intaas waxa u dheer iyada oo jecel in ay ka qayb-qaadato tababara ganacsiyada yar yar ka caawiya in ay koraan.

Waxay muddo dheer maanka ku hayeen inuu mousa furto dukaan uu asaga leeyahay oo lagu gado qalabka nijaarada. Waxa intaas u dheeraa lacag ay u dirayeen waalidiinta Mary, waxayna tani ahayd arin ay siinayeen mudnaan, waxayna jeclaayeen in ay lacagtan ay waalidku ay ku horumarsadaan gurigooda oo ku yaal dalkoo-dii. Waxa kale oo ay doonayaan in Maray loo iibiyo moobayl cusub, madaama oo uu ka dugoobay midkeedii hore. Waxa kale oo ay ku hamiyayaan in ay gataan dhul, ayna ku dhsitaan guri ay iyagu leeyihiin.

Maxuu yahay hamiga Mary? Hoos ku qor waxyaabaha ay ku hamiyayso!



CAAWIYAHA TABABARKA EE B.1.1

Yoolashayda

Waaligaa ma ka fikirtay inaad yeelato yoolal?
Haddii ay tasi jirto, hoos ku tix yoolashada!







XASUUSNAW

Dhamaan ujeedooyinkaagu waxay yihiim muhim! Ujeedooyinkaaga qaarkood waxay yihiin kuwo aad si deg-deg ah u gaadhi karto, marka la barbardhigo kuwa kale.

2. WAXAAD QOYSKAAGA LA WADAAGTA YOOLASHADA!

KULA TALI INAAD KA WADA HADASHAAN YOOLASHAADA QOYSKAAGA

Aad uga fikir waxa aad donaysid (waxa ay tahay sababta aad u doonaysid), ka hor inta aadan la wadaagin qoyskaaga.

- Ha ka baqin inad qoyskaaga u sheegto yoolashaada. Rag iyo dumar-yar iyo wayn, waxay xaq u leeyihiin in ay dejistaan yoolal ay leeyihiin oo iyaga gaar u ah.
- Ka dhex raadi qof ku garab istaaga qoyskaaga: Qof aad hada ka hor aad la hadashay oo ku garab istaagi kara, qof ka mid ah qoyska oo si gaar ah loo wada xurmeeyo.
- Afadaada iyo/amaa xubnaha kale ee ka tirsan qoyska u sheeg yoolashaada, adiga oo xulanaya xiliga ku haboon ee ad heli karto.
- Isku kalsoonow marka qoyskaga aad u sheegayso yoolashaada, waxaanad dhegaysata fikradaha dadka kale, adiga oo aan ka dhex galaynin marka ay hadlayaan.
- Xurmee qoyskaaga, waxna ka badal mowqifkaaga.
- Gorfee maraxaladaha, marka uu dhaco is afgaranwaa, raadina xal meel dhexe ah oo faaiido u leh cid kasta oo ka mid ah qoyska.

YEEL...	HA YEELIN
• Isku kalsoonaw	• Maqane jooge, islawayn, hadal kulul
• Si cad u sheeg waxa ad donaysid	• Qaylo badan
• Dhagayso fikirka qofka ad wada jirtaan	• Qof oo laga garab hadlo
• Bogaadi fikirka ay soo jeediyaa dadka kale	• Xanaaq
• Muuji ixtiraam	• Fudayka ama cayda
• Noqo qof tanasul leh oo degan	• Hal arin ka hadalkeda oo lagu celceliyo marar badan
• Soo jeedi fikirkaaga, iskasta oo tixgalinayso qofka kale	• In si deg-deg ah loo diido fikirka qofka kale
	• Isdifaaca
	• Dulqaad yari



3. KU SAME DARASAD KHARASHKA KAGA BAXAYA INAAD GAADHO YOOLASHAADA, IYO FAAIIDADA KUUGU JIRTA

Ma ogtahay kharashka kaaga baxaya yoolashaada?

Ma ogtahay kharashka kaaga baxaya yoolkashaada? Hadii aad ogtahay, qor kharaska kaaga baxaaya yoolashada aad kuu qoran amaa kuu dejisan. Haddii aadan ogayn, waxaa muhim kuu ah inaad xisaabisid oo aad ogaatid kharashkaas . Waa sida kaliya ee aad ku ogaani karta inta uu le'egyahay kharashka kaaga baxaaya inaad gaadhid yoolashaada. Markaas waxaad qiyaasi karta kharashka kaa baxaya, waxanad marka danbe sixi karta kharashka kaa baxaaya

Kadib, waxaad yoolashaada u kala horaysiisa sida ay u kala mudanyihiin, adiga oo yoolasha muhimka ah ku suntaya tirada 1, kuwa kuxiga ee muhimka ahna 2, ayaad sidaa u wadaysa.

TIRSIGA	YOOLKA SHAQSIYEED/QOYS	YOOL	KARASHKA KU BAXAYA

XUSUUSNOW

Guud ahaan yoolashu waxay yihiin kuwa si fudud looga jibo keeni karo amaa la gaadhi karo, haddii aad horay uga sii baarandegto, ood soo aruurisid xogaha aad ku go'aan qaadanaysid. Waxaa muhim ah in aad daristo inta ay le'egtahay kharashka musqatabalka kaaga bixi doona si aad u gaadho goolashaada. Mararka qaar waxaaba muhim ad in si taxadar leh loo darso kharashka (iyada oo macluumaad laga helayo gooobaha wax laga iibsado, iyo iyada oo la ogaanaayo raadka isbadalada ku yimaada qiiimaha alaabta ee sayladaha).

Ha hilmaamin xaqiiqada ku aadan isbadalka ku yimaado qiimaha alaabta marka wakhti la joogaba! Sidaas darteed, waxa muhim an in aad xadayso faaiidada a oo samaynayso iyo dhigaalka, iyo ay kuugu suurta gasho inaad ka gaashamato korodhka sanadaha danbe kaaga imaanaya qiimaha uu kaaga gacaayo gaadhista yoolashada.

4. DIYAARSO QORSHAHA DHIGAALKA SI AAD U GAADHO YOOLASHAADA

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 2 aad

QORSHAHA DHIGAALKA LACAGTA EE JOOSEF

Josef wuxuu ka shaqeeya mashruuca wax soo saarka khudaarta ee qaxootiga. Afadiisa Martha waxay si maalinle ah ah ugu shaqaysaa dadka ku nool xerada ee ku guulaystay in ay hirgaliyaan mashruuc digaag ah. Lamaanahani waxay iskudhaleen 5 caruur ah oo degan xerada qaxootiga. Josef iyo Martha waxay si joogta ah uga hadlaan waxa uu noqonaayo mustaqbalkoodu. Waxayna dejisteen oo ay leeyihiin yoolal badan oo ay doonayaan in gaadhaan mustaqbalka, hasa yeeshe, Josef wuxuu garanayaa in ay suurta gal ahay in la wada gaadho dhamaan yoolashaas. Sidaas darteed, Josef wuxuu dibu eegis ku sameeyay mashruucooda.

Wuxuu maqlay in dadka xerada la siin doono woxoogaa joodariyo ah qoys kasta, laakiin waxa uu doonayaa inuu si aad ah u hubiyo in joodari cusub u helo xubin kasta oo ka mid ah qoyskiisa. Waxa uu sidoo kale ogaaday in qalabka uu u isticmaalayo hindisaha korinta khudradda inay yihiin kuwo aad u duugoobay oo gacantiisa dhaawacaya. Waxa uu jeclaan lahaa in mar uun u soo iibsado ugu yaraan majarafad/badeel cusub.

Qorshaha fog, wuxuu doonayaa inuu aasaasto beer digaag oo uu isaga u gaar ah uuna halkaa kala samaysto Martha ganacsi qoys ahaaneed. Joseph ayaa qiimeeyay kharashka mashruuc kasta una dajiyay mudo taariikheed ku aadan wakhtiga uu jeclaan lahaa inuu gaadho yoolashiisa. Wuxuu xisaabyay qadarka lacagta uu u baahanyahay inuu kaydiyo qorshaha bilkasta. Joseph wuxuu sawiraa waxa aan u naqaano qorshayaal kaydin.- Tani waxa ay isaga siisay sawir sax ah waxa uu u baahan yahay si loo kaydiyo bil kasta si loo gaadho yoolkiisa.

Hada bal aan fiirino qorshaha lacag kaydsiga ee u dejistay Josef!

QORSHAHAYGA KAYDSIGA LACAGTA

Yoolkayga	Xilaga aad doonaysid inad gaadho yoolkan	Kharshka ku baxaya yoolkan	Tirada bilaha ee ka sokeeya xiliga aan gaadhayo yoolkayga	Tirada bilaha ee ka horeeyo xiliga gaadhista yoolkayga	Cadadka lacagta ah ee aan u baahnahay in an bil kasta kaydsado si aan u gaadho yoolkayga
Yoolasha xiliga dhow (ka yar 12 bilood):					
Inaan 6 furaash u gado qoyskayga	Bisha March ee sanadkan	$90	3 bilood	Xerada qaxootigu waxay qoys kasta siinaysaa ugu badi sadex furaash	$15
Yoolasha xilliga dhexe (1 ilaa 3 sano):					
Si aan u gato badeel cusub	Bisha Januwari ee sanadka danbe	$60	12 bilood		$5
Qorshaha xiliga fog (mudo ka badan 3 sano):					
Si ay u aasaasan mashruuc digaag oo ay iyagu leeyihiin	Januwari 3 sanadood ka dib	$2980	36 bilood	Deeq dhan $1000 oo ka timada hay'ad samafal oo taakulaysa qaxootig	$55
Wadarta guud ee cadadka lacagta ee aan u baahnahay inaan dhigo bil kasta si an u gaadho yoolashaydas (Waradta guud waxay ku xusantahay kolomka bidixda ee shaxda):					$75

MUHIM: Kaddib marka uu gaadho yoolkiisa xiliga dhow, Josef wuxuu u baahan doona isbadal inuu ku sameeyo qorshihiisa kaydinta lacagta iyo lacagta uu bil kasta u qoondeeyo dhigaalka si uu u gaadho yoolashiisa kale.

CAAWIYAHA TABABARKA EE B1.2

Qorshaha kaydinta lacagta

Hadda waa tarahaaga!

Hadda aan isku soo koobno iyada oo shaxda hoos ku xusan aan ku buuxinayno macluumaadyada aad maanka ku hayso ee ku aadan yoolasha, waxa sida ay u kala mudan yihiim loo aad kala horaysiinayaa, kharashka, xiliga ama taariikhda aad doonaysida inaad gaadhid yoolasha iyo ilaha dakhli kale ee aad isleedahay waxaad ka helaysa lacag aad ku maalgaliso yoolasha.

▶ **Caawiyaha tababarka**

B1.2

QORSHAHAYGA DHIGISTA LACAGTA					
	Taariikhda aan doonaayo inaan gaadho yoolashayda	Kharashka ku baxaya in la gaadho yoolasha	Tirada bilaha oo ka dhiman xilga la gaadhayo yoolasha	Fursada kale ee maal galinta (haddii loo baahdo)	Cadad intee le'e oo lacag ah ayaan u baahanahay in aan kaydiyo bil kasta si aan u gaadho yoolashayda
Yoolkayga/shayda xiliga dhow wuxuu yahay/waxay yihiin					
Yoolkayga/shayda xiliga fog wuxu yahay/waxay yihiiin					
Qorshahayga xiliga dhaw ee la la wadaaga qoyskaygaku waxay hihiin:					
Qorshahayga xiliga fog ee la la wadaaga qoyskaygaku waxay hihiin:					
Wadarta guud ee lacagta aan u baahnahay inaan kaydiyo bil kasta si aan u gaadho yoolashady (waxay isku gaynteedu ku cadahay kolomka midigta ee shaxdan):					

TARAHAAGA

Waxan u baahnahay inaan haydiyo
. . . . . .
bil kasta si aan u gaadho yoolashadayda

Taxadar sameel! Waa in aad dib u eegis ku samayso yoolashadaa, Haddii aysan kuu suurta galaynin, inad hesho lacag ku filan haydiso bil kasta:

Adiga oo yaraynaaya kharashka, amaa meesha ka saaraya qaar ka mid ah yoolashaada, amaa dib u dhigaaya xiliga ad doonayso inad gaadho qaar ka mid yoolashaada.

Waxaad taas samayni kartaa adiga oo midnaan kala siinaya ama kala horaysiinaya yoolashaada. Tusaale, ma doonaysid inaad badasho yoolashada 1aad iyo 2aad, balse waxad doonaysaa inad badasho yoolashada 3aad iyo 4aad.

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 3 aad

JOSEF WUXUU SHAAHA LA CABAA ASAD

Marka shaaha uu la cabaayo saxiibkiis Asad, Josef wuxuu dhaha: waxan go'aansaday inan wax ka sheego Maskaxdayda goobta aan ka shaqeeyo ee marshruuca soo saarista khudaarta ee qaxootiga, wuxuuna sheega inuusan ku faraxsanayn mushaarka uu qaato. Sidaas daraadeed, wuxuu isku dayayaa inuu kaydsado xooga lacag ah oo uu isticmalo mustaqbalka, haddii uu go'aansado inuu isaga tago shaqada. Waxaa ku adag inuu Marta oo ah xaaskiisa u sheego xaaladan, maadaama oo ay cidhiidhi ku tahay lacagtu, in kasta oo ay Marta fahansantahay waxa uu maaganyahay nidkeedu.

Asad wuxuu dhinaciisa la wadaagay arintisa, isaga oo go'aansaday inuusan la wadaagaynin xaaskiisa. Wuxuu kaligiis dusha u ritaa caqaqbadaha haysta ee ku aadan hoos u dhaca dhaqaalaha, wuxuuna hoos u dhigay kharashkiisa si uu wax ugu biiriyo miisaaniyada qoyskiisa.

Xataa markii uu hoos u dhigay kharashkiisa ka dib, waxaa mararka qaar soo waajahda lacag yari, mana awoodo inuu soo iibiyo raashinka ku filan ee ay u baahanyihiin qoysku. Maadama oo ay arinta ku cuslaatay, wuxuu dhibtan u raadinayaa xal.

CAAWIYAHA TABABARKA A2.1

Waxqabadka Door-ciyaareedka:

Khilaaf iyo wada xaajood

KHILAAFKA 1AAD

Waxaa mudo aad u dhaw aqal galaaya Farid, oo saxiib la ahJosef oo ku nool xerada qaxootiga. Josef wuxuu Asad iyo saxiibadiisa kale ee ku nool xerada kala tashanayaa, waxa ay noqonaysa hadyadooda looga baahanyahay in geeyaan arooska. Asaxaabtu waxay dhamaantoo qabaan in ay iska aruriyaan lacag badan, maadama oo ay arintu tahay hadyad la gaynaayo aroos, uu Fariid baahi wayn u qabo. Josef wuxuu doonayaa inuu bixiyo qaybtiisa, balse wuxuu qabaa in cacdadka lacagta ee lagu riixayo inuu bixiyo tahay mid aad ugu badan. Wuxuu dhinaca kale ka cabsi qabaa inay ay saxiibadiis ay u maleeyaan inuu yahay bakhayl. Maxaa la gudboon inuu sameeyo?

Waxaad ka shaqaysa oo ad soo saarta ruwaayad matalaysa xidhiidhka dhex maray dadka kor ku xusan, waxaanad la timaadda xalka arrinta aad ka gaadhay. Ugu yaraan qof ka mid ah dadka matalaaya ruwaayada waxaa looga baahanyahay inuu raaco hadba wada hadalka midho dhalka ah.

KHILAAFKA 2AAD

Mary, dadaal badan kadib waxay diyaarisay xooga lacag ah oo ay ku balaadhinayso ganacsigeeda. Waxay hooyadeed kula hadashada telefanka. Hoyadeed waxay ka codsataa in ay xooga lacag ah daymiso Marry habaryarteed oo doonaysa in ay bilowdo ganacsi cusub. Maadaama oo ay Mary u baahantahay dhamaan lacagta ay Kaydsatay, ma doonayso in ay bixiso wax dayn ah. Dhinaca kale, ma doonayso in ay diido codsiga uga yimid habaryarteed oo ah hooyadeed walaasheed. Maxaa la gudboon in ay yeesho?

Waxaad ka shaqaysa oo ad soo saarta ruwaayad matalaysa xidhiidhka dhex maray dadka kor ku xusan, waxaanad la timaadda xalka arrinta aad ka gaadhay. Ugu yaraan qof ka mid ah dadka matalayaasha ruwaayada waxaa looga baahanyahay inuu raaco habka wada hadalka midho dhalka ah.

KHILAAFKA 3AAD

Meshak wuxuu had iyo Jeer kaydsada lacag uu ugu talagaly in uu wax kaga qabto ariimaha degdegga ah iyo inuu ku balaadhiyo ganacsiga qoyskiisa. Mida ka mid ah gabdhaha uu dhalay ayaa waxay ku adkaysataa in la siiyo xooga lacag ah oo ay ku iibsato labis cusub, maadama oo ay muda badani ka soo wareegtay markii ugu danbaysay ee labis cusub loo iibiyo. Meshak wuxuu ogyahay in ay inantiisu jeceshahay darka, balse waxa kale oo uu u baahanyahay inuu lacag kaydiyo si kastaba ha noqote. Maxaa isaga la gudboon?

Waxaad soo saarta ruwaayad matalaysa xidhiidhka dhex maray dadka kor ku xusan, waxaanad la timaadda xalka arrinta aad ka gaadhay. Ugu yaraan qof Ka mid ah dadka matalayaasha ruwaayada waxaa looga baahanyahay inuu raaco wada hadalka midho dhalka ah.

KHILAAFKA 4AAD

Jane waxay ka shaqaysa in ay dubto wax soo saarkeeda. Waxay bil kasta ay dhigtaa xoogaa lacag ah, Xataa haddii ay yartahay. Waxa kale oo ay ku dadaasha in ay qoyskooda lacag u dirto marka ay awoodo, waxayna u sheegtaa in ay kaydsadaan lacag ay wax kaga qabtaan arimaha deg dega ah. Marka ay hooyadeed xanuunsato wuxuu aabiheed qirtaa inuusan dhigan wax lacag ah, sidaas darteedna uusan waxba haysanin. Taasna waxay ku keentaa niyad jab iyo xanaaq. Maxaa iyada la gudboon?

Waxaad soo saarta ruwaayad matalaysa xidhiidhka dhex maray dadka kor ku xusan, waxaanad la timaadda xalka arrinta aad ka gaadhay. Ugu yaraan qof ka mid ah dadka matalayaasha ruwaayada waxaa looga baahanyahay in uu raacp wada hadalka midho dhalka ah.

TALO-BIXINO MUHIM AH

- Waxaa kuu fudud inaad gaadho qorshaha noloshada, haddii aad garanayso waxa aad doonayso, aandd dejisato amaa diyaarsato yoolal cad oo aad gaadho.
- Yoolasha qaar waxa ay yihiin ku si deg deg ah loo gaadhi karo, halka kuwa kalian ay uu gaadhintaakooda qaadanayo sanado xitaa tobanaan sano. Yoolasha waa in loo kala saara: kuwa mudada dhaw, kuwa mudada dhexe iyo kuwa mudada fog.
- Wuxuu isbadal ku yimaada yoolasha ay dadku samaustaan inta ay nool yihiin, iyada oo qoysaska kala duwana ay leeyihiin yoolal kala duwan. Waxaa muhin ah in xubnaha qoyska loo sameeyo yoolal kala duwan oo la jaan qaada rabitaanka qof kasta.
- Xidhiidhka fiicani wuxuu muhim u yahay qoysk kasta, siiba qoysaska ay qaraabadooda ku nool yihiin magalooyinka fogfog, gobolada ama dalka.
- Inuu qofku si cad u qeexo yoolkiisa uuna kala saaro khuraafaadka iyo xaqiiqada, marka uu dejinaayo yoolka, waxay u fududaysa inuu gaadho yoolashiisa.
- Marka aad darsayso qiimaha iyo kharashka ay ku kacayaan inad gaadho yoolashaada, waxa muhim ah in aad hesho macluumaad sax ah oo lagu kalsoon yahay.
- Waxa kale oo aad u baahantahay in aad dib u habayn ku samayni karto yoolashaada, haddii qiima uu ku kacayo uu badayahay, waxad u bahantay inaad isbal kiu samayni karta (marka uu isbadal ku yimaado xaaladaada lacageed iyo mida bulsho).
- Inaad maanka ku hayso yoolashada, waa wadada dhabta ah ee aad ku gaadhi karto yoolashaada
- Inaad diyaarsato qorshe aad ku kaydsato lacatu wuxuu kuu sahlayaa inaad si fudud u gaadho yoolashaada.

NOTES

T

MAAREE LACAGTAADA SI MASKAXAYSAN

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

T1. Waa dhamaadka bishIa; waxan hada qaatay mushaarkaygiiI:

- ☐ **b.** Waxan durbadiiba tagay suuqa dharka si aan u gatgo Jakeet aan arkay maalin hore.
- ☐ **t.** Waxan dhigtaa qay ka mid ah mushaarka, si aan u gaadho yoolashayda.
- ☐ **c.** Waxan soo iibiyaa hadyad qaali ah oo aan geeyo xaflada dhalashada saxiibkayga ugu fiican saxiibaday.

T2. Miisasaniyada waxa looga jeeda:

- ☐ **b.** Aalad loo isticmaalo goaaminta, qorshaynta iyo isticmaalka lacagtaada si aah u gaadhid yoolashaada.
- ☐ **t.** Waa waraaq lagu diiwaangaliyo kharashka.
- ☐ **j.** Waa shax.

T3. Maxay yihiin saddex qaybood ee muhikka ah ee ay koobantahy miisaaniyadu?

- ☐ **b.** Taariikhda, dakhliga iyo kharashka.
- ☐ **t.** Dakhliga, kharashka, iyo kaydka (dhigaalka lacagta).
- ☐ **j.** Kharashka, dakhliga iyo saxeexa.

T4. Sidee ayaan ula socdaa misaaniyadayda?

- ☐ **b.** Waxaa isaaran masuuliyada badan, sidas darteed, suurtgal iima aha inaan la socdo miisaaniyadayda.
- ☐ **t.** Anigu ma diyaarsado wax miisaaniyad ah, sababta oo ah waxan aaminsanahay inaan calafkayga qaadayo.
- ☐ **j.** Waxa adeegsata waraaqda la socodka si aan diiwaangaliyo kharashkayga

Jawaabaha sualaha: T1:b; T.2:b; T.3:t; T.4:j

1. SI XIKMADAYSAN U BIXI LACAGTADA!

SU'AALO

- Ma waxaad tahay qof jecel inuu lacagtiisa bixiyo mise qof jecel inuu kaydsado?
- Tusale, inta badan ma iska dhaafta waxyaabaha aad doonaysid?

QEEXID

Kaydsiga waxaa looga jeedaa lacagtaada oo aad gabi ahaan wada bixin, iyo inaad dhigato qayb ka mid ah lacagtaada si aad mustaqbalka u gaadho yoolal muhiim ah. Waxaa looga jeedaa inaad dhigato in yar amaa qayb badan oo ka mid ah lacagtaada oo si joogta ah amaa mar mar.

LAYLIS

Adiga oo ka duulaaya marxaladaada dhabta ah, kala dooro kharashka muhimka ah (baahiyaha) iyo kharashka laga maarmi karo (rabitaan). Goobaab sawirka ku aadan baahiyaha (asaasiga) si aad uga soocdo rabitaanada (waxyabaha laga maarmi karo).

CAAWIYAHA TABABARKA T1.1

Kaarasha rabitaanka iyo baahiyaha

Tikitka bakhtiya nasiibka



Dhug dhuglay



Saxan raashin ah

Soo saarista lacagta bangiga



Guri dayran



Dugsiga

Telefon casri ah

Biyo

Simkaar

Booqashada dhakhtarka

Laydhka

Gasaacad soodha ah

Tikitka shaneemada



Iskiriim

Kabo qaali ah

Sigaar



Tv falaat ah



Kameerad

Nidaamka cod baahinta

MP3 da la dhagaysto

Waxaan jeclaan lahaa inaan gato....

Baahiyahayga	Intee inleeg baa igaga baxaysa?
Baahiyaha guud	
Rabitaano	**Intee inleeg baa igaga baxaysa?**
Rabitaanka guud	

FIIRO GAAR AH!

Samee taxadar badan! Mararka qaar waxaa dhacda in waxa baahi (asaasi) u ah qof uu uu rabitaan (wax laga maarmi karo) u noqon karo qofka kale.
Tusaale, Josef wuxuu mobaylku u yahay baahi amaa asaasi, maadama oo uu ku kala wado ganacsigiisa, halka uu Meshak u yahay rabitaan maadaama oo u adeegsado inuu kula hadlo asaxabtiisa iyo qoyskiisa.

Ma haystaa lacag igu filan oo aan ku iibsado dhamaan waxyaaba liiska iigu qoran?

☐ Haa ☐ Maya

Hadii aan haysan lacag igu filan , waxaan go'aasada inan iska daayo rabitaanadayda hoosta ku xusan:

NOTES

Akhri qisada lagu matalyo magacyada hoos ku xusan, kadibna waxaad soo bandhigtaa waxa aad ka fahantay. Sheeg waxa ay si ka duwan u samayn lahayeen?

DARASAD MARXALADEEDKA 1aad

WAXAA JOSEF IYO MARTHA SOO FOOD SAARAY XAALAD DEG-DEG AH

Josef wuxuu ka shaqeeya marshruuca beerista khudaarta ee qaxootida. Xaaskiisu waxay yoomiye ugu shaqaysa qof qaxooti ah oo ah oo hirgaliyay mashruuc digaag. Waxay isku leeyihiin 5 caruur ah oo ku nool xerada qaxootiga. Waa qoys taxadar badan, balse leh dakhli yar, waxay mararka qaar ku dadaalaan in gaadhaan ujedooyinkoda. Todobaadkii tagay, waxaa xanuunsatay Martha, iyada oo sidoo kalena ay xanuusadeed 2 ka mid ah curuurtooda. Inkasta oo ay daawo ka heli kareen xerada qaxootiga, waxay si deg-deg ah ugu baahdeen daawo, madaama oo ay u welweleen ilmahooda, sidaas darteed waxay go'aansadeed in ay daawo ka soo iibsadaan farmasiga u dhaw, waxayna si deg-deg ah ku heleen daawadii. Maadama oo la soo gaadhay dhamaadkii bisha, ayna soo foodsaartay kaash yaraan, waxay u baahdeen in lacag ka soo daysadeen Josef saxiibkii. Josef wuxu mushaarkiisa qaadanayaa usbuuca soo socda. Wuxaa saaxiibkiina ka helay dayn dhan 5 doolar, wuxuna u balan qaaday inuu dayntas oo ku daro 1 doolar isugayn 6 doolar uu ka bixinaayo mushaarkiisa. Lacagta uu daynsaday wuxuu daawo kaga gatay farmasiiga. Waxaa deg u ladnaaday ilmihii ka dib markii ay qaateen daawada.

DARASAD MARXALADEEDKA 2aad

WAXAY DHIBAATO SOO KALA DHEX GASHAY MIRIYAM, MESHAK IYO DERISKA SARA

Meshak iyo Sara waxay xidhiidh dhow la leeyihiin dariskooda Miriam iyo John. Waxay leeyihiin dhul beereed sidooda oo kale, hasa yeeshe waxay Miriyam maamushaa Koofeerle yar, oo ku yaala jidka suuqa ganacsiga oo ku dhaw gurigooda. Tukaanka miriyam wuxuu aakhirkii noqday mid aad loogu guulaystay oo laga faaiiday. Waxay baraday sida loo tashiilo lacagta, waxayna marar helashay faaiido, taas ay hesho ilaa hada. Madaama oo aysan fikir ka haysan hay'adaha lacagta bixiya waxay dakhliga ay hesho si joogta ah u siini jirtay ninkeeda John, si uu lacagtaas ugu xareeyo akoontiga bangiga. Maalin maalmaha ka mid waxay ku soo laabatay xaafada, iyada oo doonaysa in ay John ka codsato inuu xooga lacag ah uga soo saaro akoonka ganacsigooda, maadaama oo ay doonaysay in qalab cusub ugu soo iibiso meheradeeda. Markii ay xaafada soo gaadhay, waxay ogaatay inuu ninkeedu uu lacagtii ku gatay gaadhi. Markii ay ka codsatay lacagtii ay u baahnayda, wuxuu u sheegay inaysan hadda suurta gal ahayn in meheradeed loo gado wax qalab ah. Miriam way xanaaqday, waxayna aaday bangiga si ay u hubiso akoontiga iyo lacagaha laga saaray. Waxay ogaatay inuu akoontigu uu yahay mid ku furan magaca ninkeeda sidaas darteedna aysan ka saari karaynin, xoogaga lacagta ah oo ku hadhay. Aaad ayay uga niyad jabtay.



TILMAAMO KU SAABSAN KAYDSIGA LACAGTA

• Iska jar xooga yar oo lacag maalin kasta ama todobaad kasta.
• Ha iibsanin shay cusub, haddii kuwa aad haysato yihiin kuwa aad sii isticmaali karto, amaa aad dayactir ku samayni karto.
• Yaree hadyada aad u soo iibisid qoyskaaga. Kala hadal marka hore, lana heshiis qoyska si ay gacan ku siiyaan.
• Haddii ay kuu suurta gasho yaree lacagta aad ku bixiso munaasabadaha iyo xafladaha dhaqanka.
• Lacag yar ku qaado jeebka, amaa boorsada gacabta ee lacagta lagu qaato (Dhiga lacagtga meel amaan ah, guriga amaa bangiga).
• Haddii aad lacag u dirayso waalidkaa amaa qoyskaaga, ha wada dirin dhamaan lacagta aad haysata, u reeb lacagtaada baahiyaaga iyo arrimaha degdegga ah.
• Maankaaga had iyo jeer ku hay yoolashaada fog si aad u Xasuusatid sababaha aad u kaydsanayso lacagta!

FIRIIMAHA MUHIIMKA AH

- Waxaa lagaaga baahanyahay in aad kala saarta kharshka aasaasiga ah iyo midka aad ka maarmi kartid.
- Lacagta loo kaydiyo arimaha deg-degga ah: Waa kaydsi aasaasi ah, waa mid aah sina looga maarmi karaynin.
- “Si fiican u maraa lacagta dadka kale soo gashay”.
- Micinaha kaydinta lacagtu waa rabitaanka deg-dega ah oo aad iska dayside, adigoo lacag kaydsanaya si aad u gaadho yoolashaada mustaqbalka.
- Kaydinta waxay kuu suurta galinaysaa inad noqota amaan.

NOTES

2. DIYAARI MIISAANIYADAADA!

CAAWIYAHA TABARKA T.2.1

Muuqalada loo adeegsado diyaarinta miisaniyada (ee dadka waxna qorin waxna akhriyin ee saboolka ah)












CAAWIYAHA TABARKA T.2.2

Misaniyad la buuxinaayo

Bal aan wax yar ka ogaano Mary iyo sida ay u diyaarsato miisaaniyadeed.

MISAANIYADA QOYSKA MARY

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka
Dakhliga joogtada ah	
Mushaarka Mousa (dukanka qalabka nijarada)	
Lacagta ay ku biiriso miisaaniyada qoyska	
Isugaynta dakhliga joogtada ah	
Dakhliga isbadala (aan joogtada ahayn)	
Dakhliga laga helo iibka alaabooyinka guryaha iyo xafiisyada n	
Isugaynta dakhliga isbadala	
WADARTA GUUD EE DAKHLIGA	

KHARASHKA	
Kharashka aasaasiga (baahiyaha)	
Kiro	
Gaaska cunada lagu karsado, biyaha laydhka	
Cunada	
Safarka iyo kharashka gadiidka (gaadhi ama gaadiidka dadwaynaha)	
Daryeelka caafimaadka/daawada	
Isgaadhsiinta (biilka telefoonka)	
Fiida dugsiyada barbaarinta caruurta (KG)	
Isugaynta kharashka baahiyaha	
Kharashyada laga maarmi karo (rabitaanka)	
Isugaynta kharshaka (rabitaanka)	
ISUGAYNTA KHARASHKA	

WADARTA GUUD EE KHARASHKA (baahiyaha iyo rabitaanka)	
DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYDKA)	

DARASAD MOWDUCEEDKA 3AAD

MIISAANIYADA QOYSKA MARY (qaybta 1aad)

Shalay waxay ku beegnayda maalinta ugu danbaysa bisha, waxayna Mary iyo Moussa go'aasadeen in ay dibu eegis ku sameeyaan dakhligooda. Marka hore waxay fiiriyeen dakhliga iyo kharashka ganacsiga Mary. Mary waxay dib eegisteeda ku soo gunaanaday ay heshay amaa soo galay dakhli dhan 950 oo doolar. Sidii ay yeeshay bishi la soo dhaafay oo kale, waxay Mary go'aansatay in ay 800 oo doolar ay u goyso kharashka qoyska, ayna 150 doolar ku biiriso miisaaniyadeed u gaarka ah. Mushaarka uu Moussa ka helo dukaanka alaabta niyaaradu wuxuu dhanyahay 600 oo doolar. Waxay go'aamiyeen in ay iibshaan miis uu moussa dayactir ku sameeyay xiligii uu shaqada faraaqada ka lahaa. Qof ka mid ah jaarka ayaa miiskaas kaga iibsaday 70 doolar.

DARASAD MOWDUCEEDKA 4AAD

MIISAANIYADA QOYSKA MARY (qaybta 2aad)

Ka dib markii ay Mary iyo Mousa ay dib u eegis ku sameeyeen dakhligooda bisha xigta, waxay bilaabeen in ay qorshe u sameeyaan sida ay u isticmaalayaan amaa u bixinayaan lacagta. Marka hore waxay bixini doona kirada oo dhan (220 doolar). Kadibna gasska la wax lagu karsado iyo korontada ay kaga baxayso (80 dolar). Cunada waxay ku qiyaseen in ay ku baxayso 350 dolar, gaadiidka 90 dolar, daawada 50 dolar. Lacagaha horay la qadimo ee mobaylku waa ku dhawad 30 dolar. Dugisga barbaarinta caruuta ee loogu daryeelo caruuta waxay ku bixin doonaam 100 dolar oo ay ka bixiyaan labada caruurta ah ee ay leeyihiin. Mary aabaheed waxay u diri doonaan 100 dolar sida ay sameeyaan bil kasta. Waxa kale oo ay go'aamiyeen in ay la casriyeeyo mobaylka Marry, wuxuuna ku kacayaa 120 dolar.

CAAWIYAHA TABABARKA T.2.3

Misaniyad la buuxinaayo

MIISAANIYADA QOYSKA MARY

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka
Dakhliga joogtada ah	
Mushaarka Mousa (dukanka qalabka nijarada)	$600
Lacagta ay Mary ku biiriso miisaaniyada qoyska	$800
Isugaynta dakhliga joogtada ah	$1400
Dakhliga isbadala (aan joogtada ahayn)	
Dakhliga laga helo iibka alaabooyinka guryaha iyo xafiisyada n	$70
Isugaynta dakhliga isbadala	$70
ISUGAYNTA DAKHLIGA	**$1470**

KHARASHKA	
Qiyaasta qarashka aasaasiga (baahiyaha)	
Kirada	$220
Gaaska wax lagu karsado, biyaha, laydhka	$80
Cunada	$350
Safarka iyo gaadiidka (gaadiidka dadwaynaha)	$90
Daryeelka caafimaadka / daawada	$50
Isgaadhsiinta (diilka telefonka)	$30
Fiida dugsiga barbaarinta caruurta (KG)	$100
Lacagta loo diyaayo Maryhooyadeed	$100
Isugaynta kharshka (baahiyaha)	**$1020**
Kharashaka laga maarmi karo (rabitaanka)	
Mobaylka cusub ee loo iibinaayo Mary	$120
Isugaynta lacagta (rabitaanka)	$120
ISUGAYNTA KHARSHAKA	**$1140**

DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYDKA)	**$330**

CAAWIYAHA TABABARKA T.2.4

Miisaaniyada la buuxinaayo

MISAANIYADA GAARKA AH (SHAQSIYADEED) EE MARY

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka
Dakhliga joogtada ah	
Isugaynta dakhliga joogtada ah	
Dakhliga isbadala (aan joogtada ahayn)	
Isugaynta dakhliga Mary	950
Isugaynta dakhliga isbadala	950
ISUGAYNTA DAKHLIGA	**950**

KHARASHKA	
Kharashka aasasiga ah (baahiyaha)	
Lacagta lagu daray miisaaniyada qoyska	800
Fiida tababarka xirfada ganacsiga	40
Isugaynta kharashka (baahiyaha)	**840**
Kharashka laga maarmi karo (rabitaan)	
Dharka laga tolanayo labiska	20
Isugayn (rabitanka)	20
ISUGAYNTA KHARASHKA	**860**

DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYDKA)	**90**

SUAALO

- Waligaa ma diyaasatay miisaaniyad?

  ☐ Haa ☐ Maya

- Hadii aad diyaarsatay, ma ku diyaasay qoraal, mase ku haysay maskaxdaada?

  ☐ Qoraal ayaan ku diyaarsaday ☐ Maskaxda ayaan ku hayay

QEEXID

Miisaaniyadu waa aalad lagu go'aan qaato, qorshe lagu diyaarsho, anad ku isticmaasho lacagtaada si aad u gaadho yoolashaadada.

LAYLIS

Tabarbkan waxad ku soo aragtay sida ay Mary iyo qoyskeedu ay u diyaarsheed miisaaniyadooda. Hada waa tarahaagii! Sidaas u diyaari miisaaniyadaada!

Taxadar same! Laynka « Dakhli – Kharashka » ee ku xusan dhamaadka shaxdu waa inuu noqtaa mid bosatiif (togan). Haddii uusan sidaas ahayn waxay ka dhigantahay, inaadan haysanin lacag kuga filan oo kaa daboosha dhamaan kharashkaaga Waxa kale oo ay ka dhigatantahay inaadan haysanin wax lacag ah oo aad kaydisid si aad u gaadhid yoolashaada.

Haddii aad saadaalinayso in aad bilo yar gudahood ku bixinayso kharash badan, waa in aad bilowdaa inaad lacag dhigato xilli kasta oo ay karaysid, si aad awood ugu yeelato inaad bixiso kharashka faraha badan, inad uga dhex bixin miisdaaniyadaada wax ka badan.

CAAWIYAHA TABABARKA T.2.5

Miisaaniyadayda

MIISAANIYADAYDA

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka
Dakhliga joogtada ah	
Isugaynta dakhliga joogtada ah	
Dakhliga isbadala (aan joogtada ahayn)	
Isugaynta dakhliga isbadala	
WADARTA GUUD EE DAKHLIGA	

KHARASHKA	
Kharashka aasaasiga (baahiyaha)	
Kiro	
Gaaska cunada lagu karsado, biyaha laydhka	
Cunada	
Safarka iyo kharashak gadiidka (gaadhi ama gaadiidka dadwaynaha)	
Daryeelka caafimaadka / daawada	
Isgaadhsiinta (biilka telefoonka)	
Fiida dugsiyada barbaarinta caruurta (KG)	
Isugaynta kharashka (baahiyaha)	
Kharashyada laga maarmi karo (rabitaanka)	
Isugaynta kharshaka (rabitaanka)	
ISUGAYNTA KHARASHKA WADARTA GUUD EE KHARASHKA (baahiyaha iyo rabitaanka)	

DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYDKA)	

Bal aan halkii ka sii amba qaadno arinka Mary

DARASAD MARXALADEEDKA 5aad

DABEECADA MISAANIYADA QOYSKA (QAYBTA 3AAD)

Waxay u muuqata in ay arin la soo gudboonaayta Mary iyo Mousa. In kasta oo ay si taxadar leh u diyaariyeen qorshahooda, waxaad misaaniyadooda raad adag ku reebay saf marka COVID-19. Maray waxay iibisay alaab ka yar intii ay filaysay in ay iibiso, sidaas darteed halkii ay 800 dolar ay ku daraysay miisaaniyada qoyska, waxay hadda awooda in ay kaliya ku darto 600 dolar. Waxa intaas u dheer, jaarka oo dib ugu soo celiyay alaabtii guriga ee ay ka iibisay, maadaama oo ay ku qanciwaayeen, waxaana laga doonayaa in ay celiyaan 70 doolar.

Dhinaca kharashka, maadaama oo ay wakhti badan ay fadhiyaysay gurigay, waxaa kordhay biilka laydha oo gaadhay 120 dolar, halkii uu markii hore ka ahaa 80 dolar oo uu qorshuna ahaa. Waxaa kale oo kor u kacay kharashka cuntada oo gaadhay 450 dolar taas oo ay ugu wacnayd cuntada suuqa ku yaraatay isla markaasna qaaliyowday, iyo caruurta maalinta oo dhan fadhiyay guriga.



NOTES

CAAWIYAHA TABABARKA T.2.6

Muuqaalka miisaaniyada la habeeyay

MIISAANIYADA QOYSKA MARRY

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka
Dhakhliga joogtada ah	
Mushaarka Mousa (dukanka qalabka nijarada)	$600
Lacagta ay Mary ku biiriso miisaaniyada qoyska	$600
Isugaynta dakhliga joogta ah	**$1200**
Dakhliga isbadala	
Dakhliga laga helo iibka alaabooyinka guryaha iyo xafiisyada n	$0
Isugaynta dakhliga isbadala	$0
ISUGAYNTA DAKHLIGA	**$1200**

KHARASHKA	
Kharashka aasaasiga (baahiyaha)	
Kiro	220
Gaaska cunada lagu karsado, biyaha laydhka	120
Cunada	450
Safarka iyo kharashak gadiidka (gaadhi ama gaadiidka dadwaynaha)	90
Daryeelka caafimaadka / daawada	50
Igkaadhsiinta (biilka telefoonka)	30
Fiida dugsiyada barbaarinta caruurta (KG)	100
	100
Isugaynta kharashka baahiyaha	
Kharashyada laga maarmi karo (rabitaanka)	**$1160**
Mobaylka cusub ee Mary	120
Isugaynta kharashka rabitaanl	**$120**
WADARTA GUUD EE KHARASHKA	**$1280**

KAYDKA DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYD)	**-$80**

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Waxaa jira aalado loo isticmaalo maaraynta Dakhligaaga-miisaaniyada.
- Si aad u diyaarsato miisaaniyadaada, waxa u baahantahay in xisaabisid Dakhligaaga iyo kharashkaaga. Adiga oo xisaabtan ka duulaaya, waxaad ogaan kartaa, sharaxaadka aad ka bixin kartaa awooda aah u leedahay inaad lacag kaydsato, amaa inta lacag ah ee aad bil kasta kaydsan karto.
- “Haddii ay ku soo food saarto xaalad deg-de ah amaa isbadal ku yimaada xaaladaada lacageed, waxaad loo baahanyahay inad isbadal aad ku samaysid miisaaniyadaada si aad u awoodo daboolida kharashkaaga iyo inaad u kaydsato yoolashaada darteed.
- Misaaniyaddu waxay kaa caawin kartaa in go’aan ka gaadhid, sida aad wax u khaarash garaynaysid, anad lacag u kaydsanaysid si aad u gaadho yoolashaada.

3. LASOCO, HANA KA BIXIN XAYNDAABKA MIISAANIYADAADA



DARASAD MARXALADEEDKA 6aad

MAARAYNTA MIISAANIYADA MARY

Bishii la soo dhaafay, Mary waxay waalidkeed ay mar kale u sharaxday inta lacag ah ay awoodi karto ee ay u soo dirayso. Waxay u sheegtay in u hoyaalo qorshayaal badan oo ay la leedahay Mousa, sidaas darteedna looga baahanyahay ay sameeyaan wax kasta oo suurta gal ah si ay lacag u kaydsadaan. Shalay waxaa soo wacay qoyskeeda: Waalidkeed ay ka codsaday in ay lacag dheeraad ah u soo dirtay maadaama oo roob xoogani uu saqafkii ka qaaday gurigoodii, sidaas darteed ay u baahanyihiin in ay s deg-deg ah u dayactiraan gurigaas. Maray way ka maagtay codsigaas: Waxay soo xasuusatay in ay waalidkeed u dirtay lacagtii ay uga qoondaysay miisaaniyadeeda. In kasta oo ay ka xumaatay, hadana waxay aaday meesha lacagta laga diro, waxayna waalidkeed u dirtay lacagtii ay ka codsadeen. Marka ay arinta la socodsiisay Mousa, waxay ogaadeen ay miisaaniyadooda ka ilaalin Karin isdhimid, haddii ay bixiyaan kharashkan dheeraadka ah.

Dood ka dib, waxay go’aan ku gaadheen in ay dib u dhigaan soo iibinta Mobaylka Mary, iyaga oo hadda intii karaankood ah isku dayaya in lacag ka dhigtaan kharashka ay u qoondeeyeen isticmaalka gaadiidka dadwaynaha iyo cunada.

DARASAD MARXALADEEDKA 7aad

MAARAYNTA MIISAANIYADA

Bishii tegtay, Jane waxay garwaaqsatay in tiradeed ay aad cidhiidhi u noqotay, waxayna taasi ku kaliftay in ay isha ku hayso kharashka ay bixiso. Shalayto, waxaa Jane soo wacday inda adeerteed Xaawa. Waxay ka codsatay lacag ay ku daawayso inanteed oo aad u xanuunsan, oo u baahan daawooyin qaali ah. Jane way ka maagtay codsiga, waayo waxay xasuusatay in miisaaniyadeeda ay ugu hadhin lacag dheeraad ah oo ay bixin karto. Markii ay arinta si qoto dheer u fiirisay, waxay xasuusatay in ay ina adeerteed ay hay qof u wanaagsan oo marar badan soo gargaartay, sidaas darteedna waxaa ku adkaatay in aysan diidi Karin codsigeeda. Todobaadka dhamaadkiisii, waxay cilad farsamo ku timi foorno ay Jane u isticmaasho in ku dubto rooti ay iibiso. Jane, maysan haysan lacag ku filan oo ay ku dayactirto foornada, iyada oo xaawana wali helin lacag ay isaga bixiso dantii loo soo diray. Jane, waxaa qasab ku noqotay in ay lacag ka daysato gabadh ay dhashay.

SUAALO

- Maxaa maari ku kalifay in ay had jeer ku ay dhex jirto xaydaabka miisaaniyadeeda?

  Waxaa jira habab badan oo aad xulan karto, si aad u xaqiijiso inaad ku jirto xayndaadka miisaaniyadaada. Waxaad isticmaali kartaa shaxda lagu diyariyo xisaabaadka, amaa abikeshinada sida ay dad badani yeelaan hadda!

  Bal hada aan ogaano habka amaa wadooyinka aad ugu dhex jiri karto xaynaadka misaaniyadaada.

NOTES

CAAWIYAHA TABABRKA T.3.1

Shaxda la socodka dakhliga

SHAXDA LA SOCODKA KHARASHKA

Magaca:

Bisha:

Sanadka:

TARIIKHDA	SHARAXADA ILAHA DAKHLIGA	CADADKA DAKHLIGA

CAAWIYAHA TABABRKA T.3.2

Shaxda la socdka kharashka

SHAXDA LA SOCODKA KHARASHKA

Magaca: _____

Bisha: _____

Sanadka:

TARIIKHDA	SHARAXAADA NUUCA KHARASHKA	CADADKA BAXAY	QORSHAYSAN/AN QORSHAYNAYN	
			HAA	MAYA
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐

ISUGAYNTA KHARASHKA	
ISUGAYNTA DAKHLIGA	
DHIGAAL (= DAKHLI – KHARASH)	



TILMAAMAHA KUU SAHLAYA INAAD KU DHEX JIRTA XAYNDAABKA MIISAANIYADA

- *Had iyo jeer maanka ku hay kharashka kuu qorshaysan inaad bixiso.*
- *Miisaniyadeedu ha yeelato qayb aad ku muujin karta kharashka aan lagu tala galin ee loo baahanyahay in la bixiyo.*
- *Dhigaalkaagu ha ka fogaado meel aad gaadhi karto, si aad uga ilaaliso inaad bixiso.*
- *La soco wax aad bixinayso.*
- *Xaqiiji inaadan bixin lacag ka badan inta kuugu qorshaysan miisaaniyada.*
- *Haddii aad wax badan ka bixiso qayb ka mid ah miisaniyada, wax yar ka bixi qaybta kale .*
- *Diyaari nidaam aad hoos ugu dhigi karto bixinta kharashka kuu qorshaysan.*
- *Ka qaybgali qoyskaaga si ay uga qaybqaataan in aad ku dhaganaato qorshaha miisaaniyaada.*

CAAWIHA TABABARKA T.3.3

Kaarka isku gudbinta lacagta

MARY IYO MOUSSA

1da bisha February
Moussa waxuu qaatay mushaarkiisa oo dhan $500

MARY IYO MOUSSA

1da February
waxay dhul ku kiraysanayaan lacag dhan $220

MARY IYO MOUSSA

1da February
waxay bixinayaan biilka adeegyada (laydhka, biyaha) oo dhan $80

MARY IYO MOUSSA

2da February
Mary waxay misaaniyada qoyska ku biirinaysaa lacag dhan $800

MARY IYO MOUSSA

4ta February,
jaarka ayaa $70 laga iininayaa agab guri oo ka samaysan loox

MARY IYO MOUSSA

2da February
waxay ay bushqad ku ridayaan $350 oo ay u qoodeeyeen kharashka cunada

MARY IYO MOUSSA

2daFebruary
waxaybushqadkuriders $90 oo ay ugu Talaqoondeeyenisticmaalkagaa diidkadadwaynahai

MARY IYO MOUSSA

10ka February
waxay bixinayaan $50 oo ah kharashka dawadalabadoodaciyaal ay kudaaweeyèn

MARY IYO MOUSSA

12ka February
waxay $30 gadanayaan kaarasha moobaylka

MARY IYO MOUSSA

15ka February
waxay bixinayaan $100 oo ah fiida dugsiga barbaarinta caruurta (KG)

MARY IYO MOUSSA

15ka February
waxay $100 u xawilayaan Mary waalidkeeda t

MARY IYO MOUSSA

22ka February
waxay goaansadeen in ay aadan suuqa ayna $120 ku soo biibiyaan mobayka Mary

MARY IYO MOUSSA

25ka February
waxay u baahanyihiin in ay $40 ku dayac tiraan kulayliyaha

LAYLIS

Waxaad isticmaali kartaa labada shax ee kor ku xusan oo loo yaqaano shaxda la socodka "dakhliga iyo kharashka" waxaana loogu talagalay dakhliga iyo kharashka.

SHAXADA LA LA SOCODKA DAKHLIGA IYO KHARASHKA

Magaca: Mary iyo Hanssa
Bisha: February
Sanadka: 2021

TAARIIKHDA	SHARAXAADA ILAHA DAKHLIGA	CADADKA DAKHLIGA
1.2.21	Mushaarka Hansa	500
2.2.21	Lacagta ay ku biiriso Mary	800
4.2.21	Lacagta ay jaarku ka bixinayaan agabka guriga	70
ISUGAYNTA ILAHA DAKHLIGAM		1370

SHAXDA LAGULA SOCDO KHARASHKA

Magaca: Mary iyo Hanssa
Bisha: February
Sanadka: 2021

TARIIKHDA	SHARAXAADA NUUCA KAHARASHKA	CADADKA BAXAY	QORSHAYSAN/AN QORSHAYNAYN	
			HAA	MAYA
1.2.21	Kiro	220	☒	☐
1.2.21	Biilka adeegyada	80	☒	☐
2.2.21	Cunada	350	☒	☐
2.2.21	Gaadiidka dadwaynaha	90	☒	☐
10.2.21	Daawada	50	☒	☐
12.2.21	Hobaylka	30	☒	☐
15.2.21	Fiida isgoola UG	100	☒	☐
15.2.21	Lacagta loo diyaro Mary walidkeda	100	☒	☐
22.2.21	Hobaylka cusub ee Mary	120	☒	☐
25.2.21	Dayactirka hulayliyaha biyaha	40	☐	☒
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
ISUGAYNTA KAHARASHKA		1180		
ISUGAYNTA DAKHLIGA		1370		
DHIGAAL (= DAKHLI – KHARASH)		190		



Hada waa tarahaaga.
Dhukumantigan iyo lifaaqyadiisa ku yaal dhamaadka habraacan, waxaad ka kelaysa shaxda lagula socdo dakhliga iyo kharashka oo aad u isticmaali karto in aad dabagal ku samayso miisaaniyadaada. Nidaamkani wuxuu kuu sahlayaa inaad ku dhex jirtid xayndaabka miisaaniyada aad qorshaysatay iyo inaad gaadho yoolashaada.

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Had iyo jeer xusuusnaw kharashka kuu qorshaysan inaad bixiso.
- Misaaniyadaada ku dar qayb aad ugu talagashay qarashyada aan qorshaysnayn ee daruuriga ah in la bixiyo.
- Ka qaygali qoyskaaga diyaarinta miisaaniyada, si adagna uga dhaqan qorshaaga miisaaniyasa .
- Waxad u baahantahay inaad ogaato dakhligaaga guud. Inaad ogaado waxa ugu dakhliga ugu badan ee aad heli karto, waa tilaabo muhim ah oo aad ku xadido lacagtaada, waxayna tani kuu saamixaysa inaad horay u sii diyaarsato qorshahaaga bixinta kharashka.
  Waxa kale oo aad u baahantahay inad ogaato inta uu dhanyahay kharashka aad bixinayso xiliga miisaaniyada.
- Waxaa had iyo jeer muhim kuu ah inad xadido miisaaniyadaada. Waxad sixitaan ku samayni kartaa misaaniyadaada marka ay dhacdo inaad bixiso kharash ka badan kii aad qorshaysatay ee aad ku talagashay.

⚠ **Taxadar same! Hadii uu ku soo galo dakhli aan isku mid ahay (ku kala duwan bilaha), waxaad marka aad diyaarinayso miisaaniyada isticmaali kartaa celceliska dalhliga, waxaana lagaaga baahanyahay inad wax badan kaydiso marka aad hesho dakhli badan, si aad isugu dheeli tirto xiliga uu ku soo galayo dakhliga yar.**

4. XAFID DIWAANKA XISAABTAADA (LACAGTA)

DARASAD MOWDUCEEDKA 8AAD

MESHAK WUXUU TUURAY WARAAQ BANGI OO MUHIM AH

Meshak wuxuu leeyahay laba Akoon bangi oo kala duwan, oo u kala isticmaalo labadiisa shaqo. Wuxuu si baniga ka soo qaata warbixinta xisaabtiisa labadiisa akoon marka xilli xila la joogo. Wuxuu macmiil la ahaan hal bangi, mana jiri xili ay soo food saartay dhibaato hada ka hor. Hasa yeesha wax fikir ah kama haysani faaiidada ay leedahay in la xafido warbixinta xisaabta ee bangigu. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa wuxuu ogaaday in ay $40 ka maqantahay akoonka meherada uu ku iibiyo cabitaanka. Wuxu rumaysan yahay in uu jiro khalad, balse ma hayo wax diiwaan ah oo cadaynaaya inuusan isaga ahayn qofka la baxay 40ka doolar. Bangiguna ma xalin karo dhibaatadan, haddii uusan helin wax cadayn ah. Wuxuu qoran karaa codsi si loogu xaqiijiyo arrintan, balse waxay taasi ay ka qaadan kartaa wakhti badan. Meshak wuxuu aad uga xumaaday khaladka uu sameeyay ee ah inuusan xafidin dhukumentiyada muhimka ah.

DARASAD MOWDUCEEDKA 9AAD

SIDA AY JANE U MAARAYSO MIISAANIYADEEDA

Marka ay Jane, bil kasta dhamaadkeeda loo keeno biilka laydhka ama korontada ee gurigeeda, waxay tegtaa xarunta kambaniga laydhka, si ay isaga bixiso biilka korontada. Maamlin maalmaha ka mid, ayaa waxay ogaatay in gurigooda laga jaray laydhkii! Iyada oo xanaaqsan, ayaa waxay aaday xarunta kambaniga si ay uga cabato waxa ku dhacay. Hasa yeeshi intii xarunta ay joogtay, ayuu mid ka mid shaqaalaha xaruntu u sheegay in lagu leehay oo aysan bixin lacagta laydhka labadii bilood ee la soo dhaafay. Balse waxay hubtay in ay lcagtaas iska bixisay oo aan waxba lagu lahayn, wayna u sheegtay. Hasa yeeshe, waxaa laga codsaday in la timaado caydaynta in ay bixisay lacagtaas (waa resiiska biilka korontada oo leh shabada "PAID"). Laakiin waxay ogaatay in ay tuurtay resiitkaas oo aysan haynin, balse waxay ku adkaysatay in ay labadaas bilood lacagtooda bixisay. Hasayeeshe, shaqaalihii xarunta wuxuu ugu jawaabay in mararka qaar ay xumaadaan kombiyuutaradu, sidaas darteedna looga baahanyahay cadayntaas oo ah (resiitka ay ku shabadaysantahay "PAID"), oo xalka kaliy ee lagu ogaan karo in ay lacagta bixisay. Jane, waxay soo food saaray laba kharash oo kala ah in ay bixiso labadii bilood ee ay lumisay resiitkooda iyo kharashka dib loogu xidhiidhinaayo laydhka. Ma jirin wax ku tala gal ah oo ay u diyaarisay kharashkaas dheeraadka ah meesha laga bixinaayo. Walwal ka dib, waxay ogaaday in xalka kaliya ee u yaala ay tahay in ay soo daynsato lacagtaas si ay isaga bixiso kharashkan.

CAAWIYAHA TABABRKA T.3.1

Shaxda la socodka dakhliga

SHAXDAYDA LA SOCODKA DAKHLIGAYGA

Magaca: _____

Bisha: _____

Sanadka:

TARIIKHDA	SHARAXAADA DAKHLIGA	CADADKA DAKHLIGA

CAAWIYAHA TABABRKA T.3.2

Shaxda la socdka kharashka

SHAXDA LA SOCODKA KHARASHKA

Magaca: _____

Bisha: _____

Sanadka:

TARIIKHDA	SHARAXAADA NOOCA KHARASHKA	CADADKA LA BIXINAYO	KHARASHKU MA QORSHAYSNAA	
			HAA	MAYA
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐
			☐	☐

ISUGAYNTA KAHARASHKA	
ISUGAYNTA DAKHLIGA	
KAYDKA (= DAKHLIGA – KHARASHKA)	

J

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

BARASHADA HABABKA KAYDINTA/DHIGAALKA LACAGTA IYO WAX-SOO SAARKA

J1. Muxuu yahay fikirkaaga ku aadan sida ugu wanaagsan ee loo kaydsado lacagta?

- ☐ **b.** Waxaan lacagtayda ku kaydsadaa gurigayga, maadama ay tani tahay sida aniga aad iigu haboon.
- ☐ **t.** Lacagtayda waxaan dhigtaa bangiga, maadaama oo uu yahay meel amaan ah.
- ☐ **j.** Waxaan lacagtayda ku galaa hagbad maadaama oo an leeyahay asaxaab badan.
- ☐ **x.** Hab kasta oo lagu kaydsado lacagu wuxuu leeyahay faa'iido iyo khasaare. Sidaas daraadeed waxaan ka baaraan degaa hab kasta, waxanan xushaa midka ugu fiican.

J2. Waxaad doonaysaa inaad dhowr sano gudahood aad ku samaysato ganacsi, Muxuu yahay akoonka kaydsiga lacagta ee kugu haboon adiga?

- ☐ **b.** Akoonka kaydinta ah ee rasmiga ah.
- ☐ **t.** Akoonka kaydinta ee heshiiska ku salaysan.
- ☐ **j.** Akoonka kaydinta xilliga ku salaysan.

J3. Badbaadadu waa shuruuda ugu muhisan ee la fiiriyo marka la xulanaayo habka kaydsiga lacagta.

- ☐ **b.** Run.
- ☐ **t.** Been.

Jawaabaha sualaha: J1:x; J.2:j; J3:b

1. XULO TABAHA KAYDSASHADA LACAGTA!

Hada waxad samaysatay miisaniyada adiga kuu gaarka ah (ama mida qoyskaaga), waxad ogtahay cadadka lacagta ee lagaaga baahanyahay inaad bil kasta kaydsato si aad u gaadhid yoolasha aad dhigatay.

CAAWIYAHA TABABARKA J.1.1

Tabaha kaydinta lacagta

Mary waxay waxkhti dheer macaamiil la ahayd xarunta ka agdhow ee kaydinta lacagta ee loo yaqaano VSLA. Waxay jeceshahay in xarunta lacagteeda ku kaydsato, ayna si joogta ah ula kulanto dumarka ka tirsan kooxdeeda.

SUAALO

- Maxay yihiin habka kaydinta lacagta ee ay isticmaalaan magacyada kor ku xusan ee lagu matalayo?
- Ma kuwo si sharci ah u dhisan baa, misa waa kuwa aan u dhisnayn oo iskugu dhex jira kuwa si sharci ah u dhisan iyo kuwo qaab sharci ah u dhisan?
- Tab kasta waxay leedahay faa'iidadeeda iyo kharaaraheeda. Dhamaadka habraacan, siiba qaybta su'aalaha iyo jawaabaha, waxaa ku xusan oo aad ka heli doontaa shax soo koobta fa'iidada iyo khasaaraha habka kasta oo loo adeegsado kaydinta lacagta.



Meshak wuxuu door bidaa inuu lacagtiisa dhigto bangi ka agdhow gurigiisa, si uusan lacagta uu ugu tala galay inuu kaydsado, ugu bixin waxyaabo kale.

Joseph wuxuu lacagtiisa ku kaydsadaa salka hoose ee furaashka uu ku seexdo gurigiisa ku yaala xerada.



Jane waxay xubin ka tahay ururka wareega ee daymaha iyo kaydinta lacagta ee afka qalaad loo yaqaano (ROSCA). Waxay bil kasta lacag ay lacag qoonda ah ku biirisaa ururka.

Xusuusnaw macagyada casharka matalaya inaad iska soo qaado inad ka mid tahay, sidaas darteedna ka fikir waxyaabaha hoos ku xusan:

- **Amaanka lacagtaada aad goobta dhigatay,**
- **Suurta galnimada inaad lacagtaada la soo baxdid marka aad rabto,**
- **Suurta galiminada daahitaanka aad la kulmi karto marka aad la baxayso lacagtaada,**
- **Suurta galnimada inaad dhigato lacag badan amaa wax yar oo lacag ah,**
- **Suurta galnimada inaad dayn aad ku heshid lacagta aad dhigatay,**
- **Suurta galnimada in lacagtaada ay kuu dhasho lacag kale (dulsaar).**

TARAHAAGA!

Waxaa ogahay faa'iidada iyo khashaaraha ay leeyihiin hababka kala duwan ee loo adeegsado kaydinta lacagta. Hadaba aniga oo maanka ku haya yoolashadayda iyo miisaaniyayda markale, waxaan u malaynayaa in habka ugu fiican ee aan u adeegsan karo kaydinta lacagtu uu yahay anigoo fiirinaya yoolashayda:

Yoolkayga	Habka kaydinta lacagta

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Kaytdintu waxay leedahay amni, xilliga uu arin deg-deg ah ay soo baxdo.
- Baahiyada/arimaha degdegga qaarkood waxay yihiin kuwa la saadaalin karo, halka qaarna aan la saadaalin karin. Kaydsiga lacagtu wuxuu kuu sahlayaa inaad qorshe ugu tala gasho baahiyaha ama mashaariicaha mustaqbalka.
- Marka uu wax walba deganyahay amaa caadi yahay, kaydsiga lacagtu wuxuu kuu suurta galiyaa in aad qorshe u samaysatid waxyaabaha aad doonaysid inaad yeelatid.
- Waxaa lagaaga baahanyahay inaad aqoon u yeelato hababka kala duwan ee loo adeegsado kaydinta lacagta, si aad uga xulatida kan ugu fiican ee ku haboon baahidaada.

2. SI MASKAXAYSAN U XULO WAX SOO SAARKA AAD UGA DANLEEDAHAY KAYSIGAAGA

Wax soo saarka kaydsiga lacagta waxaa tusaale loo soo qaadan karaa akoonka joogtada ah kaasoo soo saara dulsaar dhan (4%) ama marka ay xili (cayimin) aad akoonkaga ku kaydsato ilaa 5 sano.

QEEXID

Wax soo saarka kaydsiga lacagta waxaa looga jeeda hab lacagta lagu kaydsado oo la ogyahay dabeecooyinkiisa sda:

- Xadiga dulsaarka
- Helintaanka adeega kaydsiga / u jajabnaanta bixitaanka lacagta
- Haboonaashaha iyo fudaydinta isticmaalka
- Shurnndaha furashada akoonka kaydsashada lacagta
- Badbaadada
  Kharshaha kaysashada lacagta (lacagta ku furashada, maaraynta iyo xidhista akoonka iyo isu gudbinta lacagta ee akoonka kaydinta lacagta)
- Lacag noqdi ah ama cad

Waxaa hoos ku xusan sadex wax soo saar ah oo hay'adaha lacagta sida bangiyadu ay siiyaan macaamiishooda:

Akoonka kaydsiga lacagta ee joogtada: Akoonkan waxa la samaystaa marka aad doonayso inaad lacag kaydsato, ama lacagtaas la baxdo xili kasta oo aad rabto.

Akoonka cayiman/heshiiska ah ee kaydsiga lacagta: Akoonkan waxa la samaystaa marka aad ku tala gasho inaad muddo cayiman aad bil walba dhigato lacag aad ugu tala gashay yool khaasa sida (guryo, waxbarasho, guur, shaqo aad furato iwm). Xasuusnow akoonkan waxaa ka mamnuuc ah ama ganaax lagu mutaystaa inaad xili ka horeeya xiligii heshiiska kala baxdo lacagta.

Akoonka wakhtiga (xadidan) ee kaysiga lacagta: Akoonkan waxa la samaystaa marka aad doonayso in aad lacag badan ku aruursato mudo dheer si aad u gaadho ujeedooyinkaaga fog (Waxaa dhiganaysaa cadad lacageed oo aad gaadhsiiso wax dhan inta aad ku balanqaaday muddo cayiman gudaheed).

Hab kasta oo loo adeegsado kaydsashada lacagtu wuxuu leeyahay dhinaca fiican iyo dhinac xun, waxaa tusaale loo soo qaadan karaa (farqiga xadiga dulsaarka lacagta ee laga helo).

Boga xiga, waxaa ku xusan oo aad ka helaysa qoraalo gaa-gaaban oo sharaxaya wax soo saar kasta oo laga helo hababka kaydinta lacagta.

Dhamaadka habraacan, siiba qaybta jawaabaha laylisyadu, waxaad kale oo ka helaysa shax isbarbari-dhig ku samaynaysa oo soo koobaysa macluumaadyada, ku xusan qoraalada gaa-gaaban mid kasta.

CAAWIYAHA TABABARKA J.2.1

Akoonka joogta ah ee kaydisga lacagta

AKOONKA JOOGTADA AH

HEL LACAGTAADA MARKASTA OO AAD RABTO

Waa hab fudud, oo ku haboon dhigashada iyo qaadashada lacagtaada xili kasta oo aad u baahato. Akoonkeena joogtada ah wuxuu kuu fududeeyaynayaa oo ku siinayaa siyaabo kala duwan oo aad ku maarayso lacagtaada.
Lagaagama baahno in inaad bangiga sii wargalisid si lacag u dhigatid amaa ula baxdid. Lacagta aad dhigatay waxay leedahay damaanad. Waxuu habkani kuu fududaynayaa in aad kor u qaadid lacagtaada marka aad mudo joogto, adiga oo kolba intii taagtaaa ah dhiganaaya.

FAIIDOOYINKA

- Wax soo saar aah halis lahayn
- Lacagta kuu taal waa amaan
- Xadiga dulsaar ee aad helaysa wuxuu dhanyahay: 1%
- Waxad lacagta dhingan karta mar kasta oo aad doonaysid Y
- Lacagtaada waxad la bixi karta mar kasta oo aad u baahatid adoon ogaysiis hore samayn
- Wax fii ah lagaama qaadayo marka ad dhiganayso ama la baxayso lacag
- Wax lacag ah lagaama qaadayo haddii aad doonayso inad iska xidho akoonkaaga
- Cadadka ugu yare ee laguu ogolyahay inaad dhigato waa 10 USD
- Waxaa loogu tala galay arimaha deg-dega ah
- Waxaad helaysa kaadhka TTMs ee lacagta lagula baxo oo bilaash
- ATMska waxad lacag kula bixi kartaa meel kasta oo aad dalka ka joogtid (waxu yeelan kara kharashaad)

MUDADA:
Dhamaad-Furan

SHURUUDAHA

- Aqoonsi cusboonaysisan (Aqoonsiga dhalashada,basaboor, ama caddaymo sharci ah oo shaqaynaaya)
- Cadaynta deganaashaha

CAAWAYIHA TABABRKA J.2.2

Akoonta kaydinta lacagta ee ku salysan bartimaameedka / heshiiska

AKOONKA HESHIISKA KU SALAYSAN

HADII AAD DOONAYSI INAAD SI DHAB AH AAD LACAG UGU ARUURSATO MUSTAQBALKAAGA

Akoonkan, wuxuu kuu suurta galin karaa yoolkaaga in aad sidhib yar aad u kaydsato lacag.
Waxuu ku suurta galinayaa inaad kaydsato lacagta adiga oo ka duulaayo awoodaada isla markaasna dhiganaaya inta aad awooda si aad u buuxisid shuruuda ku aadan ka go'naanshaha lacagta aad kaydiso bil kasta Inaad horumaris ahaan u bixiso.Waxad kala dooran kartaa 12 bilood ilaa 48 bilood oo bil kasta ay leedahay dhalo amaa dul saaro kala duwan.

DABEECOOYINKA UU LEEYAHAY HABKANI

- Dhalo ama dul saar dhan Ilaa 3% sanadii oo soconaysa 48 bilood.
- Lacagta ugu yare e lagaaga baahayahay in dhigtid marka aad furayso akoonka waxay dhantahayf 20 doolar.
- Furashada oo bilaash ah, isticmaalka iyo xidhista akoonkaaga.
- Akoonkagu wuu xidhnaanayaa (lacag kama saaro kartid) ilaa la gaadho mudada aad balan qaaday.
- Mudo ka dib,waxaad gaadhaysa heer aad bangiga ka heli karto lacag si aad u maalgaliso mashaariicda.
- Ma jiraayo wax fii ama lacag ah oo ad bixinayso marka aad lacagtada la baxaysa xiligii looga talagalay. Hasa yeeshe waxaa lumimaysaa lcagtii dhalada ahayd ee aad helaysay.

SHURUDAHA

Inuu qofku leeyahay tariikh wanaag dayn qaadashada ah

- Waa in aad soo bandhigi kartaa waxyaabaha kuu sahlaaya inaad iska bixiso daynta.
- Aqoonsi shaqaynaaya (aqoonsi dhalasho, Dal ku gal(Baasaboor) ama cadaymo kale oo sharci ah oo u shaqaynaya hab aqoonsi ahaan).
- Cadaynta deganaanshaha.

XILIGA AMAAHDA:
Waxaad ka dooran kartaa 12 ilaa 48 bilood oo leh heerar kala duwan oo dulsaar ah

CAAWIYAHA TABABARKA J.2.3

Akoonka leh mudada cayiman

AKOONKA LEH MUDADA CAYIMAN

SAMEE LACAG, HEL LACAG DHEERAAD AH

Akoonkani wuxu yahay mid kaa caawiya inad heshid dhalo ama dulsaaro badan. Lacagta aad ku kaydsanayso akoonkani waxay noqonaysa mid la xayiro, wuxuuna aad ugu haboon yahay ujeedooyinkaaga lacag kaydsiga ee mustaqbalkaaga, iyo kharashka kasta oo aada qorshaynaysid inaad bixiso mustaqbalka.
Akoonkani, maaha mid aad ka saari kartid lacagta aad ku kaydsatay ilaa la gaadho xiligii loogu talagaly, waxaanad ka helaysa lacag fiican oo kuu aruurta inta aad kasbanayso natiijo fiican dhanka raasamaalka.

MUDADA: 3 bilood ilaa 5 sano

DABEECOOYINKA UGU MUHIMSAN EE AKOONKAN

- Wuxuu leeyahay dhalo amaa dul saar aad u badan.
- Oo gaadhaya ilaa 4%. Heerka dhaladu waa mid la sii cayimo oo aad ku xisaabtamayso.
- Lacagta ugu yare e lagu furo akoonkan waxay dhantahay: 500 Dolar.
- Waxaad akoonkan ku furanaysaa bilaash, iyada oo isticmaalka iyo xidhistiisuna sidoo kale yahay bilaash.
- Ma adka nidaamkiisu lacag dhigashadu. Waxaad lacagta dhigan kartaa markii aad doonaysid.
- Waxad mutaysanaysa ganaax hadii aad doontid inad lacag kala baxdo ka hor inta ay dhamaan mudadii loogu tala galay.
- Cadayn bilaash oo laguu siiyo lacagta aad dhigatay.
- Waxaa kuu dhismaaya taariikh wanaagaaga kaydsiga lacagta, waxayna taasi kuu saamaxaysa inaad hesho dayn lacageed oo aad ganacsi ku maal-gashato.

SHURUUDAHA

- Cadaynta halka ay ka soo jeedo lacagta aad dhiganayso.
- Aqoonsi/mustaawaqe shaqaynaaya (dhalashada, baasaboorka amaa cadaymo sharci oo qofka lagu aqoonsan karo).
- Cadaynta deganaashada.

Hada waxaad baratay wax soo saarka ka soo baxa hababka kala duwan ee lagu kaydsado lacagta, waxaad hada aan ku matalayno casharka aad ka gacan siisaa nooca akoonka ee looga baahanyahay in ay furtaan si ay u gaadhaan yoolashooda.

CAAWIYAHA TABABARKA J.2.4

Iswaafajinta yoolasha iyo kaarasha marxaladaha waxsoo saarka kaydinta lacagta

ISWAAFAJINTA YOOLASHA IYO KAARASHADA MARXALADAHA SOO SAARKA KAYDINTA LACAGTA

MARXALADA 1 AAD

Mary waxay rabta in ay balaadhiso dukaankeeda.Waxay aaminstahay in ay heli doonto macaamiil farabadan, hadii ay balaadhiso dukaankeeda. Waxay lacag ku arursatay xarunta kaydka iyo daymaha lacagta ee VSL, hasa yeeshe waxa kale oo ay rumaysantahay in si joogta ay lacag u kaydiso bil kasta. Waxay doonaysa in ay qoondayso oo ay bil kasta meel iska dhigta lacag kaydsato mudo hal sano ah. Ma doonayso in ay ku dhiirato in ay lacagta ay kaydsatay u isticmaasho howlo kale oo ka baxsan ujeedada iyo yoolasheeda ganacsi ee ay ugu tala gashay. Ma hubto in ay hy'adaha sharciga ah ee kaydsiga lacagtu ay u qaadan doonaan qof macmiil la ah, balse si kasta ha ahaataba waxay isku dayaysaa arintaas.

Akoon bangi oo noocee ah ayay Mary xulan kartaa?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

ISWAAFAJINTA YOOLASHA IYO KAARASHADA MARXALADAHA SOO SAARKA KAYDINTA LACAGTA

MARXALADA 2 AAD

Joseph and Marta meesha kaliya ee ay lacagtooda ku kaydsadaan waa furashka hoostiisa.Waxay leeyihiin ujeedooyin badan oo ay dejisteen, waxaana ugu muhimsan in ay arursadaan lacag ugu filaata in ay samaystaan mashruuc digaag oo ganacsi ah oo ay iyagu iska leeyihiin. Ma doonayaan in ay ku dhiiradaan in lacagta ay dhigteen ay u adeegsadan howlo kale oo ka baxsan kuwa ay ugu tala galeen. Hadii ay u suurta gasho, waxay doonayaan in ay kaydsadaan lacagta ugu badan ee ay kaydsan karaan.

Akoon bangi oo noocee ah ayay Josef iyo Marta xulan karaan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

ISWAA[illegible]A YOOLASHA IYO KAARASHADA MARXALADAHA
[illegible]X SOO SAARKA KAYDINTA LACAGTA

MARXALADA 3 AAD

Meshak wuxuu sanadkii tagay uu si joogta u kaydsan jiray lacag, si uu u gato boloor dhul oo dheeraad ah. Meshak wuxuu dariskiisa ugu danbayntii kula heshiiyay laga iibinaayo dhul, hasa yeeshe, marka iibku dhaco sanad ka dib, maadaama oo ay dadka darisku doonayaan in ay halkii xili roobaad ee ugu danbeeya ay beertaan dhulkaas.

Akoon bangi oo noocee ah ayuu Josef xulan kartaa?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

IS[illegible]O KAARASHADA MARXALADAHA
[illegible]KA KAYDINTA LACAGTA

MARXALADA 4 AAD

Jane waxay jeclaan lahayd in akoon ka furato bangiyada rasmiga ah. In kasta oo xubin ka tahay xarunta kaydinta iyo dayminta lacagta ee ROSCA, ayna doonaysa in ay wali ay lacagteeda halkaas ku sii kaydsato, waxa si fiican ugu socota shaqadeed rootiga, waxayna doonaysa in ay si dhib lahayn ay xoogaa lacag ah ay bil kasta u dhigato si lacagtaas ay ugu balaadhiso ganacsigeeda. Waxay ka fikiraysa in ay ka fogaato wax kasta oo ku dhiiri galin kara in ay lacagtan ay u adeegsato howlo kale.

Akoon bangi oo noocee ah ayay Jane xulan kartaa?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

TILMAAMO

Nooc kasta oo wax soo saarka kaydka lacagtu wuxuu leeyahy faa'idadiisa iyo khasaarihiisa (Tusaale, kale duwanaasha heerka lacagta dhalada amaa dulsaarka). Si aad u xulato wax soo saarka aad ka helaysa kaydsiga lacagtaada, looma baahna oo kaliya inaad wax ka ogaato dabeecadaha wax soo saarada kala duwan. Waxaa lagaga baahanyahay inaad si fiican wax u ogaato, adiga oo iswaydiinaaya suaalaha hoos ku xusan:

• **Marxalada adiga kuu gaarka ah:** Muxuu yahay dakhligaaga? Kharashkaaga (ay ku jiraan lacagaha aad iska bixisay? Lacag intee le'eg ayaad kaydsataa marka ay wax walba ay si fiican kuugu socdaan? Lacag intee le'eg ayaan gaar u dhigan karta, haddii aad lacagtaada si fiican aad u maaraysid? Haddii aad soo galooti tahay ama aad ku nooshahay dibada, akoon ma ka furan kartaa hay'adaha lacagta ee rasmiga ah?

• **Yoolashaada:** Maxay tahay ujeedada aad u kaydsanayso lacagta? Arrmaha degdega ah? Waxbarasho? Maalgashi ganacsi? Inaad dib ugu laabato dalkaagii? Guryo? Howlgabkaaga?

• **Waxa kuu muuqda mustaqbalka:** Mudo intee le'eg ayaad doonaysa inaad lacag kaydsato/ lacag ku kaydsato akoon xidhan?

• **Dabcigaaga:** Madoonaysa qaadato khatar misa waa maya? Waligaa ha galin ganacsi khatar leh, haddii aad tahay qof aan la haysanin sayladaha ganacsiga!

⚠ Waligaa iska ilaali maal-gashiga beenta ah! Xasuusnaw inuusan wax-soosaar kaydsi oo wakhti yar ku oo keeni kara macaash bilaa khatar. Khaasatan mudo gaaban.

Waxay yihiim suaalaha aad u baahantahay inad waydiiso hay'adaha maalagashiga ka hor inta aadan xulanin wax soo saarka aan ka helayso kaydinta lacagtaada?

• *Ma la bixi karaa lacagtayda marka aan rabo?*

• *Intuu le'eg dulsaarka amaa dhalada lacagta aan dhiganaayo?*

• *Ma la iiga baahayahay inaan cashuur ka bixiyo dhalada ama dulsaarka? Hadii la iiga baahanyahay waa imisa?*

• *Kaydka lacagta ee aan dhigtay bankiga ma ku qaadan kara dayn lacageed*

• *Xiliga aan dhigista lacagtu ma yahay mid furan? Marka si kale loo dhigo ma waxaa loo baahanyahay wakhti go'an la dhigo cadad lacag ah)?)*

• *Ma jira lacagta go'an (inte ugu yar) oo la iiga baahanyahay in aan aan ku furta akoonka, oo ay waajib tahay in ay mar kasta ku jirto akoonka?*

• *Ma waxaa jira fii laiiga baahanyahay in aan bixiyo marka aan doonaayo in aan lacag kala baxo akoonkayga? Haddii ay jirto waa imisa ?*

• *Sidee ayay dadka u isticmaalaan akoonada noocan oo kale ah?*

• *Haddii aan ahayn muwaadin ku nool dalka dibadiisa, ma ka furan karaa akoon halkan? Maxay yihiin docukentiyada aad iiga baahantihiin?*

FIRIIMAHA FURAHA AH

• Daynka lacageed oo aad samaysaa wuxuu leeyahay wax soo saar u gaar ah.

LIFAAQYADA IYO DUKUMENTIYADA MUHIIMKA AH

DABEECOOYINKA LOO BAAHANYAHAY IN LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HABKA KAYDSASHADA LACAGTA

Fudaydka adeega / in xili kasta lacagta lagala bixi karo
Tan waxa looga jeeda, sida qofka ugu fududahay amaa ugu adagtahay in lacag kala baxo kaydkiisa amaa akoonkiisa. Tusaale, imisa jeer ayaa bil kasta loo ogolyahay inuu lacag kala baxo akoonkiisa bangiga amaa hay'adaha kale ee lacagta ee ku yaala meelaha kale ee dalka isaga oo isticmaalaya kaarkiisa ATMka ama laamaha bangiga ee dhamaan qaybaha dalka (sida loogu sii fududaynayo inuu qofka iska leh akoonku uu isticmaalo marka uu doono).

Haboonaasha iyo fudaydin isticmaalka
Macaamiishu waxay jecelyihiin waxa ku haboon rabitankooda, waxayna daneeyaan in lacag la baxaan sida ugu dhakhsaha badan. Tusaale ahaan dadka qaar, waxay jecel yihiin in ay bangiyada furnaadaan marka aysan shaqada ku jirin.

Shuruudaha lagu furanaayo akoonka kadysiga lacagta
Waxaa dad badan ay aamnisanyihiin inuu qofka lacagta badan haysta amaa taajirka ah uuni furan karo akoon. Taasi maaha wax run ah.
Hasa yeeshee, shuruudaha looga baahanyahay qofka doonaaya inuu akoon ka furto bangiga waxaa ka mid ah aqoonsi amaa mustawaqe , cadayta deganaashaha,/adeegyada uu bixiyay qofku, iyada oo ay shuruudahani yihiin kuwa ku adag dad badan, siiba dadka ay bara kiciyaan xaaladaha dhaqaale in ay buuxiyaan.

Amaanka
Marka ay dadku door bidaan in ay guryaha dhigtaan lacagtooda, waxa dhinici karta in ay lacagtaasi lunto, amaaba la xado, taas oo noqonaysa khatar soo waajahda qofka. Qaar ka mid ah, hay'adaha lacagaha ee ay dowladu mammusho, ayaa damaanad qaad siiya macaamiisha dhigata lacagaha yar yar. Taas oo ka dhigan, in dadkani ay helayaan lacagtooda haddii uu bangigu masalafo amaa kaco.

Heerka dulsaarka iyo faa'iidooyinka cashuurta
Waxaad helaysaa dhalo/dulsaar ,marka aad lacagta dhigato hay'adaha lacagta ee dowlada iyo kuwa ay dowladu aqoonsantahay.Dhalada ama dulsaarka aad helaysa wuxuu ku salaysanyahay xadiga boqolayda (%) ee cadadka lacagta aad dhigatay. Waxaa kale oo ay bangiyada dowlad iyo kuwa ay dowladu aqoonsantahay cashuur dul saari karaan dhalada aad helayso.

Baahida lacagta
Akoonkaaga ma ka saari kartaa lacag? Sidee iyo qaabkee ayaad lacagtaas u saari kartaa? Haddii lacagtaaa aad si deg-deg ah u baahantahay, waxaa loo baahanyahay in habka aad lacagtaada ugu kaydsato bangigu ay kuu fududayso in aad lacagtada la bixi kartid xili macquul ah. Haddii aad isticmaalaysid habka kaydka lacagta ee xidhan, waxa lagaaga baahanyahay inaad sugtid, maalmo amaa bilo inaad iibisid alaabta aad ka ganacsanayso si aad u hesho lacag, halka waxyaabaha aad dhiganaysid uu yahay alaab (sida xoolo, hanti kale).

Kharashka kaaga baxaaya kaydsiga lacagta
Waxaa laga yaaba in bangiyada dowladu ay cashuur saaraan lacagta aad ka xawilayso , lacagta aad kula baxayso kaarka ATMs iwm.Marka aad u baahantahay in si deg-deg ah u isticmaashid akoonka, waxaa lagaaga baahanyahay in aad xulatid hab kaydsi taasoo kuu suurta galin karta oo aad ku hesho lacagta iyada oo aan kaa daahin.

Sababaha, yoolasha iyo qorshayaasha fog aad u kaydsanayso lacagtaada
Adiga oo ka duulaaya sababta aad u kaydsanayso lacagta, waxa dhacaysa in hababka kaydsiga qaarkood noqoyaan kuwa ku haboon ujeedooyinkaaga marka la barbar dhigo ku kuwa kale (tusale lacagta oo aad u dhigato inaad guri ku dhisato waxay kaaga baahantahay lacag badan, waxa kugu habboon inaad lacagta ku kaydsato bangiyada dowladu aqoonsantahay halkii aad ku ururs an lahayd furaashka hoostiisa).

JAWAABTA LAYLISYADA

Habka haydsiga lacagta	Faiidooyinka ku jira	Khasaaraha
Hay'adaha lacagta ee rasmiga ah dowladu aqoonsantahay • Bangiga • Xafiiska boostada • Maykrofaynasiga • Iskaashatooyinka kaysiga iyo daymaha lacagta ee shariciga ah • Kambaniyada Caymiska (Wax soo saarka xiliga fog, caymiska nafta) • Boorsada mobaylka	• Habta ugu amaan san. • Waxaa kaliya oo og qofka leh akoonka. • Lacagaha lagala baxayo oo yar (si fudu oo loo diidi karo). • Waxad ka heli kartaa dhalo ama dulsaar). • Waxad ku heli kartaa wax soo saar lacageed oo kale (akoontiga jogta ah, kaydka howl-galka, daymo) . • Sida ugu fican ee aad lacagtada u marayn karto(akoonka kaydisiga). • Biilasha oo ad si degdeg ah Isaga bixiso. • Marka uu bangigu ku shaqaynayo khadka internetka, waxaad akoonkaaga hubin kartaa 24 saacba hal mar . • Baankiya badan ayaa shaqaqooda ka bixiya waaladooda si uu adeegoodu noqodo mid si fudud loo helo karo.	• Uma fududa danyarta, dadka aa wax qorin anan akhriyayin, dadka barakacayaasha. • Waxa looga baahanyahay qofka aqoonsi, cadaynta deganashaha oo aysan heli karin dadka sida qasabka ah u barakacay. • Waxa inta badan howl Wadena ka ah shaqalaha bangiga oo hor mariya danta bangiga, halkii ay ka horumarin lahaeyen tan macamisha. • Faidadu waxay ku xidhantahay nooca wax soo saarka. Waxay noqon karta mid yar qarkood. • Wax soo saarada kaydsiga lacagta qaarkood waxay kaaga baahahay in aad buuxiso shuruuda lacagta ugu yare e lagu furo akoonka. • Waxad fii ka bixin kartaa akoonka. • Wakhiti ayaa ku luma safafka baniga marka aas lacag la bixi rabto. • Waxa lagu wareera noocyada wax soo saarka iyo fiida laga bixiyo, wax jira cabsida inad kahalad samayso. • Xiliga ay bangiyada furan yihiin oo xadidan (Waxa la xidha maqribka iyo dhamadka usbuuca). • Qalalasaha dhaqale iyo kuwa siyasaded oo keen khalkhal dhalka lacagta, hoos u dhaca qiimaha lacagta, ishortaaga in lala baxo lacagta, dalka oo lacag lagala bixi kari waayoThe effects of economic or political instability: financial crises, currency devaluations, blocking of withdrawals, impossibility of getting money out of the country (exchange controls). • Bank agents may have no sufficient fund to serve you. • Not easily available for low income, illiterate people, forcibly displaced persons.



Habka kaydsiga lacagta	Faiidooyinka ku jira	Khasaaraha
Kuwa sarciga ah ay dowladu ogtahay	• Si fudud ayaa loo isticmaali karaa. • Sababta aad u kaydinayso lacagtu waxay tahay inaad dayn hesho. • Lacagta aad kaydisay waxad ku helo kartaa dayn marka aad u baahato. • Ururka kaydinta lacagta ayaa goaamiya inta jeer iyo cadadka lacagta ee ay xubnuhu dhigayaan. • Dhaqan wanaag. • Xoojinta isku xidhnaashaha iyo wada shaqaynta ka dhexeeya kooxda.	• Damaanad qaadka oo yar. • Ma hubtid inaad dhalo aad ka helaysid lacagta ad dhigtay. • Helitaanka daynta lacagta oo xadidan. • Inaad lacag ku kaydsato amaa aad dayn hesha waxay ku xidhantahay go'aanka xubnaha. • Waxaa jirta halis ah in ay xubnuhu u hogaansami waayaan sharciga ay dhigtaan (Tusale: Qof ayaa iska lumi kara. Kadin marka uu lacag ka qaato kooxda). • In kasta oo ay ku xidhantahay heerka uu gaadhsiisanyahay sharciyada kooxdu, hadana waxaa adag in Dacwad loo gudbiya booliska marka y dhibaato dhacdo. • Khatarta geeri ku timaad xubno kamida kooxaha kaydsiga. •Waxa lagaga baahanyahay in ka mid noqoto iskuxidhaha kooxda si aad uga mid noqoto. •Kooxaha kaydinta lacagtu waxay ku shaqeeyaan xaalad halis badan (ma jiro maamul, iyo dabagal dawladeed).
• Waa kooxo lacagta kaydiya. • Waa kooxo iskood isku caawiya. • Bangi tuulo. • Ururka kaydsiga lacagta iyo bixinta daymaha ee tuulada (VSLAs). • Maykrofaynaansiyo aan diiwaan gashanayn. •Iskaashatooyin aan diiwaan gashanayn oo kaydiya lacagta biyana daymaha. • Hay'adaha aan diiwangashanayn ee bixinta daymaha.		
Kuwo ku dhaw kuwa sarciga ah /badh-Rasmi ahaqoonsantahay	• Waxaa loo heli karaa si fudud • Waxay kordhi kara qiimaha. • Waa in aad iibiso hadntidaada si dib ugu hesho lacagtaada You (iyada oo la raacayo shuruucda suuqa). • Waxa had iyo jeer la heli karaa asaxabta, qarabada amaa ganacsatada. • Waxaa faidooyin leh aad alaab kuugu jirto lacagtaadu: Inaad soo saarta ama iibiso caanaha (hadii lacagtadu ku jirto xoolo), alaabta dumarku xidhaan waxaa la isticmaali xafladaha muhimka ah. • Hadii lacagtu ay kuugu jirto alaab (xoolo, hanti kale) waxaad heli karta lacag (iibka hilibka, caanaha, kirada iwm...).	• Amaan maaha :Qiimaha lacagta ayaa hoos u dhaci kara marka mudo la joogo, waxaa jira haliso ay ka mid yihiin tuugo, xanuun iyo dhimasho, marka waxa la dhiganaayo uu yahay xoolo nool). • Waxaa dhici karta inaad ku dhiirato inad lacagta wax kale ad u sticmaasho (hadii aad lacagta dhigatid gurigaaga). • Waxaa adag inaad si degdeg ah lacag ahaan u qaadato haddii ay kugu yimaadaan arimo degdeg ah). • Kharash aya la socdo dhigaalka alaabta ah (tusaale xooluhu waxay u baahanayaan calaf , alabto waxay u bahanaysa dayactir).
• Guriga (kaash ahaan, khasnada amaa makhalka. • Alaab ahaan (dahab, waxyaabaha dumarku xidhaan, xoolo, dhul, hanti, iwm). • In lacag loo dhiibto saaxiib, qaraabo amaa ganacsade.		

Shaxda wax soo saarka kaydsiga lacagta oo lagu munjay qoraal tusaale matalad ah

	Kaydsiga caadiga	Kaydsiga heshiishka ah	Kaydsiga mudaysan
Ma kuu suurta galaysa inad furato hadii ad tahay qaxooti/ barka kace?	Waxay u muuqata in ay suurta gal tahay	Lagama hayo macluumaad	Lagama hayo macluumad
Haddii ay jirto lacagta ugu yare e la dhigo marka aad furayso akoonka ama mar kasta oo aad furanaysid akoon?	10 Dólar	20 Dólar	500 Dólar
Lacagtaada ma la bixi karaa mar kasta oo aad doonaysid? Ma jirta kharash kale amaa ganaax	Ha, mana jiro wax ganaax ah	Haa, balse waxad waynaysa dhalida	Yes, with penalties
Waa imisa heerka dhaladu?	1 %	3 %	4 %
Lacag ma daynsan kartaa hadii aad furatid furada akoonka kaydinta lacagta?	Maya	Haa, wakhti ka dib ayad heli karta	Haa, wakhti kadib ayad heli karta
Ma jiraa xili mucayin ah oo lacagt la kaydsado, mise xiligaad doonto ayad dhigan karta, miyay cayimantahay lacagta la dhigaayo misa waa intad doontols?	Ma cayino, waa kolba sida la rabo	Waxa jira lacag dhigaal bille ah oo qasab	Ma cayimo waa kolba sida la rabo
Lacagta ii kaydsan ma kula bixi kara mise ku dhigan kara anoo adeegsanaysa ATM?	Haa	Maya	Maya

CAAWIYAHA TABABARKA T.2.4

Isku aadinta yoolka iyo kaarka xaalada wax soo saarka kaydsiga lacagta

JAWAABTA XAALADA 1 AAD

Kaydsiga lacagta ee ku salaysan heshiisku wuxuu Mary u saamix karaa in ay samayso dhigaal cayiman oo bile ah, oo uu urura wakhti cayiman.

JAWAABTA XAALADA 2 AAD

Uga horayn, waa in ay isku dayaan in akoon bangi oo caadi ah ay ka furtaan banigayada caadiga ah, maadaama oo aysan horay u lahayn akoon. Marka ay macaamiil ay noqdaan kadib, waa in ay xaqiijiyan in ay loo ogol yahay in ay samaysan karaan akoon ku salaysan heshiis.

JAWAABTA XAALADA 3 AAD

Maadaama oo uu Meshak ugu talagalin inuu lacagtan kharash gareeyo sanadkii tagay, furashada akoonka cayiman, ayaa u saamixi kara inuu helo dhalada ugu badan ee laga helo lacagta, waxuuna ka badbaadayaa isku dayga inuu lacagtiisa u isticmaalo arimo kale, (maadama oo uu ganaax la kulmaayo hadii uu lacagtiisa la baxo ka hor wakhtiga loo cayimay).

JAWAABTA XAALADA 4 AAD

Jane waa in ay isku daydaa in ay furato akoonka bangiyada caadiga ah, maadama oo uu hadda ka hor aysan horay u lahayn mid. Akoonka ay furatay waxay u qoondayni kartaa xoogaa yar oo lacag ah oo ay ku kaydsato bil kasta, si ay lacagtaas ay mustaqbalka ugu isticmaasho in ay ku balaadhsato ganacsigeeda.

X

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

SI XIKMADAYSAN U ISTICMAAL BADEECOOYINKA DAYNTA

X1. Maxay kula tahay siyaaba ugu fiican ee lagu maalgalin karo mashruuc ganacsi?

- ☐ **b.** In aad lacag soo amaahato.
- ☐ **t.** Inaad isticmaasho lacagta aad ku kaydsatay bangiga.
- ☐ **j.** In lacag soo amaahato, iyo inaad isticmaasho lacagta aad dhigatay bangiga.
- ☐ **x.** In marxalada aad falanqaysid, fiirisid inta ay le'eg tahay lacagta aad haysato, iyo inaad xulatid wadada ku haboon xaalkaaga.

X2. Maxay tahay arinta mudan in fiiro gaar ah aad siiso marka aad door bidayso inaad dayn aad qaadato?

- ☐ **b.** Heerka dulsaarka.
- ☐ **t.** Xaaladaha ku gadaaman bixinta dayntaas.
- ☐ **j.** Ma jirto shuruudo dhaanta tan kale, waxana la inooga baahanyahay in aan darisno dhamaantood, sidaana aan ku doorano daynta iyo daanbixiyaha ku haboon marxalada aan ku jirno iyo xaaladaha inoo gaarka ah.
- ☐ **x.** Dhawaanshaha dayn bixiyaha.

X3. Muxuu yahay ereyga aan ka midka ahayn shuruuda daynta?

- ☐ **b.** Heerka dhalada/dulsaarka.
- ☐ **t.** Damaanad.
- ☐ **j.** Miisaaniyad
- ☐ **x.** Ganaax.

Jawaabaha sualaha: X1:d; X.2:c; X.3:a

1. XULO HAB LAGU MAALGALINKARO MASHAARIICDAADA GANACSI

Inaga oo maanka ku hayna daraasadihii aan ku soo aragnay hab-raaci hore, ee ku aadan fursadaha kaydinta/dhigashada lacagta, waxan hada isbarbardhig aan ku samaynaynaa siyaabaha kala duwan ee inoo suurta galin kara in ay lacagi ina soo gasho, si aan u xaqiijino inaan gaadhno ujeedooyinkeena lacageed isla markaasna aan maalgalino mashaariicdeena.

CAAWIYAHA TABABARKA X1.1

Qiso ku saabsan malgaalinta

QISO KU SAABSAN MALGAALINTA

MARY



Mary waxay u baahantahay in ay badasho makiinadeeda dawaarka. Mary lacag kama daynsan karta ururka kaydsiga iyo daymaha ee ka jira tuulada, maadaama oo ay wali iska calinayso dayn ay hada ka hor qaadatahy. Waxay go'aansatay in ay lacag kale oo dayn ah ay ka soo amaahato dad degan xerada qaxootiga.Maxa dhacaya haddii ay sidaas yeesho: Mary waa in ay soo celiso dayntaas iyo dulsaarkeeda, waxa kale oo looga baahanyahay in ay daynta ku soo celiso wakhtiga loo qabtay oo aanay dhaafin.Sida ay ogtahay, dayn bixiyeyaashan aan rasmi ahayni waa kuwa aan dulqaad u lahay daahitaanka bixinta daynta.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

QISO KU SAABSAN MALGAALINTA

JOSEPH

Joseph iyo Martha waxay lacag ay caruurtooda uga gadaan furaash kala bexeen lacagtooda ugu jirta akoonka bangiga. Cawaaqibka ay waajahayaani wuxuu yahay inay isticmaalayaan qayb ka mid ah kaydkoodi lacageed. Hasa yeeshe, loogama baahna in ay dayn ay soo celiyaan iyo dhalo/dulsaar toona.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

QISO KU SAABSAN MALGAALINTA

MESHAK

Meshak wuxuu lacag ka daynsaday mid ka mid ah hay'adaha lacagaha, wuxuu doonayaa inuu lacagtaas ku balaadhiyo dukaakiisa lagu gado cabitaanka ee ku dhaw xerada cusub ee qaxootiga.Maxaa dhacaya (cawaaqibka uu waajahayo): Waxaa looga baahanyahay inuu soo celiyo dayntaas iyo dhalideeda amaa dulsaarkeeda, isaga oo raacaya qorshaha guud ee soo celinta daymaha.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

QISO KU SAABSAN MALGAALINTA

JANE

Jane waxaa ka jabtay foornadii ay ku dubi jirtay furunka ay ka ganacsato, lamana dayactiri karo. Waxa u yaala xoogaa lacag ah oo ay ku kaydsatay bangiga balse, lacagtaasi maaha mid ku filan, sidaas daraadeed waxay go'aansatay in ay iibiso fargashi dahab ah oo ay kala timid dalkeedii, waxayna doonaysaa in ay lacagtaas ku soo iibsato foorno yar oo duug ah si ay u sii wadato ganacsigeeda.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

Waaa jirta 3 siyaabood oo ay dadku sida u badan ay ku samayni karaan lacag ay ku maal galiyaan mashaariicdooda ganacsi waxayna yihiin:

1. Iibinta hantida ay haystaan, sida Jane ay yeeshay.
2. Isticmaalka kaydka lacagta ee bangiga yaala sida uu yeelay Josef.
3. In lacag laga soo daynsado qoyska, asaxaabta amaa ilaha kale ee rasmiga sida ay yeeshay Mary.
4. In lacago laga soo daynsado hay'adaha lacagta sida bangiga, hay'ada lacagaha yaryar (Microfinance), Ururada kaydinta lacagta iyo daymaha ee tuulada, amaa iskaashato si sharci ah u diiwaangashan oo bixisa daymaha, sida uu yeelay Mishak oo kale Dhamaadka Habraacan, siiba qaybta su'aalaha iyo jawaabaha laylisyada, waxaad ka helaysaa CAAWIYAHA TABABARKA J.1.2 oo shax ah, kaas oo sharaxaya fa'iidada iyo khasaraha uu leeyahay tab kasta oo lagu maalgaliyo mashaariicda ganacsiga.

CAAWIYAHA TABABARKA X.1.2

Qiso ku saabsan laba mashruuc oo ganacsi (Jane iyo Farida)

JANE

Adiga waxaad tahay Jane, waxaanad tahay mulkiilaha ganacsi yar oo iibiya rootiga. Maanta, waxad booqanaysa saaxiibkaa, Farid, oo iibiya cunada bisil. Saaxiibkaa waxad waydiinaysaa su'aalo tiro badan oo ku saabsan sida ay u maalgaliso shaqadeeda. Saxaabiikaana wuxu isna doonayaa inuu ogaado sida aad shaqadaada u wado.
Tani waxay muujinaysaa sida aad ku aasaastay ee aad ku u balaadhisay ganacsigaaga.
Waxa aad mehehrad ganacsi aad ku bilowday raasamaal dhan 500 doolar, oo aad horay ugu kaydsatay magaaladaada. Waxa kale oo aad haysata 150 doolar oo aad ka heshay qarabadaada, ka hor intii aadan wax bilaabin.
In kasta oo ay meheraadadu tahay mid yar, waxa hadana kuu qorshaysan inaad balaadhiso shaqadaada, si tartiib tartiib ah
Waxaad isku dayday inaad dhigato amaa kaydiso 30 doolar todobaad kasta, adiga oo dhigaya akoon cusub oo aad dhawaan uga furtay meheradaada bangiga qaranka. Sidaas waxaad mudo u dhaxaysa 3 ilaa 4 bilood aadku heshay lacag aad xooga kor ugu qaato meheradaada adoo ku kor dhiyay: (weelasha jikada lagu shaqaysto oo aad u fiican, alaabooyin fiican oo ah kuwa wax lagu moorgareeyo) sidaasna waxad ku balaadhisay meheradaadii.Hadda, waxaad soo iibsan kartaa gashi tiro badan, waxaanad tukaankaaga ka soo saari kartaa wax soo saar kala nooc nooc ah oo aad iibiso. Waxa kale oo aad ka firkiraysa inaad furato tukaan ku yaal goob cayiman.
Mar kasta oo aad samayso macaash, waxaad awood u yeelanaysaa inaad dhigato ama kaydsato lacag badan, iyo inaad maal galin wayn aad ku samayso meheradaada.

FARIDA

Waxad tahay Fariida, waxanad tahay mulkiilaha meherad yar oo iibisa cunada bisil. Saxiibtaa Jane ayaa sidoo kale ah mulkiilaha tukaankaaga oo kale. Maanta waxay saxiibada rabtaa in ay ku soo booqato.
Waxaad doonaysaa inad ogaato sida ay saxiibadaa ay u maalgaliso, una balaadhiso meheradeeda. Waxa iyana jirta walaasha oo doonaysa in ay ogaato sida aad u wado ganacsigaaga. Waxaa hoos ku xusan sida aad u aasaastay, aanad u balaadhinsay ganacsigaaga:
Waxa aad shaqada ku bilowday 1000 dolar oo dayn ah iyo 1500 doolar oo ahayd lacag aad ku kaydsatay bangiga.
Dayntani waxay kuu suurta galisay in aad dibu habayn iyo qurxin aad ku samayso dukaanka aad kiraysatay. Dib u habayntaas iyo qurxinta aad dukaanka ku samaysay waxay kuu suurta galisay in aad soo jiidato macamiil badan oo u soo tukaamaysi yimaada meheraada quruxda badan ee ku taala laami xasiloon.
Waxaad todobaab walba aad hal mar iska bixisaa kharashkaaga oo uu ku jiro dayntii aad qaadatay, hasa yeeshe, waxaa kaliya aad karaysa in aad halkii todobaad aad dhigato 15 doolar.
Maalin maalmaha ka mid ah, waxaa soo baxay tukaan ku yaala suuqa goobaha ugu mashquulka badan magaalada, waana dukaan la kirayni rabo.
Dukankan kirada ahi wuxuu kuu yahay fursad dahabi ah oo lagaaga baahanyahay in aad ka faa'iidaysato, waxana aad yeeshay sidan: Waxad xisaabisay oo aad ogaatay in macaashka aad hadda samayso laba jibaarmi doono hadii aad kiraysato. Sidaas darteed, waxaad si degdega u go'aansatay inad kiraysato dukaankaas inta aan lagaaga horaynin. Si taas ay kuugu suurta gasho, waxa aad seedigaa aad ka soo danysatay lacag dhan 2500 dolar.

SUAALO

- Side ayay Jane iyo Farida u balaadhiyeen meheradooda ganacsiga?
- Labadan dumar ah, tee ayaa kuula muuqata in ay ku najaxayso ganacsigeeda? Maxay tahay sababtu.
- Labada haween ah, tee ayaa waajahaysa halis ganacsi oo badan?
- Talo noocee ah ayaad siini lahayd Jane iyo Farida?

NOTES

TARAHAAGA!

Marka aan fiiriyo yoolkayga iyo miisaaniyadayda,waxaan u malaynayaa in wadada ugu fiican ee aan ku maal galin karo ganacsigaygu uu yahay:

Yoolashayda	Habka ugu wanaagsan ee ku maalgalin karo

FARIIMAHA FURAHA AH

- Waxaa jira siyaabo ama wadooyin kala duwan oo kuu banaan oo aad ku maal galin karto yoolashaada.
- Wado kasta oo way leedahay dhinacyo fiican iyo dhinacyo xun. Waxaa muhim ah inaad fahamto, isla markaasna aad dibu eegis ku samayso, kadibna aad si taxadar leh aad u xulatid wadada ugu fiican ee la jaanqaadi karta baahiyahaaga iyo xaaladahaaga ugu muhimsan ee kuu gaarka ah.
- Waxa kale oo aad isku gayni karta siyaabo ama wadooyin kala duwan sida: (dayn aad qaadato, lacag ad kaydsato oo aad ku maal galiso ganacsigaaga)
- Kala hadal fursadaha maalgalineed ee kuu banaan qoyskaaga, gaar ahaan xubnaha qoyskaga ee qaybta ka ah yoolkaaga (afadaada, walidkaaga, caruurtada, walaalahaa....).



2. SI XIKMADAYSAN U XULO DAYNTAADA!

Waxaa jira dhawr ilood oo daynta laga helo.Waxa ka mid ah bangiga, hay'ada maalgalinta yaryar) hay'ada kaydinta lacagta iyo bixinta daymaha yaryar, shirkadaha takhasuska u leh bixinta daymaha, kuwaas oo qayb ka ah ganacsiga sharciga ah, lehna shuruudo cayiman oo ay ku xidhaan qof kasta amaa hay'ad kasta oo amaah ka doonaysa.Hay'adaha lacaguhu waxay qaarkood ay ku dadaalaan in xitaa ay daynta u fududeeyaan dadka danyarta ah. Hay'adahan qaarkood waxa ay u baahanyihiin in ka mid noqoto koox sida: Tontine (koox wadaag dhaqale), ama haysta lacag ay horay u sii aruursadeen.

QEEXID

Dayn: waxaa looga jeedaa ficilka bixinta lacagta, hantida amaa alaab qiima leh, taas oo la siinaayo cid kale, oo isha soo celinaysa amaa isha bixinaysa mustaqbalka iyada cida daynta qaatay ay bixinayso lafaha (raasamaalka) iyo dulsaarka amaa kharash kale oo la saaray.

Amaah:Waxaa looga jeedaa heshiis u gofka amaahday shay xilliga la joogo qiima leh,un gofka amaahda bixiyay la galaayo inun amaah bixiyaha u soo celinaayo amaa un mustaqbalka bixinaayo mustaqbalka isaga oo soo raacinaaya dhalada amaa dulsaarka.

Dulsaar/dhalo:Waxaa looga jeedaa qiimaha lacageed oo la saarayo amaah qaataha oo ku jaan go'nata cadadka lacagta iyo mudada cayiman ee un isticmaalayo.

CIYAAR (GEEM) KU SAABSAN EREYADA IYO QEEXIDA EREYADA

Erey kasta ku aadi sharaxaadiisa. Waxba ha ka welwelin hadii aadan hubin. Dhamaadka habraaca siiba qaybta jawaabaha laylisyada, waxad ka helaysa jawaabta saxda ah

DHALADA/ DULSAARKA	Xirfadlaha ay macamishu saarto kharash loogu suurta galinayo helida daynta ugu jaban uguna haboon marxaladiisa (daynta guryaha) ee laga helo bangiyada iyo hayadaha lacagta ee kale.
DILAALKA AMAAHDA	Cadadka lacagta ee uu dayn qaatuhu u caliyo Dayn bixiyaha oo ay ku jirto lacagta daynta lafteeda, si ay ugu suurta gasho inuu isticmaalo lacagta uu ka daynsaday dayn bixiyaha.
GANAAXYADA	Cadadka daynta ee uu fasaxay daynbixiyuhu, dulsaarka saafiga.
MUHIIMADA	Qofka bixinaaya daynta aad qaadatay, haddii aad iska bixin kari waydo. Qofka waxaa laga codsan kara inuu saxeex ku yeesho heshiiska lala galayo dayn bixiyaha. Damaanaddu waxay noqon karta hanti.
DAMAANAD	Cadadka lacagta ee looga baahanyahay inuu dayn qaatuhu siiyo dayn bixiyaha, marka uu ku guul daraysto inuu iska bixiyo daynta (tusale la wareegista hantida, gaadiidka, kaydka lacagta ...)
XILIGA NAFISKA	Bixinta dhamaan amaa qayb ka mid ah daynta, ka hor xiliga ku xusan heshiiska.
KA FIIRSASHO	Saamiga lacagta ee gacanta kuugu jira ee aad ku maalgalinayso mashruuca ganacsigaga, ka hor inta aadan hay'adaha lacagta aad dayn ka amaahan. Qaybaha lagu biiraayo dayntu waxay ka imaanaysa kaashka gacanta lagu hayo iyo kaydka.
SO HORUMARINTA BIXNTA DAYNTA	Xiliga u dhaxeeya qaadashada daynta iyo xiliga ugu horaysa ee la bilaabaya dayn bxinta (qaado hada, bixi hadhow).
LACAGTA DAYNQAATAHA LAGU XIDHAYO INUU LA YIMAD SI UU U HELO DAYNTA	Heshiiska daynta oo la buriyo, bilaa ganaax. "xilliga hoos u dhigida" ee laga hor istaagayo qaadashada daynta.
WAX KU BIIRINTA SHAQSI AHAANEED	Hantidaada oo aad damaanad ku gashid , si aad u heshid dayn uga heshid hay'adaha lacagta. Haddi aad iska bixin wayso daynta, dayn bixiyuhu wuxuu la wareegi karaa, iibin karaa hantidada si uu helo raasamaalka iyo kharashyada kale. Mulkiiluhu ma waayi karo hantida guryaha daynta lagu dhisay, inta u lasoo baxaayo waajibka dayn bixinta ee saraan.

SUAALO

- Sida aad adigu aaminsantahay, maxay yihiin waxyaabaha aad ka baaraan dagayso marka aad xulanayso dayn bixiye aad daynta ka doonayso?

Waxaa hoos ku xusan waxyaabaha lagaaga baahanyahay inaad fiiro gaar ah aad siisid marka aad xulanayso dayn bixiyaha

- Heerka dhalada/dulsaarka (mid go'an or mid aan go'nayn).
- Heerka boqolayda ee sanadlaha ah (APR), waa kharshka ku baxaya qaadashada daynta sida (kharashka maamulka, caymiska qasabka ah).
- Xadiga lacagta ee aad daynsan karto.
- Sida ay u fududahay inaad dayn aad ka hesho (tusale xadiga lacagta ah ee lagaaga baahanyahay inaad kaydiso, ka hor inta aan lagu siinin dayn, cadadka daynta ee lagu siinaayo marka aad taas buuxiso...).
- Shruudaha (qoraalada la iiga baahanyahay inaan soo bandhigo, fursada ay ii siinayaan inaan dayn ku helo).
- Dhakhsiyaha aad ku halayso daynta.
- Ganaxa aad la kulmayso marka aad ka daahdo xiligii laguu qabtay inaad ku bixiso daynta.
- Fogaanta uu u jiro gurigaaga.
- Habka soo arurinta daymaha, siiba xiliga laga dib dhaco xiligii loogu tala galay in la bixiyo daynta (nidaam sharci, cabsi galin...).
- Xiliga nafiska.
- Waajibaadka qofka saaran inuu daynta u isticmaalo wixii loogu tala galay ee loo cayimay (guriyayn, maal gashi, wax soo saar...).
- Suurta galnimada in dib loo dhigo shuruudaha, iyo xiliga nafiska ee la isa siinaayo.
- Suurta galnimada helitaanka adeegyada kale: Akoonka joogta ah, gudbinta lacagta, kaarka daynta, mobayl baanki amaa adeega internetk ...).
- Waxyaabaha loogu tala galay marka ay timaado dhimasho, xanuun iyo isbadal ku yimaada xaalada dayn bixiyaha.

FARIIMAHA FURAHA AH

- U isticmaal dayntaada si midho dhal ah, waxaa lagaaga bahanyahay in aad si fiican u fahantid ereyada u gaarka ah daynta.
- Dayn qaataha waxaa saaran masuuliyada ah inuu iska bixyo daynta uu qaato isaga oo tixgalinaaya xiliga loo qabtay inuu ku bixiyo.
- Dayn qaadashadu waa arrin khatar ah. Ha u arkin arin fudud.
- Waxaa jirta maah maah dhahda: Tijaar waxa loo yaqaan qofka daynta iska bixin kara!
- Si aad si maskaxaysan u xulato daynta iyo dayn bixiyaha, waa in aad marka hore ogaatid nooca wax soo saarka daynta ee jira, iyo waxa ay yihiin dayn bixiyeyaashu, waana in aad intii karaankaa ah aad arurisid macluumaadyadan. Waxay macluumaadyadani kuu sahli karaan inaad xulatid wax soo saarka daynta ee ku haboon marxaladaada.
- Dayn bixiyaha aad xulanayso waxay ku xidhantahay, dabeecooyinka mashruucaga sida: Yoolka aad doonaysid inaad ku gaadho daynta aad qaadanayso.

3. XISAABI KHARASHKA DAYNTAADA

Awooda dayn iska bixinta

Tusaale ahaan, marka aad si fiican u fikirto kadib, waxaad gaadhaysa go'aanka ah inaad qaadatid dayn si aad u maalgaliso mashruucaaga ganacsi. Hambalyo! Waxaad ogtahay inta aad u baahantahay, waxanad diyaar u tahay inaad la kulantid hay'adaha lacag bixinta, si ay kuugu helaan wax soo saarka daynta ee adiga kugu haboon. Ka horta inta aadan la kulmin, waxaa lagaaga baahanyahay inaad xisaabiso awooda aad u leedahay inaad iska bixiso daynta.

Sida ay dhigayaan sharciyada u yaal wadamo badan, qofka looma ogolo inuu bixiyo saami amaa % ka badan dakhli bileedka uu helo amaa ay hesho. Iyada oo laga duulaayo, xeerarka uu dalkastaba leeyahay, lacagta qofku uu bixinaaya waxay u dhaxaysa 30-40% oo ah dakhliga uu helo bishi. Haddii, ay saamigu intaas ka yaryahay, waxaa jiraysa khatar wayn oo qofka u horseedi karta inuu si xad dhaaf ah u qaamoowdo.Intaas waxa dheer, waxaa cidda daynta bixisay qasab ku noqota in ay bixiso saamiga dheeriga ku ah dakhligiisa.

Laakiin ogsoonow! Arinta kor ku xusani waxay tahay saamiga ugu badan ee la ogolaan karo, balse maaha saamiga lagu tala bixiyo oo ah 30%.

Tusaale, waxan hada xisaabinaynaa awooda uu Meshak u leeyahay inuu iska soo celiyo daynta.

Meshak xisaabtiisu aad ayay cidhiidhi u tahay. Sidaas darteed, wuxu, nafitiisa u qoondeeyay inuu bishii helo mushaar dhan 1200 dolar. Lacagtani, wuxuu ka helaa meel ka baxsan dakhliga beerta. Mararka qaarna, shaqada ganacsiga beertu waa mid si wanaagsan ugu socda, waxayna taasi sababtaa inuu helo dakhli dheeraad ah, oo kala duwan bil kasta, walow uu jecelaan lahaa inuu bil kasta uu soo saaro dakhli isku mid ah, si uu yahay qof shaqaale ah oo kale. (Waxaa xusid mudan in kharashkan kala duwan ee kor ku xusan lagu xalayniin xisaabta ku saabsan awooda Meshak).

Dakhliga uu helo bishi: 1,200 Dolar

Awooda uu bishii u leeyahay inuu iska bixiyo daynta: 30% dakhligiisa ah oo u dhiganta 360 Dolar

Iyada oo xisaabta sida kor ku xusan lagu salaynaayo, waxaa dhici karta inuusan Meshak qaanta ku bixin karin wax badan 360 dolar oo ka mid dakhligiisa bil kasta. (waa inta uu bil kasta ka bixin karo qaanta lagu leeyahay).

AWOODA SHAQSIYADEED EE DAYN CELINTA

Hadda adiga ayaa lagugu soo wareejiya! Sidaas darteed xisaabi awooda aad adigu u leedahay inaad iska bixiso dayn legugu leeyahay euismod

Dakhliga bishii ku soo gala waa 100%

Awoodaada dayn celinta ..... 30% oo dakhligaaga ah

CAAWIYAHA TABABARKA X.3.1

Meshak wuxuu go'aansaday inuu kor u qaado ganacsigiisa, wuxuuna u baahday inuu kiraysto dukaan kale si uu u samaysto meel labaad oo lagu iibiyo cabitaanka, wuxuuna u baahday lacag dhan 10,000 dolar. Waxuu haysta wax soo saarka daynta ee hoos ku xusan, oo si gaar ah loogu tala galay ganacsatada. Wuxuuna isku dayayaa inuu ogaado, wax soo saarka daynta ee uu heli karo kan ugu qiime jaban.

MAGACA WAX SOO SAARKA	BANGIGA QARANKA	MAYKRO FAYNANSI	BANGIGA UGU FIICAN DAYNTAADA
Dhalada sanadlaha ah (APR)	6% sanadkii	5.5% sanadkii	6% sanadkii
Mudada daynta	5 sano (60 bilood)	7 sano (84 bilood)	6 sano (72 bilood)
Cadadka daynta ee la celinaayo anad kasta (dayn celin billaha ah)	193.33 Dólar	143.70 Dollars	165.73 doolar
Wadarta guud ee la bixinaayo (mudada daynta x dayn celinta bilaha)	193.33 x 60 = 11,599.68 dolar		
Qiimaha rasmiga ah ee daynta (Wadarta guud ee daynta la bixnaayo oo laga jiray cadadka uu codsaday Meshak)	11,599.68 –10.000 = 1,599.68 dolar		

Hadda adiga ayaa lagugu soo wareejiya!! Muxuu yahay qiimaha rasmiga ah ee uu bixiyay MICROFAYNANSIGU? 2

Iyo qiimaha rasmiga ee BANGIGA KUUGU FIICAN DAYNTAADA 3

Markaas, maxay tahay daynta ugu qiimaha jaban ee la siinaayo Meshak? 4



Fiiro gaar ah! Daynta ugu qiimaha jaban, kama dhigno in ay tahay mid ku haboon baahida Meshak. Tusaale, waxaa laga yaabaa in ay aad u adag tahay, isla markaasna khatar ah, in lacag badan la iska bixiyo bil kasta. Waxay taasi ku xidhantahay cadadka lacagta ee uu bil kasta bixinaayo.

(2). Wadarta guud ee la bixinaayo = 12,070.84 dolar (143.70 x 84). Qiimaha rasmiga ee daynta = 2,070.84 Dolar (12,070.84 – 10,000).

(3). Wadarta guud ee la bixinaayo = 111,932.48 Dolars (165.73 x 72). Qiimaha rasmiga ee daynta = 1,932.48 Dolar (11,932.48 – 110,000).

(4). Jawaabta saxda ah waa daynta laga helaayo bangiga qarankа.

CAAWIHA TABABARKA X.3.2

Waraqo lagu xayaysiinaayo Daymaha oo matalaad ah

BANGIGA QARANKA

- Dulsaarka sanadkii (APR): **6.00%**
- Mudada daynta : **5 sano**
- Dayncelinta bilaha ah:
  193.33 Dolar
  (oo laga celinaayo 10 000 doolar bilkasta)
- Xiliga nafiska
  (xiliga aan lahayn ganaxa):
  2 sano
- Cadadka ugu badan ee daynta :
  50 000 Dolar
- **Shuruuda:**
  - Lacagta ugu yar ee uu qofku uu ku soo darayo daynta uu qaadanayo waa in ay noqotaa 10% kharashka guud ee ku baxaya mashruuca.
  - Waa in ugu yaraan aad bangiga macmiil la tahay 6 bilood.
- **Ma jira adeegyo ka baxsan kuwa lacagta amaa tababaro ku saabsa habka ganacsiga oo la siiyo ganacsatada.**
- **Daynta ugu fiican ee aad ku balaadhinayso ganacsiga aad kujirto:**
  U BADAL LACAGTA U BADAN: 20 000

- Mudada daynta: **7 sano**
- Dayn soo celinta bil kasta: **143.70 Dollars**
  (laga bixinaayo daynta dhan 10 000 Dolar)
- Xiliga nafiska (bilaa ganaaxa ah): **0**
- Cadadka lacagta ugu badan ee la amaahan karo: **12,000 Dollars**

Shuruudaha:

- Lacagta ugu yar ee uu dayn qaatuhu la imanayo si uu u helo daynta 0.
- Waa in uu macmiil u ahaado hay'ada lacagaha yaryar.

- Dadaal lagu samaynaayo shaqsiga, laga bilaabo xiliga uu qaato ilaa inta uu iska soo celinaayo daynta
- Tababaro ku saabsan ganacsiga, sida loo bilaabo ganacsiga iyo waxbarashada maaliyadeed.
- Mudada uga dheer ee soo celitnta daynta ee ka jirta sayladaha dayn bixinta. Heerka dhalada ee ugu hooseeysa . Fadlan kaalay oo nasoo booqo si aad nooga heshid dayn.

BANGIGA UGU FIICAN DAYNTADA

BAHWADAAGTAADA MAALIYADEED EE KOBOCA IYO MASHAARIICDAADA CUCUB EE GANACSI

- Lagacta bilaha ah: 6.00%
- Mudada daynta: 6 sano
- Daycelinta bishii: 165.73 Dolar
  (lacaga bixinaayo dayn dhan 10 000 Dolar)
- Xiliga nafiska: 0
- Cadadka lacagta ugu badan ee la amaahan karo: 10 000 Dolar
- **Shuruudaha:**
  - Lacagta ugu badan ee uu dayn qaatuHu la imaanayo si uu u helo daynta : 20%
  - Waa inaad tahay macmiil muddo 12 bilood ah
- Ma jiro adeeg aan maaliyad ahayn oo ka baxsan koorsooyinka tababarada ee ganacsatada.

CAAWIYAHA TABABARKA X.3.3

Shaxda koobaysa doodaha saamaynta ku leh hab-dhaqanka xulashada dayn bixiyaha iyo daynta (banaan)

ARINKA SAMAYNTA LEH	BANGIGA QARANKA	MAYKRO FAYNANSI	BANGIGA UGU FIICAN DAYNTAADA
Lacagta dhalada ee daynta laga bixyo			
Dhibyarida helista daynta/shuruudaha			
Cadadka ugu sareeya ee daynta uu qofku qaadan karo			
Tirada xiliga dayn celinta, inta u dhaxay			
Adeegyada ka baxsan kuwa lacagta ee la helayo (sida tababarada)			

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E

Hada waa tarahaaga!

Hadii aan fiiriyo yoolashayda, miisaaniyadayda, iyo awoodayda dayn celinta, ma u baahanahay, wax soo saar dayneed ?

☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay tahay haa, yoolashadu maxay yihiin? . . . . . .

Xadi dayn intee le'eg? . . . . . .

Hadda waxad maclumaad ka raadisaa hay'adaha lacagaha, waxanad adoo ka duulaya maclumaadkaas buuxisa shaxda Meshak. Laakiin waa inaad buuxisa yoolasha aad go'aansatay inaad gaadho ee daynta kaaga baahan.

Digniin! Si aad u awoodo isbarbardhiga badeecooyinkadaynta, waxaadu baahanatahay inaad iswaydiiso kharashka ay ku kacayso daynta guud ahaan (waa inad garanaysid cadadka guud ee lacagta aad celinayso oo ay ku jirto inta aad daynsatay. Kharashkan waxa ku jira dhalada amaa dulsaarka laga qaadayo lacagta ad daynsatay, kharashka maamulka, kan caymiska iyo kharashyada kale ee adeegyada la bixiyo, waxaas oo dhan oo kharashaad ah ayaa fuulaya daynta aad qaadatay, waxana lagaaga baahanyahay inaad ogaatid. Sida uu yeelay Meshak, waxa kuu fiican inaad ogaato daynta leh dul saarka ugu yar taasoo qaadan karta mudo dheer dhab ahaantiina noqon karta mid aad qaali u ah.

MAGACA WAX SOO SAARKA			
Dhalada sanadlaha ah (APR)			
Mudada daynta			
Cadadka daynta ee la celinaayo sanad kasta (dayn celin billaha ah)			
Wadarta guud ee la bixinaayo (mudada daynta x dayn celinta bilaha)			
Qiimaha rasmiga ah ee daynta			

Waxsoosaarka ugu wanaagsan baahiyahaygu waa: . . . . . .



CAAWIYAHA TABABARKA X.3.4

Marxalada iibsashada guriga, iyada oo loo marayo nidamka maalgalinta ismaaliga

MAALGALINTA HESHIISKA KU SALAYSAN

Mid ka mid ah haweenka dadka deegaanka ee ku nool agagaarka xerada oo doonaysa in ay ku iibsato hanti ku kacayso lacag dhan 100 tiro.

Waxay lacag dayn ah ka qaadatay bangiga si ay si dhakhso ah ugu iibsato hantidaas. Waxaa looga baahanyahay in ay lacag dhan 120 tiro ay oo dayn ah ay ku celiso 20 sano. Kharashka ku baxaya daynta-ni wuxuu dhanayahy 20 tiro oo lacag ah, marka loo xisaabiyo sida xigta: (120 – 100 = 20)

MAALGELINTA ISLAAMIGA AH

Haweenay Muslimad ah ayaa waxay doonaysa in ay hanti gadato ayna ka bixiso lacag dhan 100 tiro.

Waxaa hantidan gatay bangigeeda oo ka bixiyay lacag dhan 100 tiro, kaas oo qaatay khataraha ka imaan kara hantida (tusaale suurta galnimada in ay hantidani guban karto).
Hadda, hantidan oo ah guri waxaa iska leh bangiga. Bangigii ayaan waxuu rabaa inuu gurigan ku iibiyo lacag dhan 120 tiro, uuna ka iibiyo gabadhan, uuna lahaashaha guriga ku wareejiyo iyada, 90 maalmood kadib. Waxay ku raacday inay bixiso heshiis ah in ay lacagtaa qiimaha guriga ay ku bixinayso muda dhan 20 sano. Qiimaha daynta waxay tahay lacag dhan 20 tiro. (120-100 = 20)

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Si aad sida ugu wanaagsan ugaga faa'iidaysato wax soo saarka daynta, waxaa lagaaga baahanyahay in aad si fiican aad u fahantid mudada aad daynta aad isticmaali karto amaa ku shaqaysan karto.
- Qaadashada daynta waxaa la socota waajibaadka dayn celinta/dayn bixinta, iyo in xiligeeda oo aan la dhaafinin.
- Dayn qaadashadu waa shaqo ganacsi oo ka go'naasho leh. Ha u qaadan arin fudud!
- Si aad u xulatid wax soo saarka dayntaada, waa in aad marka hore ogaato noocyada kala duwan ee badeecooyinka daynta, waana in aad macluumaad ka soo aruuriso dabeecadahooda. Adiga oo taas ka duulaayo waxaa lagaaga baahanyahay in aad xulato mid ku habboon marxaladaada.

4. ISKA JIR! HA NOQON QOF SI XAD-DHAAF AH U QAAMOOBA

CAAWIYAHA TABABARKA X.4.1

Shaxda qaanta xad-dhaafla ah

QAYBTA 1aad
Xaawa, Jane inada-adeerkeed, iyo odaygeeda David, ayaa ku dul sheekaysanaya maraysa qoreeca

David	Waaxa, waxa leeyahay, miyasan manta ay Hay'ada kaydinta lacagta iyo damaha yar yar (maykrofaynansigu) go'aan ka gaadhaynin arjigaagi aad ku codsatay daynta?
Xawwa	Ha, manta marka ay saacadu tahay 11ka subaxnimo, waxaa kulmaaya guddiga daynta. Waxba kama wel-welsani, sababta oo waxaan hadda waydiisanay dayn dhan 400 dolar oo kaliya, wayna ka yartahay intii aad doorkii hore codsanay.
David	Laakiin, Xaawa, maxaad 400 dolar oo kaliya u daynsanaysaa? Miyaad ilawsantahay, ina aynu usbuuca danbe iska bixinayno dayntii uu jaarkeenu inagu lahaa?
Xawwa	David, sowdigii hada ka hor ii sheegay inaad soo raadinayso lacag aan isga bixino dayntaas!
David	Waan ogahay, balse way ii soorta gali wayday. Sidaas darteed, waa in aad ugu yaraan ad hay'ada kaydinta lacagta iyo bixinta daymaha yar yar aad ka soo daynsataa 1000 dolar.
Xawwa	Laakiin, anigu waligay iskama bixin karo dayn intaas le'eg!
David	Waxba ha ka wel-welin. Aniga ayaa mar danbe ku siin doona lacagta aad u baahantahay. Is arag danbe.

QAYBTA 2aad
Xawa iyo saaxiibadeed Sandara ayaa gaadhay Mikrofaynaansiga, waxaana halkaas ka socda shir lagu eegaayo daynta ay soo dalbatay xaawa.

Xaawa	Sidee tahay, Sandra. Ma fiicantahay? Waa side Xaafadii? Adiga ma fiicantahay? Maanta maalin fiican ma kuu tahay?
Sandra	Haa, wax kastaa way fiican, mahadsanid, Xawa. Adiguna?
Xaawa	Waa fiicnahay. Waxaan ka codsanayaa inad axsaan ii samayso. Walaal 100 dolar ma daymin kartaa?
Sandra	(Waxay isku dayaysaa, ka sii dhaqaaqdo...) Laakiin, Xaawa, Hadda waa markii labaad ee aad lacag i waydiisanayso, si aad lacag ugu celiso dukaan hayahathis. Ilaa hadana iimaad soo celinin 100 dolar oo aan hada ka hor ku daymiyay.
Xaawa	Waxba ha wel-welin! Waa kuu soo celinayaa lacagta. Maanta, waxaan xooga lacag ah ka helayaa ina adeertay Jane, aniga ayaana lacagta ku siinaya inla marka aan helo.
Sandra	Ina adeertaana ma dayn ayaad ka qaadanaysaa?
Xaawa	Haa, waxaan u baahanahay in aan iyadana lacag aan ka daynsado, sababta oo ah waxaa aad u xaniisan inantayda, wax shaqa ah an waan qaban kari waayay todobaadya badan. Si xad dhaaf ah ayaan u qaamaysanahay.

SUAALO

- Maxay samaynaysaa Xawo?
- Maxaa ku kalifay in ay meelo badan dayn ka qaadato ?
- Fikir noocee ah ayay xaawa ka qabtaa dadka kala duwan ee ay daynta ka codsanayso?
- Taakulo noocee ah ayay xaawo ka heshaa odaygeeda?
- Maxaad u malaynaysaa in ay xaawo ku dhaci karaan?

QEEXID

Qaamowga xad-dhaafka ah: waxaa looga jeedaa qofka oo awood u yeelan waaya inuu la tacaalo daynta lagu leeyahay.

TILMAAMAHA SIDA LOOGA FOGAADO INAAD SI XAD DHAAF AH U QAAMOWDO

• Kaliya dayso cadadka lacagta ee aad awoodi karto inaad maarayso bixinteeda.
• Xisaabi saamiga daynta aad qaadan rabto iyo dakhligaaaga. Xisaabi, inta ay le'egtahay lacagta bishii ku soo gasha, iyo cadadka lacagta ah ee aad awooda u leedahay inad bil kasta ku bixiso dayntaada (waajibaadka dayncelinta billaha ah). Isbarbar dhig ku samee labada tiro ee kuu soo baxda (dakhliga iyo cadadka aad bishi ku bixin karto daynta), kadibna xisaabi saamiga. Haddii inta badan, awooddaada dayn bixinta gaadho 30% oo ah dakhliga aad hesho bil kasta, looma baahno, inaad qaadato wax dayn ah.
• Haddii aad daynta ku bixin kari waydo xilligeeda, fadlan daacad u noqo dayn bixiyahaaga, si cadna ugu sharax sababta iyo dhibaatooyinka ku soo waajahay.
• Si fiican u dhagayso talooyinka ku saabsan sida la isaga bixiyo daynta ee ay ku siinayaan asaxaabta iyo qoyskaaga
• Yaree wax ka mid ah kharashkaaga maalinlaha ah, si aad isaga bixiso dayntaada.
• Had iyo jeer, lahaw kayd aad ugu tala gashay arimaha degdega ah, si ay kuugu suurta gasho inaad la tacaasho arrimaha degdega, adiga oo aan wax u dhimaynin qorshaaaga dayn bixinta.

• **Qaad talaabo!** La kulan mareeyaha akoonkaaga ee ka shaqeeya hay'ada lacagta. Ha sugin ilaa ay arrintu faraha ka baxayso, ee talo lagu siiya waxba soo kordhin Karin.

CAAWIYAHA TABABARKA X.4.2

Karasha matalada

KARASHA MATALADA

KAARKA1

Xubin mirofaynasi ayad tahay, waxana xubin iyana ka ah Xawa. waxay iskabixin kari wayday dayntii.
Diyaari nidaam xaalada lagu gorfeeyo, lagana soo saaro goaanka waxa laga yeelayo xaawa.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KARASHA MATALADA

KAARKA2

Waxad ka mid tahay qoyska, qaraabada iyo asaxabta xaawa, (oday, ina ader, barka cayasha kale ee iyada yaqaana). Xawa lacag ayay idinka wada daysantay dhamantiin, cidna wali daynta uma soo celinin. Diyaari nidaam xaalada lagu gorfeeyo, lagana soo saaro goaanka waxa laga yeelaya xaawa.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KARASHA MATALADA

KAARKA3

Waxad xubin ka tahay gudiga daynta, ee hay'adaha kaydinta lacaga yar yar in bixinta daymaha (mikrofaynansi), ee ay xaawa hada ka heshiiska kula gashay daymo kala duwan. Diyaari nidaam gaaban, oo lagu baadho codsiga daymaha ee xubinka, lafuna forfeeyo arimahan: Xubin noocee ah ayaa dayn ad siin kartaa, keebaase u qalma daynta in la siiyo.

WAXBARASHADA MAALIYADEED



Qaar ka mid ah xalka

Haddii aad tahay qof horayba si xad-dhaaf ah u qaamawday , waxaa hoos ku xusan qaar ka mid xalka aad ka heli karto hay'ada aad lacagta ka daynsatay:

- Dib u diyaari qorshahaaga daynta, waxa looga jeeda, inaad yarayso cadadka dayn celinta ee bil kasta, waxaanad dheeraysa mudada daynta.
- Jooji bixinta daynta wakhti cayiman.
- Iibi hantidaada si aad isaga bixisid daynta (tusale daymaha leh kharash dhalo/-dulsaar oo aad u badan).

Ha hilaamnin inaad raadsato adeegyada heshiishka ee ay bixiso hay'adaha aad ka daynsatay lacagta!

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Dayn celintu waa go'aan aad gaadhayso, marka aad goosato in aad dayn qaadato.
- Ka baaqso amaahda si aad dayn isaga celiso!
- Lacagta aad aamahato maahan mid aad adigu iska leedahay!

LIFAAQ IYO QORALADA MUHIIMKA

SU'AALAHA LA WAYDIIYO DANEEYAHA DAYN BIXIYAHA

- Dayn noocee ah ayaad bixisaan? Mashaariic noocee ah ayaa lagu maal-galiyaa daymahaas (Gadashada guriga, bilaabista ganacsiga, iibsashada gaadhi.)?
- Waa imisa xadiga dhalada/dulsaarku?
- Maxay tahay fiida iyo lacag bixinta labixiyo?
- Wadarta guud ee dhalada sanadka (tusale. Kharashka rasmiga ah ee daynta, oo ay ku jiraan kharashaadyada kale)?
- Miyaa la iiga baahanyaahy was/damiin si aan u helo daynta? Haddii la iiga baahanyahay waa noocee waasku/damiinku?
- Shuruudaha damiinka/waasku ma ka duwanyhay dadka deegaanka, maadama oo aan ahay qaxooti amaa qof soo barakacay?
- Lacag intee le'eg ayaa la iiga baahanyahay in xagayga kaga soo daro daynta aan qaadanaayo, haddii ay jirto?
- Muddo intee in le'ega ayaa u dhaxaysa xiliyada bixinta lacagta dhalada/dulsaarka?
- Waa goorma xiliga la samaynaayo dayn celin kasta (bilowga bisha....)
- Ganaax intee le'eg ayaa la saara qofka ka dib dhaca xiliga dayn celinta?
- Meeshee ayaa lagu bixinayaa lacagta dayn celinta?
- Wakhti intee le'eg ayay qaadanaysaa in qofku uu helo daynta uuna qaato lacagta?
- Imisa jeer ayaan imaadaa halkan si aan u dhamaystiro codisashada daynta?
- Cadaymo noocee ah ayaa la iiga baahanyahay in aan ula imaado dayn bixiyaha, si aan u helo daynta?
- Miyaa la iiga baahanyahay in aan bixiyo dhalada/dulsaarka igu hadhay, haddii ay aan daynta celiyo ka hor inta aysan gaadhin mudadeedii loogu talagalay?
- Miyuu jiraa caymis qasab amaa mid laga maarmi karo, haddii aan dayn qaato? Haddii ay taasi jirto, kharash intee le'eg ayaa ku baxaya, maxayse tahay sababta loo galayo caymiska ?
- Wax soo saarka dayntiinu ma yahay mid quseeya qaxootiga amaa dadka barakacayaasha ah ?
- Fogaan intee le'eg ayuu xafiiskiina aan gaynaayo daynta aan bixinaayo uu u jiraa gurigayga amaa meesha aan daganahay/meheradaydu tahay ?
- Miyaa la iiga baahanyahay in aan la galo shirarka si aan dayn u leho?
- Wakhti intee le'eg ayaa lagu jiraa shirarkaas?
- Miyaad iga hubinaysaan in dayn kale la igaga leeyahay hay'ad kale lacagta?

JAWAABAHA LAYLISYADA

CAAWIYAHA TABABARKA X.1.3: Faaiidada iyo khasaaraha ay leeyihiin hababka kala duwan ee lacagta loo helo/sameeyo

FAAIIDADA IYO KHASAARAHA AY LEEYIHIIN HABABKA KALA DUWAN EE LACAGTA LOO HELO/SAMEEYO

	Faaidada ku jirta	Khasaaraha
Iibinta hantida	• Dukaanlayaashu waxay did kaaga iibinayaan hantidaada, ka dib marka aad iibiso	• Halista in ay alaabtu lumiso qiimihii ay taaganayd • Haddii alaabtu ay tahay tu wax soo saari jirtay, waxa qoyska ka baxaya kharash dheeraad ah, maalinba maalinta ka danbaysa
Kaydka ama dhigaalka lacagta	• Degdeg aya loo heli kara • Wa hanti ku gaar ah • Malaha wax dhala ah • Waxad doonta ayad ku qabsan kartaa (ma jiro wax ka hor istaagi ka roo awodada ka baxsan)	• Waxad iska dhamaynaysa lacagta • Waa in lacagta la auriya mudo badan, waxan suurta gal ah ay ay dabooli waydo baahidaada • Waxad waayi karta lacag ad kula tacasho arimaha degdega ah
In dayn laga qaata dayn bixiyeyaasha aan rasmiga ahayn (Qoyska, dukanleyaasha...)	• Waa deg-deg • Lacag isku gudbin deganka ah • Ma leha nidaam lagu maamulo/hirgaliyo	• Waa qaali • Khatar badan: Haddii ad iska bixin kariwaydo, dayn bixiyu wuxuu kugala kici kara ficilo cul-culus oo ay ka mid tahay cabsi galin • Ma jiro sharci kaa ilaaliyo xad-gudubyada kaaga iman kara dayn bixiyaha • Si fudu ayaad u qaamoobi kartaa
In lacag laga daynsado hay'adaha sharciga ee dayn bixinta(bangiga, hay'adaha kaydinta lacagta iyo bixinta daymaha yaryar, Ururada iskaashatada ee kaydinta lacagta iyo bixinta daymaha, Ururada iskaashatooyinka iyo kaydintalacagta iyo daymha	• Deg-deg • Waa la heli kara • Dhow • Waxga lagu diiwaangasha iyada oo la raacaya shuruucda sharciga ah • Waxay leeyihiin koox u qaabilsan la talinta (dhinaca bulshada, taakulada guud)	• Waxay guud ahaan bixiyaan dayn cadadkeedu yaryahay • Waxa laga yaaba in aad ka helaynin wax soo saar ku haboon mashaariicdaada ganacsi • Waxaa mararka qaar badan xadiga dhalada/-dulsaarka • Dayn bixiyeyaasha qaarkood waxay dayn i siin karaan haddii aan leehay ganacsi si sharci ah u diiwaan gashan

KAARKA MUDADA DAYNTA IYO QEEXIDA EREYADA

DHALADA/ DULSAARKA

Xirfadlaha ay macamishu saarto kharash loogu suurta galinayo helida daynta ugu jaban uguna haboon marxaladiisa (daynta guryaha) ee laga helo bangiyada iyo hayadaha lacagta ee kale.

DILAALKA AMAAHDA

Cadadka lacagta ee uu dayn qaatuhu u caliyo Dayn bixiyaha oo ay ku jirto lacagta daynta lafteeda, si ay ugu suurta gasho inuu isticmaalo lacagta uu ka daynsaday dayn bixiyaha.

GANAAXYADA

Cadadka daynta ee uu fasaxay daynbixiyuhu, dulsaarka saafiga.

MUHIIMADA

Qofka bixinaaya daynta aad qaadatay, haddii aad iska bixin kari waydo. Qofka waxaa laga codsan kara inuu saxeex ku yeesho heshiiska lala galayo dayn bixiyaha. Damaanaddu waxay noqon karta hanti.

DAMAANAD

Cadadka lacagta ee looga baahanyahay inuu dayn qaatuhu siiyo dayn bixiyaha, marka uu ku guul daraysto inuu iska bixiyo daynta (tusale la wareegista hantida, gaadiidka, kaydka lacagta ...)

XILIGA NAFISKA

Bixinta dhamaan amaa qayb ka mid ah daynta, ka hor xiliga ku xusan heshiiska.

KA FIIRSASHO

Saamiga lacagta ee gacanta kuugu jira ee aad ku maalgalinayso mashruuca ganacsigaga, ka hor inta aadan hay'adaha lacagta aad dayn ka amaahan. Qaybaha lagu biiraayo dayntu waxay ka imaanaysa kaashka gacanta lagu hayo iyo kaydka.

SO HORUMARINTA BIXNTA DAYNTA

Xiliga u dhaxeeya qaadashada daynta iyo xiliga ugu horaysa ee la bilaabaya dayn bxinta (qaado hada, bixi hadhow).

LACAGTA DAYNQAATAHA LAGU XIDHAYO INUU LA YIMAD SI UU U HELO DAYNTA

Heshiiska daynta oo la buriyo, bilaa ganaax. "xilliga hoos u dhigida" ee laga hor istaagayo qaadashada daynta.

WAX KU BIIRINTA SHAQSI AHAANEED

Hantidaada oo aad damaanad ku gashid , si aad u heshid dayn uga heshid hay'adaha lacagta. Haddi aad iska bixin wayso daynta, dayn bixiyuhu wuxuu la wareegi karaa, iibin karaa hantidada si uu helo raasamaalka iyo kharashyada kale. Mulkiiluhu ma waayi karo hantida guryaha daynta lagu dhisay, inta u lasoo baxaayo waajibka dayn bixinta ee saraan.

CAAWIYAHA TABABARKA X.3.1

Xisaabi qiimaha daynta Meshak (oo Dhamaysitiran)

MAGACA WAX SOO SAARKA	BANGIG QARANKA	MAYKRO FAYNANSI	BANGIGA UGU FIICAN DAYNTAADA
Dhalada sanadlaha ah (APR)	6% sanadkii	5,5% sanadkii	6% sanadkii
Mudada daynta	5 sano (60 bilood)	7 sano (84 bilood)	6 sano (72 bilood)
Cadadka daynta ee la celinaayo anad kasta (dayn celin billaha ah)	193.33 Dólar	143.70 Dólar	165.73 Dólar
Wadarta guud ee la bixinaayo (mudada daynta x dayn celinta bilaha)	193.33 x 60 = 11,599.68 Dólar	143.70 x 84 = 12,070.84 Dólar	165.73 x 72 = 11,932.48 Dólar
Qiimaha rasmiga ah ee daynta	11,599.68 – 10.000 = 1,599.68 Dólar	12,070.84 – 10.000 = 2,070.84 Dólar	11,932.48 – 10.000 = 1,932.48 Dólar

NOTES

CAAWIYAHA TABABARKA X.3.3

Shax koobaysa doodaha saamaynta ku leh hab-dhaqanka xulashada dayn bixiyaha iyo daynta (dhamaystiran)

SHURUUDAHA MESHAK UU KU DOORANAYO DAYN BIXIYAHA IYO DAYNTA

ARINKA SAMAYNTA LEH	BANGIGA QARANKA	MIKROFAYNANSIGA	BANGIGA KUU FIICAN EE DAYNTA
Lacagta dhalada ee daynta laga bixyo	• Kharashka rasmiga ee daynta oo yar	• Lacagta dhalad/dulsaarka a ee daynta laga bixiyo oo aad u hoosaysa, kharashka rasmiga ee daynta oo aad u sareeya maadama oo ay mudada dayntu tahay mid dheer (sanado badan)	• Kharashka rasmiga ah ee dayntu waa dhex dhexaad
Dhibyarida helista daynta/shuruudaha leh	• Suurta gal ma aha, sababta oo ah Meshak macmiil lama ahayn bangiga muda gaadhaysa 6bilood. • Waxaa laga rabaa 100 dolar (si uu u helo (mashruuca ku kacaga 10,000)	• Waxasa looga baahanyahay inuu xubin ka noqdo Hay'adanin kaydinta Lacagta iyo bixinta daymaha yar yar (Mikrofaynansi)	• Suurta gal maaha, sababta oo ah Meshak, macmiim lama ahayn baniga 12 bilood, Waxaa looga baahanyahay in la yimaaddo 200 doolar si uu u helo dayn dhan 200 dolar)
Cadadka ugu sareeya ee daynta uu qofku qaadan karo	• Cadad ku filan	• Cadad ku filan	• Cadad ku filan
Tirada xiliga dayn celinta, inta u dhaxay	• Bil kasta	• Bil kasta	• Bil kasta
Adeegyada ka baxsan kuwa lacagta ee la helayo (sida tababarada)	• Maya	• Haa (Wuxuu noqon karaa mid muhim u ah Meshak si uu u helo taa taako / dabagal)	• Maya
	• Waa dayn qaali ah, mana laha wax taakulo ah, Meshaka waxaa looga baahanyahay inuu sugu 6 bilood si uu u helo daynta	• Dayntu waa mid aad qaali ah u ah, balse waxay leedahay taakulada dhinaca la talinta ganacsiga, loogamana baahno inuu la yimaado wax lacag ah oo uu la yimaado	• Waa daynta ugu qaalisan • Waa in uu qofku la yimaado lacag aad u badan si uu daynta u helo

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KH

WAXBARASHADA MAALIYADEE SU'AALO

KA DOORO HABKA CELINTA DAYNTA IYO GUDBINTA LACAGTA WAX SOO SAARKA DAYNTA

KH1. Kaarka lacagta lagula baxo waa mid aan u isticmaali karro.

- ☐ **b.** Inaan kula baxo lacag, lacagtana ku bixiyo.
- ☐ **t.** Kaliya kula baxo lacagta.
- ☐ **j.** Inaan kula baxo lacag, xitaa haddii ay lacagi iigu jirin akoonkayga.

KH2. Qof ayaa iga xaday kaarkaygi bangiga, sidaas darteed maxaa ila gudboon inaan yeelo?

- ☐ **b.** Waxba kama welwelayo, maadaama oo uusan tuugu garanaynin lambar sireedka(password), sidaas darteed, waxba kama welwalayo. Wax aan ka qabanayaayina ma jiro.
- ☐ **t.** Waxaan si degdeg ah ula xidhiidhayaa bangiga, waxaanan xidhayaa ama bolock garaynayaa kaarkayga.
- ☐ **j.** Waxaan si deg-deg ah ula xidhiidhayaa bangiga, waxanan, la soo baxayaa kaar cusub.

KH3. Gudbinta lacagtu waxay qofka u saamaxdaa.

- ☐ **b.** Inaad furato akoon bangi.
- ☐ **t.** In lacagta aad meel ka saartid, meel kalena aad gaysid.
- ☐ **j.** Inaad hesho dayn, si aad ugu bixiso waxyaabaha aad iibsanaysid.

KH4. Maxay tahay wadada ugu amaansan ee aad lacagta lagu diri karo?

- ☐ **b.** Qaado taksii amaa minibas.
- ☐ **t.** Lax xidhiidh sarkaalka gubdinta lacagta ee bangiga/hayada lacagta si uu kuugu gudbiyo lacagta.
- ☐ **j.** ILa xidhiidh qaraabada.

Jawaabaha sualaha: KH1:b KH2:t; KH3:t; KH4:t

1. SI AMAAH AH UGA FAAIIDAYSO HABKA BIXINTA

Habraacii hore waxaan ku soo baranay si loo xusho daynta loona kaydiyo wax soo saarka daynta ee ku haboon marxaladaada. Hadda waxaan baranaynaa sida ugu haboon ee loo xusho hababka kala duwan ee loo adegsado inaad lacag bixiso. Tusaale, lacagta aad ka bixinayso waxa aad iibsanayso.

Haddii aad doonayso inaad bixiso lacagta waxa aad iibsanayso, muxuu yahay habka suurta galka ah ee aad ku bixinayso lacagtaas?

Waxaa hoos ku xusan hababka kala duwan ee lacag bixinta iyo shaqooyinka lacag bixinta

- Lacag kaash ah
- Kaarka bangiga
- Adeegsiga internetka ee bixinta lacagta
- Lacagta bangiga lagu gudbiyo ee sida tooska ah looga jaro kaydkaaga
- Boorsada dhigitaanka ah
- Habka elektaronika ah
- Habka lacagta bixinta mobaylka (Haddii uu adeegaasi ka jiro dadka laga hadlaayo)
- Kala badalasho

Dhamaadka habraacan, qaybta jawabaha laylisyada, waxaad ka helaysa shaxda sharaxaysa faa'iidooyinka iyo khasaaraha uu leeyahay hab kasta oo loo adeegsado bixinta lacagaha.



DARAASAD MOWDUUCEEDKA 1AAD

KAARKA 1AAD EE JOSEF

Waa maalin Jimce ah oo ku beegan dhamaadka bisha, Josefna wuxuu soo qaatay lacagta kaashka ee oo hay'ad caalami ahi oo bil kasta ka shaqaysa xerada qaxootiga, ay ugu deeqday qosykiisa. Bishan hada lagu guda jiro waxaa dhacay isbadal. Halkii ay hay'adu ay lacagta ku bixin jirtay, kaash, waxay isaga iyo dhamaan dadka kale ee gargaarka siiso ay lacagta ku siinaysa Kaarka bangiga. Maalmo yar kadib, Josef ayaa isgarab taagay ATM, wuxuuna xasuutay inuu boorsadiisa lacagta ah ay ugu jirto Kaarka bangiga, wxuuna isku dayayaa inuu isticmaalo. Wuxuu raacay macluumaadka iskiriinka, waxaana u suurta gashay inuu arko lacagta ugu jirta. Intaas kadib, wuxuu go'aansaday inuu la baxo 50 dolar, maadaama oo ay xaaskiisu kadalbatay lacag kaash ah, oo ay isaga bixiyaan dayn, uu ku lahaa qof ku nool xerada qaxootiga. Markii xerada ku soo socday, wuxuu ishortaagay dukaan yar oo super market ah. Wuxuuna halkaas ka iibsanayaa in bariis ah iyo biyaha lacabo ee caagadaha. Wuxuu go'aansaday inuu lacagta ku bixiyo kaarka uu wato, maadama oo uu ogaaday in uu dukaanku taas aqbalaayo. Wax waliba caadi ayay ugu socdeen, aadna wuu ugu faraxsanyahay.

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 2AAD

MARY WAXAY ISTICMALAYSAA KAARKA

Kadib markii uu booqday, hayado badan oo ah kuwa lacagta bixiya marar badan, uuna u bandhigay dhamaan dhukementiyada looga baahanhay, Mary waxaa ugu danbaytii u suurta galay in ay furato akoon bangi. Bangigan, waxa uu leeyahay kaarka, kaas oo ay Mary ay muda badan si heerkeedu hooseeyo ay u isticmaali jirtay. Kadib markii ay booqataty, suuq, ay doonaysay in ay ka iibsato xooga alaab ah oo ay u doonayso dukaankeeda, Mary waxay istaagtay meesha ATMka si ay ugula baxdo xoogaa lacag ah, qof adeeg bixiya oo yimaada dukaankeeda. Markii ay u sii lugaynaysay dukaankeeda, waxay aragtay beer kabo ah oo aad u quruxbadan, oo ay u doonaysay wiilkeeda wayn, Mary markaas lacag ku filan kumaysan haynin gacanta, balse waxay haysatay Kaarkeeda, waxayna goaansatay in ay isticmaasho kaarkeeda, si ay u bixiso lacagta beerka kabaha ay ku iibsatay. Waxay aad ugu faraxday in ay haysato kaarkaas

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 3AAD

MESHAK WUXUU ISTICMAALAYAA KAARKIISA

Meshak waxaa hada laga soo wacay bangiga. Maadaama oo uu macmiil fiican uu layahay bangiga, wuxuu bangigu siiyaa kaar, u saamixi kara inuu lacag ku bixiyo, xitaa hadii aysan lacagi ugu jirin akoonkiisa Wuxuu aad ugu farxay arintan, maadaama oo uu ogaaday inay aad u faa'iido badantahay in lacagta lagu bixiyo kaarka, waayo wuxuu hada ku guda jiraa xilli uu samaysanaayo tukaanka lagu iibiyo cabitaanka oo ah mid labaad. Maanta wuxuu aaday meesha lacagta, wuxuuna isticmaalay kaarkiisa, isaga oo aan wax taxadar ah siinin, dhamaan kharashka uu bixinaayo. Maadaama oo ay tahay xili wax xaafadaha loo iibiyo xaafadaha, wuxu isaga oo taas fiirinaaya uu dhar u iibiyay caruurtiisa. Wuxuu had iyo jeer, ka fikiraa inuu kharashkiisa fiiriyo dhamaadka todobaadka,balse wakhti uma helin taas. Bisha dhamaadkeeda, wuxuu ogaaday inuusan haysanin lacag ku filan oo isaga bixiyo kharashkii uu ka isticmaalay kaarka. Waxaa looga baahanyahay inuu bixiyo lacag dhalo amaa dulsaar ah oo badan, maadaama oo uusan samaynin wax taxadar ah.

QEEXID

Kaarka bangiga ee lacagta

Kaarka bangigu wuxuu kuu saamaxayaa in aad lacagtaada kala baxdo akoonkaaga, adiga oo kaarka galinaaya mashiinka lacagta ee loo yaqaan ATM, oo ah aalad awtomatik ah oo kuu suurta galinaysa lacagta doonaysid inaad la baxda. Ka sokokow lacagta aad kala baxayso bangiga, waxuu kaarkani kuu saamaxayaa inaad hubiso cadadka lacagta ee kuugu jira akoonkaaga. Dhanka kale waxaad kaarkan ku iibsani kartaa cuno, shidaal, dhar. Waxaa kale oo aad ku bixinin kartaa kirada guriga, qofka guriga aad ka kiraysatay yahay mid aqabalaaya inaad kaaarka u isticmashid bixinta lacagta kirada. Akoontiyada qaarkood, waxay kuu fududaynayaan inaad kaarkaaga u isticmaashid bixinta biilashada kala duwan iyo inaad mobaylkaaga ka buuxsato marka ay kaa dhamaato kaarka mobaylku. Bangi kastaa wuxuu leeyahay network ku xidhiidhsan ATM oo isaga gaar u ah. Hasa yeeshe, waxad kaarkaaga u isticmaali kartaa inaad lacag kala baxdid mashiinada ATMka, amaa bangigaaga ha ahaado amaa ku kale. Hasa yeeshe, bangigaagu, wuxuu kaa jarayaa xoogaa fii ah, mar kasta oo aad lacag ATMka bangiyada kale aad ee ka baxsan kaaga ad macmiilka la tahay aad lacag kala baxdo adiga oo isticmaalay kaarkaaga. Waxa xusid mudan inaad kaliya isticmaali kartid dheelitirka lacagta ee kuugu jira akoontigaaga. ATMkaagaaga waxaad lacag ku shuban kartaa inta jeer ee aad doonaysida, iyaga bangigu lacagtaada kuugu wareejinaayo ATM, waxaa kale oo aad isticmaali kartaa networkiyada xidhiidhka ee ka jira dalkaaga, iyada oo ay taas ku kala duwan yihiin dalaku. Haddii uu kaarkani yahay mid aad ka qaadatay, xafiis amaa hay'ad, waxay lacagta ku buuxinayaa marka xili la joogo (tusaale bil kasta), si aad ugu xisaabtanto lacagta kuugu taala baniga si joogta ah.

Kaarka deynta ama lacagtiisu qadimantahay

Kaarkan lacag bixinta waxaa loo adeegsadaa habka lacag gudbinta/adeegsiga bangiga ee elektarooniga, waxa taas u dheer lacagta oo aad kagala bixi karto mashiinka ATMka ee bangiga, waxaad kaarkan u adeegsan kartaa in aad wax kaga iibsato dukaanada ama bakhaaro badan.
Hasa yeeshe waa in ay marka hore lacagi ay kuugu jirto akoontigaaga bangiga si ay taasi kuugu suurta gasho. Lacagta aad bixisay ee aad wax ku iibsatay, waxaa isla markaasna laga jarayaa akoontigaaga bangiga. Baaqiga lacagta ee kuugu jira akoontigaaga waxaad ka ka hubin kartaa mobaylkaaga, haddii uu leeyahay adeega bangiga. Mararka qaar, waxaad, bangiga waxaad ka heli kartaa warbixinta qoraalka ah ee ku saabsan akoontigaaga, oo cadaynaysa wadarta guud ee lacagta laga jaray iyo baaqiga lacagta ee kuugu jira akoontigaaga bangiga.

Kaarka daynta

Guud ahaan, kaarka amaahdu wuxuu kuu saamaxayaa in aad inaad wax iibsatid sida kaarka kale ee lacagtu ku jirto. Hase yeesha, faraqa ugu way nee u dhexeeya kaarkan iyo kan ay lacagtu ku jirto waxuu yahay, iyada oo aad kaarka amaahda, aad wax ku iibsan karaysa kaarka amaahda xitaa haddii aysan lacagi ku jirin akoonkaaga bangiga, iyda oo hay'dada lacagta ee kaa iibsay kaarku kugu ay kugu yeelanayso dayn .
Sida uu dhigaayo heshiiska kala iibsiga kaarka amaadu, waxaa lacagta aah wax ku iibsatay/daynta waxaa (marar badan laga jirayaa akoonkaaga bangiga, iyaga oo lagu saarayo dhalo/dulsaar ka badan tahay tan la saaro kaarka lactiisu ay qadimantahay ee caadiga ah). Cidda ama hay'ada lacagta ee kaa iibisay kaarku waxy si joogta ah ay kuu siinayaa warbixinta akoonkaaga, wadarta guud ee laga jiray amaandaada, daynta ee la bixiyay iyo dhalada/dulsaarka. Wakhtiga xaadirka ah waxaa macluumaadkan oo dhan ka hubin karta khadka internetka.

BOORSADA JEEBKA EE DHIGITAALKA AH



DARAASAD MAWDUUCEEDKA 4AAD

JOSEF WUXUU LACAGTA BIILKA KU BIXINAYA MOBAYLKA

Joseph wuxuu doonayaa inuu soo iibsado kabo cusub oo uu kaga shaqeeyo beerta, wuxuu dhex lugaynayaa jidhka ganacsiga ee magaalada, wuxuuna arkayaa dukaan qiima fiican ku iibiya kabaha. Wuxuu galayaa dukaanka, wuxuuna isku eegaya beer kaba ah, isagoo intaas ka dib go'aansanaya inuu iibsado. Ninaka dul taagan mashiinka lacagta ayaa u sheegaya inuu bixiyo lacagta kabaha isaga oo adeegsanaysa Boorsada lacagta ee dijitaalka ah, oo qof walba ka hadlaayo. Joseph wuxuxu waydiinayaa: "Wax faa'iida ah miyaan ka helayaa hadii aan isticmaalo boorsada dijitaalka ah?". Dukaanlaha ayaa u sharxaya inuu qiimuhu isku mid yahay, balse in aan looga baahnayn inuu kaash gacanta ku qaato haddii uu isticmaalayo boorsada dijitaalka ah, waxa kale oo uu sheegayaa tahay qof kasta ay amaan u tahay. Joseph, wuxuu boorsada dijitaalka ah ka soo degsanayaa khadka, isaga oo ku shubanaaya 30 doolar, markii ugu horaysay. Wuxuu iskaan garaynayaa koodhasha isaga oo raacayaa tilmaamaha uu siinaayo dukaanluhu, waxaana telefankiisa uga soo baxaya fariinta ah "lacagtii waad bixisay". Isaga oo faraxsan, wuxuu qaadanayaa bacdii ay kabuhu ugu jireen, wuxuuna tijaabiyay habkan cusub ee lacagta lagu bixiyo.



DARAASAD MOWDUUCEEDKA 5AAD

MOUSSA WUXUU LACAGTA KU BIXINAYAA KOODHKA QR

Mary iyo Moussa waxay go'aansaday in ay booqdaan suuq cusub oo dhawaan laga furay magaalo wayn oo ku dhaw. Waxay maqleen inuu suuqu uu ku dhex yaalo dhismo casri ah oo aad u qurux badan. Waxay iyaga oo wata caruurtooda dhex lugaynayaan halkaas, wuxuuna muusa xasuustay in ay u baahanyihiin in ay gurigooda u iibiyaan guluub nal oo cusub. Waxay meesha ka arkeen iibiyaha qalabka korontada oo ay ka heli karaan guluubka ay doonayaan. Markii ay xusheen guluubka ay doonayaan kadib, ayaa haweenaydii lacaghayaha ka ahayd dukaanku ay sheegaysaa in ay macaashiisha lacagta ku bixisa boorsada Jeebka ee digitaalkaal ah ay ugu talagaleen 5% oo qiima dhimis ah maadaama oo uu jiro cudurka COVID-19. Muuse wuxu xasuusanayaa in mobaylkiisa ay ugu jirto abilikeshinka boorsada jeebka ee digigaalka, wuxuuna haweenayda su'aalayaa inuu lacagta ku bixin karo isaga oo isticmaalaya abilikeeshinkiisa, taas oo ay ka xaqiisay, waxayna u sheegaysa inuu wax yar sugo, si ay ugu soo saarto koodhka QR. Wuxuu Iskaan garaynayaa muuqaalka QR ee lacaghayaha, waxaana ay lacagtii ay si awtomatik ah ay uga soo baxaysaa boorsadaada jeebka ee digitaalka, sidaas wuxuu ku bixyay lacagtii.
Moussa iyo Mary waxay ku farxayaan isticmaalka habkan markii ugu horaysay.

QEEXID

Borsada dijitaalka ee lacagta lagu qaato waxaa looga jeeda aalad elektaroniki ah, oo ku shaqaysa khadka internetka, ahna softweer gofka u saamixi karta inuu gofka kale ugu wareejiyo lacag digitaal ah, marka uu iibsanaayo alaab amaa adeeg ganacsi.

Nooca aalada	Faaiidada	Khasaaraha
Boorada Electarnika ah (E)	• Waxax kala soo bixi kartaa lacagtaada marka aad dukaamaysanayso :Looma baahno inad saf u gasho, melaha lacagta laga saaro, daaqada bangiga ee kaashka laga qaato. • Looma baahna inaad jeebkaaga aad lacag ku qaadato, marka ad bixinayso biilka ama kharash kale. • Boorsadaada electronika waa amaan, waxayna leedahay PIN kuu ilaaliya amanka lacagtada. • Looma baahno inad buuxiso wax foom ah, sida ula baxdo amaa aad u dhigato lacagtaada, waayo hal mar oo ad bangiga aado ayaa lagaaga baahanhay halkii aad kaga noq noqon kahayd. • Waa aalad aad ugu sahlan ATMka, amaa lacag bixiyaha bangiga, oo kuu fududaynaysa in lacag la baxdo marka aad dukamaysanayo. • Tafaariiqleyaasha mararka qaar ku yar lacagta. • Lagaagama baahno inaad bangiga ku leedahay. • Si deg-deg ah ayaa look ala qaadanayaa lacagta.	• Waxaad hilmaami kartaa PINkaaga. • Waxaa lagaa xadi kara mobilkaaga. • Waxaa kugu adkaanaysa inaad ku socoto miisaaniyadaada.

TALOOYIN KU SAABSAN AMAANKA BOORSADA DIGITAALKA

- Cidna ha la wadaagin PINkaaga.
- Waligaa qoraal ha ku haynin PINkaaga, xidh amaa la isticmaal kaargaaga SIMka.
- PINkaaga ha ku seef kagarynin mobaylkaaga si aad u xasuusato.
- Had iyo jeer dalbo inaad fiirisida waxa ka baxaya marka aad samaynayso lacag gudbin farabadan, siiba marka aad si deg deg ah aad wax u isticmaalayso.
- Laba jeer xaqiiji magaca iyo cadadka lacagta, marka aad lacag u dirayso qofka kale, ka horta inta aadan galin PINka.



DARAASAD MOWDUUCEEDKA 6AAD

JANE WAXAY ILOWDAY KOODHKA SIRTA

Jane waxay ku qasbantahay in la soo baxdo lacag, si ay ugu bixiso meherada ay doonayso in ka samaysato suuqa, si dhamaadka usbaacan ay ugu bilawdo in ay ku iibiso alaabteeda. Waxay hadda ka daahday balantii ay la lahayd maareeyaha suuqgaynta. Sidaas darteed, waxay ku weecatay goob leh ATM waxayna doonaysa inay kala baxdo lacag, waxayna durba bilaabaysaa lacag in ay ATMka galiso macluumadka. Waxay galisay koodhkii sirta ahaa, balse ATMku wuxuu soo saaray inuu koodhka ay galisay khaldan yahay. Yaab ayaa ku dhacay, waxayna mar labaad mashiinka ku qortay koodhkii, balse mashiinkii ayaa diiday inuu shaqeeyo. Jane way wareertay, waxayna isku dayday in mar sadexaad, iyada wax ka badashay koodhka sirta ah. Intaas ka dib, ATMkii ayaa diiday inuu shaqeeyo, waxa kale oo uu ku dhagay kaarkeedii. Jane aad bay u niyajabaysaa, maadaama oo ay u suurta gali wayday in ay la soo baxday lacagtii ay rabtay, iyada oo ay taas u dheertahay mashiinkii oo kaga dhegay kaarkeedii!



TALOOYINKA KU SAABSAN HABKA AMAANKA AH EE LOO BIXIYO LACAGTA

• Si taxadar leh u isticmaal nidaamkaaga bxinta lacagta, had iyo jeer maanka ku hay inaad ku dhex jiro misaaniyadaada oo aadan isticmaalin lacag ka badan inta miisaaniyada kuugu qorshaysan.

• Xafid kaarkaaga, hubi inaad meel amaan ah aad dhigto buugaaga, boorsadaada dijitaalka iyo mobaylkaaga.

•Waligaa qof kale ha u gacan galin kaargaaga lacagtga, ama buugaaga jeegga.

• Waliga ha sexeexin jeeg banaan (adiga oo aan ku xusin cadadka lacagta).

• Waliga lambargaga sirta ah, ha ku dul qorin kaarkaaga bangiga.

• Waligaa lambarkaaga sirta ah ha ku dirin, e-mail, fariinta SMSka, fax ka IWM...

• Taxadar badan samee marka bixinta lacagta aad u adeegsanayso khadka internetk. Xaqiiji amaanka bogga/barta aad isticmaalaysid (ciwaanka buuggu waa inuu ku yahay mid ku bilaabma, (https) waa inuu jira waa in ay salka hoose ee midigta shaashada ay ka muuqato calaamada Padlocka.

• Si taxadar leh oo joogtaysan u hubi warbxinta bangiga ee akoontigaaga.

• Si degdeg ah bangigaaga ula socodsii marka aad akoonkaaga aad ka aragto isbadal aad fahmi wayday oo aadan micnayn karin

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Waxaa jira nidaamyo kala duwan oo lacagta lagu bixiyo: Sida lacag cad amaa kash, dalab toos ah, mobaylka oo lacagtga lagu bixiyo iyada oo la adeegsanaayo khadka internetka.
- Nidaam kasta oo lacagta lagu bixiyaa wuu ka duwan yahay midka kale. Marka laga hadlayo wax soo saarka daynta, nooc kasta oo lacagta loo bixiyaa waxaa la socda kharash, faa'iido iyo khasaare, kaas oo ku xidhan nooca kharashka ee aad doonayso inaad bixiso.
- Kaar kasta oo aad isticmaalayso wuxuu kuu suurta galinayaa inaad la baxdid lacag, kala baxdo lacag aad alaab tafaariiq ah aad ku iibsato (adiga oo isticmaalaaya lacagta kuu taala bangiga).
- Kaarka dayntu wuxuu kuu suurta galiyaa inaad hesho dayn deg-deg ah (haddii xataa lacagta aad doonayso aysan kuugu jirin akoontigaaga bangiga xilliga aad wax ka iibsanaysid suuqa).
- Nidaam kasta oo lagu bixiyo lacagta waxaa la socda khatar u gaar ah! Waa in aad si taxadar leh aad u isticmaasho nidaamka aad u bixiso lacagta, adiga oo maanka ku hayo in aadan ka bixin miisaaniyaddaada oo aadan isticmaalin lacag aan qorshaha kuugu jirin.

2. BARO HOWL WADEEENAGA ISU GUDBIYA LACAGAHA

Hadda waxaan, baranaynaa wadooyinka kuu banana ee aad kala xulan karto marka aad lacag diyarso amaa qaadanayso lacagta lagaaga soo diray dalka gudihiisa amaa dibada, Waxaan fiirinaynaa faadiidooyinka iyo kharaasaraha uu leeyahay mid kasta oo ka mid ah nidaanka.

DARAASAD MOWDUUCEEDA 7AAD

JANE
LACAG AYAY HELI WAYDAY

Jane waxaa si deg deg ah u soo wacaya waalidkeed. Waxay u sheegayaan in roob wayn oo dabayl wataa, uu gurigooda ka qaaday saqafka. Waxay ka codsanayaan in ay u dirto lacag ay ay ku iibiyaan alaab ay ku dayactiraan gurigooda uu roobku waxyeelada u gaystay. Jane waxay u taal xooga yar oo lacag ah, oo ay u qoondaysay dukaankeeda, hasa yeeshe, waxay go'aan sanaysaa in ay waalidkeed u dirto lacag ay ku dayactiraan guridooda, maadaama oo ay diidi karaynin codsiga waalidka. Waxay aadaysay Istaanka lay basasku ay ka qaadaan dadka iyo alabada ay wataan, ka hor inta aysan u jahaysan konfurta oo ah jahada ay ku baagantahay tuuladu. Waxay darawalka baska ay waydiisanaysaa inuu u qaado xoogaa lacag ah, waxayn u dhiibaysa lacagta iyo wax yar oo dheeraad ah, maadama oo u shaqo u qabanaayo. Saacado badan kadib, waxayogaanaysa in ay hooyadeed, aysan wali lacagtii helin. Jane waxay u malaynaysaa inuu darawalku yahay nin aamin ah, waxayna ogaanaysaa in in ay wadadu tahay mid khatar ah. Waxa kale oo ay ogaanaysa inuu baskii dhexda ku jabay, lacagtiina uu dirawalkii u istricmaalay inuu ku dayactiro gaadhiga xumaado. Waxay rajaynaynaysaa in in nidaamka ay ku dirtay lacagtu uusan daahin doonin lacagtaa, iyo in lacagta ay dirtay heli doonaan waalidkeed.

DARAASAD MOWDUUCEEDA 8AAD

MARY WAXAY ISTICMAALAYSA HABKA RASMIGA/SHARCIGA AH EE GUDBINTA LACAGTA

JMary waxay ogaanaysa ay bishu ay marayso maalintii ay hooyadeed ay lacagta u diraysa. Waxay had iyo jeer isticmaasha adeegbixye, hasa yeeshe mid ka mid ah shaqaalaha cusub, ayaa u shegaya in ay jirto meel lacagta gudbisa oo cusub, oo qiimihiisu jabanyahay, meeshana ka ag dohow. Waxay isku go'aansatay in ay tijaabiso meesha cusub, wayna aadaysaa. Waxay buuxinaysaa foomka arjiga ee gudbinta lacagta. Mid ka mid ah lacag bixiyaha meesha cusub, ayaa wuxuu u soo bandhigayaa liis ay ku qoran yihiin wakiilo farabadan, oo ay hooyadeed ka qaadan karto. Mary waxay la hadlaysa hooyadeed, waxayna siinaynaa ciwaanka amaa halka loogu hagaagu mid ka mid ah wakiilada ku sugan halka ay joogto. Maalin kaddib, Mary hooyadeed, ayaa aadaysa wakiilka lacagta ee ay Mary u soo sheegtay, waxayna tusaysa aqoonsigeeda, waxaana sidaas lagu siiyay lacagtii loo soo diray. Maaray waxay lacagta ay hooyadeed ay u dirtay ka bixisay koomishin ka yar kii hore ee ay bixin jirtay. Waa war aad u fiican Good! Mary waxaa hada soo wacaysa hooyadeed, oo xaqiijinaysa in ay heshay lacagtii ay u soo dirtay.

QEEXID

Lacag gudbiyeyaasha aan rasmiga ahayn (aan sharciyaysneed)

Waa lacag gudbiyeyaal aysan agoonin dowladdu. Sidaas daraadeed, dowladu kuma maamunsho sharciyada ay ku dhagdo hayadaha lacagta ee ay agoonsantahay.

Lacag gudbiyeyaasha sharciga Hay'adahani waa kuwo ay dowladdu maamunsho, ayna ku maamunsho sharciyada an u soo saartay hay'adaha lacagta.

LACAG GUDBIYEYAASHA RASMIGA AH	LACAG GUDBIYEYAASHA AAN RASMIGA AHAYN
• Xafiiska boosta (ayada oo la adeegsanaayo boosta iyo khatka internetka) • Shirkadaha takhasuska u leh gudbinta lacagta (iyaga oo isticmaalaya wakiilada ama khadka internetka) • Bangiyada (iyaga oo isticmaalya laamahooga kala duwan ee bangiga amaa khadka internetka) • Adeega lacag gudbinta mobaylka	• Dukaanalayda iyo ganacsatada • Tagsiyada iyo darawalada baabuurta • Asaxaabta iyo qaraabada

Adeegbixiye kasta, oo aad u xulato inuu lacagtaada si amaan ah kuugu gudbiyo, waxaa lagaaga baahanyahay inaad ku xulato shuruudaha hoos ku xusan:

- Kharashka lagu diyaaro lacagta (ee la siinaayo lacag gudbiyaha).
- Kharashka laguugu soo gudbinaayo lacagta (ee la siinaayo qofka ay lacagtu ku soo dhacayso).
- Dhawaashah (u dhawaasha diraha iyo qaataha).
- Amaanka (amaano xafidka).
- Degdegsiiyaha
- Koomishin isku gudbinta lacagta (haddii ay qusayso).

SUAALAHA

- Sideed lacagta u dirtaa? Dad lacag ma u dirtaa, ama dad dibada jooga lacag ma u dirtaa?

  ☐ **Haa** ☐ **Maya**

- Haddi aad dirto, maxay tahay sababta aad u dirto?

- Hab nuucee ah ayaa u adeegsataa dirista lacagta?



FARIIMAHA FURAHA AH

- Waxaa muhim ah, inaad aqoon u leedahay, tahayna qof la qabsaday nidaamka loo gudbiyo lacagta (dhukumentiyada aad la imanayso, kharshka, lacagta xidhiidhka ka dhexeeya lacag gudbiyeyaasha).

- Waxaa jira nidaamyo farabadan oo lagu gudbin karo lacagta sdia: Kaash, akoonka bangiga, bangi ilaa bangi, kashka oo agu xareyo bangiga, mobayl ilaa mobayl iwm.

- Xulo nidaamka aad ku gudbinayso lacagta, iyo lacag gudbiyaha adiga oo ka duulayo xaaladaada iyo mida qofka aad lacagta u dirayso. Adiga oo fiiranaaya dabeecooyinka sida kharashka dirista, koomishinka isku gudbinta lacagta, kharashka qaadashada lacagta, dhuwaanshaha), waxaad kuu suurta gali karta inaag goaan ka gaadho, habka ugu fiican ee kugu haboon ee aad ku gudbin karayso lacagtaada.

- Ku dir lacagtaada nidaam amaan ah, inaticmaal habka rasmiga ah/sharciga ah, waxanad fududaysa in ay qabraabadaadu qaaadato lacagta aad u dirayso.

CAAWIYAHA TABABARKA KH.2.1



CAAWIYAHA TABABARKA KH.2.2



CAAWIYAHA TABABARKA KH.2.3

Habka Marry

Mary waxay hooyadeed lacagteeda ugu dirtaa lacag gudbiyaha (sharciga ah)

Habka Joseph

Joseph wuxuu lacagta ka diraa boorsada dijitaalka ee moobaylka, asaxaabta uu u diro waxay lacagtaas ku helaan boorsada dijitaalka ee moobaylkooda.

Habka Meshak

Meshak wuxuu lacagtiisa ka diraa akoontigiisa bangiga

Habka Jane

Jane waxay lacagta ay hooyadeed ugu dirtaa wakiilada lacag gudbiyeyaasha , hooyadeed waxay lacagta ka qaadataa wakiilada lacag gudbiyeyaasha

3. SIDA LOO DIRO AMAA LOO QAATO LACAGTA

CAAWIYAHA TABARKA KH.3.1

HABKA 1AAD: Adiga oo adeegsanaaya habka gudbinta lacagta

- La xidhiidh amaa booqo bangiga amaa hay'ada lacagta (booqo ama isticmal khadka);
- Buuxi waaraaqda degdega ah ee lagu gudbiyo lacagta (oo tusaale ah);
- U tag qoraaga, waxaanad u gudbisaa macluumaadyada hoos ku xusan:

1. Magaca iyo lambarka akoontiga (haddii qofka lacagta loo diraayo uu leeyahay akoonti bangi),

2. Magaca iyo waraaqda aqoonsiga qofka loo dirayo lacagta (hadii qofka loo diraayo lacagta uusan lahayn akoon bangi).

- Qofka aad lacagta u dirayso u sheeg cadadka lacagta ee aad u dirayso, adiga oo ka duulaayo xiliga uu umudeeyay bangiga/wakiilka (kaas oo maaraynaaya daqiiqado kooban ilaa inta u dhaxaysa maalmo badan, qofka lacagta loo diyaariyo waxaa u suurta gali doonta inuu lacagta ka qaato bangiga, wakiilka isaga oo kaga qaadanaaya kaash, amaa loogu shubaayo akoonkiisa (aad xustay).

- Aad qoraaga/karaaniga, waxanad u gudbisaa macluumaadka muhimka ah ee ku saabsan, cadadka lacagta laguu soo diraayo iyo qofka kuu soo diraaya lacagtaas.
- Tus qoraaga/karaaniga aqoonsigaaga ama cadaymahaaga ku saabsan qofka aad tahay.
- Ka dib marka uu ka hubiyo kombiyuutarka isaga oo adeegsanaaya macluumaadka aad siisay karaaniga amaa wakiilku wuxuu ku siinayaa lacagta.

HABKA 2AAD: Inaan isticmaalo bangigayga aniga oo adeegsanaaya habka bangiga ee guriga

- Gal boga internetka ee bangiga, dhamaystir magaca aad ku isticmaashid iyo baaswardhiga.
- Marka aad gasho sistemka, dooro nooca akoonka ee aad doonaysid inaad ku dirto lacagta.
- Guji calaamada ay ku qorantaha gudbi/dir lacagta. Mararka qaar calamadan waxaad kasoo helaysaa Taabka bixinta lacagta.
- Marka aad gasho qaybta gudbinta, waxaa lagaaga baahanyahay inaad buuxisid macluumaadyada hoos ku xusan:

- Taariikhda xaqiijinta
- **Goobta:** Halkan waxaa lagu buuxinaya magaca iyo/amaa akoonka bangiga qaataha lacagta.
- Nooca lacagta: Gaar ahaan, lacagta laga isticmaalo deegaanka, in kasta oo ay sidoo kale noqon karto lacaga qalaad/caalamiga ah.
- **Cadadka:** Buuxi qiimaha lacagta la gudbinaayo.
- **Fikiarka:** Ka dooro fikirka bixinta (hanti, wax isku dhex jira, kiro amaa waxyaabaha kale ee ka soo baxay).
- **Sharaxaada:** Tani waxay tahay fariin loo diraayo lacag qaatahata.
- **E-mailka qaataha:** Wa ogaysiin ku saabsan in ay lacagtu gaadhay qaataha.

- Guji botonka sii wad", si aad u gudbiso lacagta, marka intaas samayso ka kadib, waxay lacagtu baxaysa taariikhda la xushay diristaeeda. Bangiyada qaar waxay heerarkan aan soo aragnay ku soo kordhiyaan kuwa dheeraad ah (SMS loo diro telefankaga, oo loogu talagalay in lagu xaqiijiyo gudbinta lacata, taas oo noqon karta PIN dheeraad ah loogu talagay in la xusho marka lagu jiro howshan. Guud ahaan waxaa ku soo gaadhay fariinta xaqiijinta oo kuugu soo dhacaysa websaydkan aad isticmaalaysid, iyada oo ay fariintu kuugu imanayso e-mail sheegaya in lagu guulaystay lacag gudbintaas.

- Gal e-mail bangiga aad isticmaashid. Dhamaystir magaca aad ku isticmaashid iyo baas woordhiga.
- Marka aad sistamka gashid kadib, dooro akoontiga aad lacagta u dirtay. Marka aad gasho qoraalada ka muuqda akoonka, waa in aad heshaa qoraal soo galay oo ku saabsan cadadka la diray, cidda loo diray in xiliga la diray.

HABKA 3AAD: Inaas lacagta ka diro boorsadayda dijigaalka ah

- Gal boorasadaada adiga oo adeegsanayaa ablikeshinka mobaylkaaga. Waxaa shardi ah in ablikeshinka kuugu jira telefankaagu yahay mid la mid ah midka uu isticmaalayo lacag qaatuhu.
- Guji Meenuga, kadibna xulo batanka “dir lacagta”
- Meesha banaan ee ay ku qoran tahay "ku", waxaad ciwaanka qofka aad la xidhiidhayso ka xulan kartaa buuga telefankaaga sida lambarkiisa telefanka amaa e-mailkiisa.
- Gali cadadka lacagta ee aad diraysid, xulo sababta aad lacagta u diraysid (bxinta lacag horay loo daynsaday, lacag lagu bixinayo cashadii shalay la isticmaalay iwm), kadib guji botonka “Sii wad”.
- Xulo habka lacag bixinta. Wuxuu noqon karaa baaqiga kuugu jira boorsadaada, amaa hababka kale ee bixinta lacagta ee horay kuugu xidhiidhsanayd boorsada (kaarka lacag bixinta, kaarka daynta, ama akoontigaaga bangiga IWM). Hadii aad doonaysid inaadnku isticmaashid kaar cusub, ablikashinka wuxuu ku waydiin doona faahfaahinta karaka. Adigoo gujinaya sii wad, ablikashinku wuxuu xaqiijinayaa dirida lacagta.

- Waxaa si toos ah ablikeshinkaaga ugu soo dhacaya ogaysiiska in aad heshay lacag.
- Marka aad furto ablikeeshinka, waxaad isla markiiba isbadal uu ka muuqanayaa lacagtii kuugu jirtay iyo dhaq-dhaqaaqa ugu danbeeya. Waxaad isla markiiba aad ogaanaysaa isha dakhliga ee lacagta, amaa qofka kuu soo diray lacagta iyada oo halkaas ay ku dhamaanayso shaqada abilkeeshinku.

NOTES

CAAWIYAHA TABABRKA KH.3.2

Foomka gudbinta lacagta (foomka lacag gudbiyaha)

FOOMKA GUDBINTA LACAGTA

Taariikhda

Cadadka

Nooca lacagta

MACLUUMAADKA LACAGTA DIRAHA

Magaca awowga:

Magaca:

Rugta laga helo:

Lambarka telefanka:

Taariikhda dhalashada:

Tirsiga aqonsiga ama basabor:

MACLUUMAADKA LACAG QAATAHA

Magaca awowga:

Magaca:

Quaasha hal xidhalaha ah, haddii uu qaatuhu haysan aqoonsi shaqaynaya:

Kharashka dheradka ah eek u baxaya adeega an muhimka ahayn ee loo bahan karo:

- ☐ Waxan doonaya in jeeg la iigu diro ciwaanka hoos ku xusan
- ☐ Waxan donaya in telefan aad iigula hadasho qaataha
- ☐ Fariinta la diraayo

SAXEEXA MACMIILKA

CAAWIYAHA TABABARKA KH.3.3

Foomka gudbinta lacagta
(Foonka lacag gudbinta calamiga ah ee bangiga)

FOOMKA GUDBINTA LACAGTA

Taariikhda

Cadadka lacagta

MACLUUMAADKA LACAGTA DIRAHA

Magaca awowga:

Magaca:

Rugta laga helo:

Lambarka telefanka:

TAARIIKHDA DHALASHADA

Magaca awowga:

Magaca:

Rugta laga helo:

Magaca akoonka caalamiga ah (ka kooban ugu yaraan 34 xaraf):

Tirsiga aqoonsiga bangiga (ka kooban ugu yaraan 11 ama koodhka deg-dega ah:

SAXEEXA MACMIILKA

FARIINTA MUHIIMKA AH

- Waxaa muhim ah in aad la qabsatid nidaamka loo diro lacagaha (dhukumentiyada loo baahanyahay, kharashka, isku xidhka ka dhexeeya lacag dirayaasha).

- Waxaa jira habab fara badan oo aad lacagtaada u dirsan karto: Sida lacag cadaan ah, lacagta akoonka oo aad kaash ahaan u dirsan karto, lacag cadaanka oo aad akoonka ku dirsan karto, lacagta akoonka oo aad akoon kale u diri karto, kaarka lacag bixinta oo aad kaash ka dirsan karto, kaarka bangiga oo akoonka u dirsan karto, kaarka bangiga oo kaar bangi aad u diri karto, kaarka bangiga oo aad moobaylka u diri karto, mobaylka oo aad moobayl u diri karto iwm. Teknolojigu wuxuu had iyo jeer samaynayaa isbadal cusub, waxaana lagaaga baahanyahay in aad had jeer aad la socotid lana qabsatid isbadalada cusub, oo kaaga fiicnaan kara kuwii horay aad ugu shaqaynaysay.

- Mar kasta oo aad lacag diraysid waxaa lagaaga baahanyahay in aad ku xisaabtanto xaaladaada gaarka ah, iyo mida qofka aad u dirayso lacagta si ay kuugu sahlanaato inaad xulato habka aad lacagta ku dirayso iyo lacag diraha (Kharashka ku baxaya dirista lacagta, koomishinka isku dirista lacagaha qalaad, kharashka ku baaxaya qaadashada lacagta, dhawaanshaha dhuleed) iyada ay waxyaabahani ay kaa caawinayaan inaad gaadho go'aanka ugu fiican.

LIFAAQA IYO DHUKUMENTIYADA MUHIIMKA AH

Su'aalah aad waydiinayso lacag diraha hay'adaha lacagta ee rasmiga (sharciga ah)

• Sidee ayaan lacag ugu diri karaa qaraabadayda?
• Foomam noocee ah ayaa la iiga baahanyahay in aan buuxiyo si aan lacag u diro.
• Foomam noocee ah, ayaa looga baahanyahay inuu buuxiyo qofka qaadanayaa lacagtu?
• Aqoonsi noocee ah ayaa la iiga baahanyahay si aan u diro lacagta?
• Aqoonsi noocee ah ayuu u baahanyahay qofka qaadanaaya lacagtu?
• Ma la iiga baahanyahay in aan akoon ku yeesho bangigiina si aan u diro lacag?
• Wakhti intee le'eg ayay qofka ay ku qaadanaysaa inuu helo lacagta la diray?
• Haddii aan lacagta ku diro abilikeeshinga mobaylkayga, qofka lacagta qaadanaya miyaa looga baahanyahay inuu leeyahay ablikeeshin kayga mid la mid ah?
• Waa imisa kharashka lagu gudbinaayo lacagtu?
• Qofka aan lacagta u dirayaa miyuu helayaa dhamaan lacagta aan u diray, misa waxa looga baahanyahay inuu bixiyo kharash dheeraad ah si uu u qaato?
• Sidee ayaan u xaqiijin karaa in lacagtii aan diray ay gaadhay qofkii aan u diray?
• Sidee ayaa qofka aan u diray lacagta loo ogaysiini karaa in ay lacag loo soo diray, lacagtaas ay soo gaadhsy halka uu ka qaadanayo?
• Ma burin/kansali karaa lacagta aan diray, wax ma ka badali karaa.
• Waa imisa sarifka lacagtayda loogu badali karayo lacagta laga isticmaalo dhulka uu ku suganyahay qofka aan lacagtayda u diraayo (haddii aan lacagta u diraaya wadan dibada ah, muxuu yahay karashka ku baxaya isku sarifka lacagtu?
• Haddii aan lacagta ku diraayo doolar, maxay tahay nooca lacagta ee uu ku qaadanaayo qofka aan u diraayo lacagta?
• Ma waxa la iiga baahanyahay in aan anigu imaado bangiga, misa waxa jira nidaam ii suurta galinaaya inaan lacagtayda u diro hal qof (internetka, e-mailka IWM).
• Bangigiinu laamo amaa wakiilo miyuuu ku leeyahay _____ (goobta uu ku suganyahay qofka qaraabadaada ah, ama qoyskaaga ee aad lacagta aad u dirayso)?
• Lacag ma diri karaa aniga oo adeegsanaaya telefoonkayga, haddii qofka aan lacagta u diri rabo uusan lahayn boorsada digitaalka ee lacagta? Hadii aan sidaas ku diri karaayo, halkee ayay ka qaadanayaan lacagta aan u dirayo.

JAWAABAHA LAYLISYADA

Faiidada, khasaaraha ku jira isticmaalka hababka kala duwan ee lacag dirista

Habka lacag dirista	Faiidada	Khasaaraha	Waxa loo isticmaalayo
Lacag cadaan ah (haash)	• Waxa fudud isticmalkeda • Si balaadhan ayaa loo aqbalaa (wa sharci) • Kharash malah • Si degdeg ah ayaad wax ugu iibsan kartaa	• Waxay halis u tahay xatoyo ama lumid • Waxba kama qaban kartid hadii lagaa xado ama ka luntggo • Cadadka la ogolyahay in laiswaydarsado oo xadidan (wax kasta kash laguma bixin karo, siiba marka laga hadlaayo lacag aad badan) • Ma laha raad raac (waxay dhib ku tahay maraynta miisaaniyada)	• Waxa lo adegsada muradyada malin laha ah sida gadashada waxyabaha yaryar • In xadido waxa ad dirayso xili gaar •Si ay kuugu sahlanaato in aad si deg deg ah aad wax u iibsato
Kaarka bangiga	• Waa amaan (marka si guud looga hadlayo) • Wuxu leeyahay raad raac ku aadan cadadka la iswaydarsaday, iyo waxa la iibsaday • Tuugo ma xadi karto (waxa la tirtiro kara ama la kansali kara lambarka sirta ah (PIN) hadii la xado ama uu lumo •Waxaa suurta gal ah in lagu iibsado alaab lacagteed aad u badan tahay •Waxaa lagu xidhi karo akoontiyada bangiga ee wadama dibada (ee ka baxsan gooba amaa dalka aad ku nooshahay) • Waxuu kuu Sali karaa in aad hesho adeegyo dheeri ah: Sida takylada dhinaca sharciga, caymiska, iibsashada tikitka diyaaradaha, helitaanka adeegyada lacagaha • Waxad ku heli karta aaminaad kuu suurta galisa in waxad dooni aad iibsat, in qiima dhimis laguu sameeyo iwm	•Mararka qaar qarkiisa aya badan: Siiba fiida sanadlaha ah, kharashka la bixida lacagta, bixixinta lacata iwm • Waxa ku soo wajihi karta halista inad la socon kari waydo kharashkaga • Halista inad hilmanta maaraynta lacagtada • Meel kasta lagama isticmaali karo: Waxay ku xidhantahay tafariiqlaha leh goobta loogu tala galay ee shaqada	• In maalin kasta la bixiyo cadad lacageed oo aad u badan • In la sameeyo iib shinle ah oo aad u baaxad badan • In lagu iibsado alaabo iyo adeegyo ee la xidhiidha kaarka (tusale bixinta lacagta tikitka diyaarada haddii uu kaarku leeyahay caymis)

Habka lacag dirista	Faiidada	Khasaaraha	Waxa loo isticmaalayo
Gudbinta bangiga iyo lacag la bixida toosha ah	• Lagaagama baahno inad meel aado, amaa kaash qaadado • Waxad wax iibsan kartaa marka kasta oo aad oonaysi 24ka saac • Waxay kuu suurta galinaysa inad samaysid gorgortan fiican	• Ma jiro qof la qabsado ama la tirx raaco (haddii ay dhibi timaado) • Waxaxolahaga xadi kara budhaca bogaga internetka, haddii hoga ad wax ka gadanaysa yahay mid aan amaan ahayn • Waxa suurta galk in meeshada laguugu keeniwaayo alaabta aad khadka (onlaynka) aad ku iibsatay • Waxad halis u tahay in aad garanwaydo kharashkaga, iyo inad marayn kari waydo misaaniyadaada t • Halista inad la socod kari waydo lacagta kaa baxaysa	• Inaad hesho gorgortan fiican • In si deg-deg ah aad wax uu iibsato, anad hesho faaiido dhiiri galinah (dhar, boogaan, DVD, tikit bilaash ah oo aad ku gasho shaw, tikit diyaaradeed oo bilaash ah iwm) • For rare items available only via the internet • In aad bixiso biilasha kala duwan (telefonka), haddii aad leedahay akoon bangi • In aad lacag bixiso adinka oo aan istaabanaynin qofka (COVID-19)
Boorada lacagta ee digitaalka	• Looma baahno inad leedahay akoon bangi , kaliya waxad u baahantahay mobayl iyo siim kaar • Waa sida ugu fudud ee aad qof kale lacag ad ugu diri karto	• Waxad halis u tahay in laga xado mobaylka • Waad hali u tahay inad ilowdo PINka/baas wordhiga • Waxad kug adkaanaysa inad la socoto miisaaniyadaada	• Inad lacag aad u dirto qofk kale • Inad lacag bixiso adinka oo aad istaabanaynin qofka kale (COVID-19) • Inaad ku bixiso biilashaada

SHAXDA IS-BARBARDHIGA FARQIGA U DHEXEEYA KAARAKA KALA DUWAN EE BANGIGA

KAARKA	MIDKA LA SII BIXIYAY/ LACAGTU KU JIRTO	MIDKA AMAAHDA	CREDIT
Halkee yada ku isticmali karta kaarkan?	• ATMka bangigaga iyo networkiyada kale • Dukaanada wax ku iibiya kaarka	• ATMka bangigaga iyo networkiyada kale • Dukaanada wax ku iibiya kaarka	• ATMka bangigaga iyo networkiyada kale • Dukaanada wax ku iibiya kaarka
Maxad uga faaiidaysan kartaa kaarkan?	• Inad hubiso lacagta kuugu jirta akoonkaaga • In ad la soo baxdo lacagtaada • In aad ku dukaamaysatid ilaa inta ay lacagtu kuugu jirto	• Inad hubiso lacagta kuugu jirta akoonkaaga • In lacag la baxdo, anad dhigato. • Inaad ku dukaamaysatid ilaal inta ay lacagi kuugu jirto akoontigaaga bangiga • In lacagta u gudbiso/xawisho akoonti kale • Inad mobaylkaaga kaar aad ka gashatid	• Inad hubiso lacagta kuugu jirta akoonkaaga • In lacag la baxdo, anad dhigato. • Inaad ku dukaamaysatid ilaal inta ay lacagi kuugu jirto akoontigaaga bangiga • Inaad ku dukaamaysato hadii akoonkaaga bangiga aysan lacagi kuugu jirin xiligaas. • Inaad marar kala duwan aad ku bixisid lacagaha aabta • Inaad lacagta aad u gudbiso/xawisho akoonti kale
Lacgbixintu in ay degdeg tahay in aysan ahayn	• Waa degdeg	• Degdeg maaha	• Lacag bixinta aan degdega ahayn waxaad lacagta bixinaysa dhamaadka bisha,waxanad hal marka isku daraysa dhamaan wixii aan iibsatay • Ma jiro wax dulsaar ah oo aad bixinaysa, haddii had iyo jeer lacag bixiso dhamaadka bisha finance the balance
Maxay yihiin kharashyada /Kharashka isticmalka kaarka?	Waxay ku xidhantahay, waxyaabaha uu macaamiisha u qabto adeeg bixiyuhu Waxa lagaaga baahanyahay in aad heshi macluumaad kasta oo muhim kuu ah		

FAA'IDADA IYO DHIBKA KA IMAN KARTA LACAG GUDBIYAYAASHA

SHAQALAHA LACAGTA GUDBIYA/ LACAG GUDBIYAHA	FAAIIDADA	KHASAARAHA
RASMIGA AH/ SHARICIGA AH	• Amaanka (lacagtaada waa amaa, (habka gudbinta/xawilaaduna waa amaan) • Dayn wakhtiga fod aad ku bixin karta, lacag badan, isku halayn • Sirtaada lacagta oo kuu xafidan • Wax soo saarfka daynta oo aad xulan karaysid mid ad donayso • Waxy ku shaqeyan shuruucda bangiga dalka, haddii si cad loo shaaciyo • Waxuu kuu sahlayaa in hesho diwaan fiican dhayn qaadashada ah, iyo in ay xoogaysato awoodda ad u leedahay inaad iska bixiso daymaha • Waxuu kuu sahlaya in aad hesho adeegyada la talinta lacagaha • Ded-desiyaha(oo ku xidhan habka) • Xor inaad u isticmaasho lacagtaada (waxad u baahantahay mobaylka kaliya si aad u maamusho lacagtaada mararka qaar)	• Fogaashaha-dadka ku nool meelaha ka fog magaalooyinkaio caasimadaha • Halista in lagu dhaco, marka aad ka baxayso bangiga/wakaalda • Saacadaha ay banaanyihiin oo xadidan • Shuruudaha ugu yar ee loo baahanyahay oo mararka qaar aad u badan • Kharashka ayaa noqon kara mid mid badan • Waxaa dhici karta in lacag bixiyaha bangiga aad mudo sugto /taagnaato • Isticmaalka oo ku adag dadka aan wax qorin waxna aan akhriyin • Mararka qaar, waxaa dhici karta lacag yaraan siiba marka aad doonayso inaad gudbiso amaa xawisho lacag aad u badan
AAN RASMIGA AHAYN/ DOWLADU AQOONSANAYN	• Khrashka (oo ku xidhan habka) • Helitaanka adeegga • Agagaarka oo laga heli karo • Deg-dega(oo klu xidhan habk) • Aminaada (Waxaa laga yaaba in ad lacag gudbinta amaa xiwilaada aad ka samayso adiga oo isticmaalaya dukaanleyaasha aad aad muda dheer aqoonta u leedahay • Malah nidaam maalul, foomamm ad buuxiso iwm	• Ma jiro adeegyo kale oo lacageed aadka helayso • Lacag qaataha hoo ay la kulmo khatar, maadaama oo uu ka qaadan karo dukaan amaa daas aan amaan ahayn, oo marka uu ka dhaqaaqo la kulmo dhac iyo weerar • Sharicyada qaadashada lacag farabadan oo ay ka timaado suaal (in uu booliska qabto marka uu lacagta qaadanaay) • Halista ah in qofka la boobo • Khatarta lacagta forjariga

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

D

BASHARASHADA HAY'ADAHA LACAGTA IYO HABSAMI ISTICMAALKOODA

D1. Hay'ada lacagtu waa shirkad adeeg bixineed oo dowli ah amaa si gaar ah loo leeyahay oo ka shaqaysa howlada lacagta sida: kaydinta, dayn bixinta iyo lacag bixinta.

- ☐ **b.** Been.
- ☐ **t.** Run.

D2. Waxaan ogaaday in ay deegaanka ay ka jiraan bangiyo aad u fara badan.

- ☐ **b.** Waa in aad aado, islamarkaasna aan waydiiyo macluumaad; waxaa laga yaaba in ay bixiyaan adeegyada lacag kaydsiga iyo waxsoo saar daymeed oo aniga faa'iideeda lee yahay.
- ☐ **t.** Maxay faa'iido inoo leeyihiin, sow bangiyadani maaha kuwa ilaaliya danaha dadka maalqabeenada iyo shirkadaha waawayn.
- ☐ **j.** Waxaan jeclaan lahaa inaan aado oo aan ogaado waxa ay qabanayaan, balse, waxaan ka baqayaa, in ay igu dheelaan maadaama oo aan haysanin lacag badan.

D3. Goobaab weedha aan u taagnayn mabaadiida ilaalinta macaamiisha ee looga baanayahay in ay u hogaansamaan hay'adaha lacagtu?

- ☐ **b.** Ka horta si xad dhaaf ah u qaamoobida.
- ☐ **t.** Xaqsiinta iyo ixtiraamaanka la macaamilka macaamiishada.
- ☐ **j.** Cadcaddaan.
- ☐ **x.** In macaamiisha la siiyo hadyad.
- ☐ **kh.** Qiima goyn ay masuuliyad ku dheehantahay.
- ☐ **j.** Dejinta nidaamka xalinta cabashooyinka.

Jawaabaha sualaha: D1:b; D2:b; D3:t

1. BASHARASHADA HAYADAHA LACAGTA

QEEXID

Hay'adaha lacagta: Waa adeegbixiyayaal dowli ah ah ama si gaar ah loo leeyahay kana shaqeeya howlaha shaqooyinka la xidhiidha lacagaha sida kaydinta lacagta, dayn bixinta iyo lacag bixinta.

QEEXID

Bangiyo: Waa hay'ado ay dowladdu u sharciyaysay in ay qabtaan shaqooyinka bangiga: Gaar ahaan in lacagaha ka qabtaan macaamiishooda amaa dadwaynaha, in ay bixiyaan adeegyada kaydinta lacagta iyo dayn bixinta, iyo in ay sameeyaan shaqooyinka lacag bixinta. Bangiyadu waxay noqon karaan kuwa ay dowladdu leedahay amaa kuwa loo leeyahay si gaar ah, kuna takhasusay kaydinta lacagta amaa maal-gashiga, diyaarinta wax soo saarka daynta, amaa u shaqaynta qaabka ishaashatada, amaa sida bulsho dan wadaag.

Hay'adaha bixinta iyo kaydinta lacagaha yaryar (maykrofaynaasi): Waa hay'ado lacageed oo takhasus u leh adeegyada bangiga, oo u adeegta gaybaha bulshada, ururada amaa shaqsiyaadka un dakhligoodu hooseeyo amaa danyarta ah. Hay'dahani waxay bixiyaan adeeg akoonti oo lacag yar balse, ay aqbali karaan bangiyada caadiga ahi, waxayna bixiyaan adeegyada isu gudbinta lacagta oo kharashkiisu ka yaryahay hay'adaha kale ee lacagta

Shirkadaha adeega lacagta: Waa shirkado sameeya macaash, oo shaciyad ka haysta dowlada amaa hay'adaha dayn bixinta. Hay'dahan looma ogala inay kaydiyaan lacagaha dadka xubnaha ka ah amaa tan bulshada, loomana ogola in ay bixiyaan adeegyada wax soo saarka daymaha.

TILMAAMO

Si aad si fiican aad ugu xulatid, hay'adda lacagta ee aad rabto in ay kuu adeegto, waa in aad fiiro gaar ah siisaa waxyaabaha hoos ku xusan:

- Dabeecooyinka gaarka u ah hay'ada lacagta
- Dabeecooyinka wax soo saarka daynta ee aad doonayso adiga oo ku salaynaayo yoolashaada, nooca akoonada lacagta, nidaamka lacag bixinta, wax soo saarada kaydinta iyo dayminta lacagaha iwm

CAAWIYAHA TABABARKA D.1.1

Suaalaha loo baahanyahay in la wadiiyo hayadaha lacagaha

DABCEECOOYINKA MUDAN IN LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'ADA LACAGTA	SU'AALAHA MUDAN IN LA WAYDIIYO
Dabeecooyinka hay'daha lacagta • Dhawaanshaha dhuleed • Sumcada iyo aaminaada • Bixinta adeeg tayo leh oo ka baxsan midka lacagta (tababarka ganacsiga, aqoonta lacagaha) • Adeegyada fogaanta (in internet laga ogaan karo wax kugu jira akoonka, ogaysiiska SMS ee telefanka, adeega bangiga ee telefanka iwm. • Tayada adeegbixinta iyo shaqaalaha adeeg bixinta (xiliga la sugaayo, tixgalinta macamiisha, luuqada lagu hadlayo, xawaaraha adeega) •Shuruudaha xubinimada (diiwaangalinta, tirada shirarka, awooda go'aan qaadashada xubinka...) • Cadcadaanta ku aadan kharashka la qaadayo iyo shuruudaha, tayada xogaha la siinaayo macaamiisha • Wax soo saarka loogu tala galay ururada gaarka ah, (ardayda, shaqaalaha mushaarka qaata, dadka lacagta howlgabka qaata iwm) • Shaqooyinka samafalka ah ee la qabto, (sanduuqa isku duubnaanta, isboonsarka, rugaha samafalka iwm) • (Dadka loo soodiraya ama ka qaadanaya lacagaha loo soo wareejiyay qaraabada), waxaa jira hay'ado lacageed ooku yaala degaanada ama dhulka ay qaraabadu ku noolyihiin.	
Noocyada iyo dabeecooyinka wax soo saarada (sida kaydinta lacagta) oo ay bixiyaan hay'adaha lacagtu • Helitaanka adeega kaydinta, fududaanta in lacagtada aad la bixi kartid, fududaanshaha isticmaalka • Shuruudaha lagu xidho furashada akoonka • Amaanka • Inta uu le'egyahay dulsaarka ama dhalada • Suurta galnimada helitaanka adeegyada kale ay bixiyaan hay'adaha lacagtu • Kharashka dhigashada/dayminta lacagta (lacagta la qaado, ganaaxyada) • Helitaanka rabto inaad kala baxdo akoonka • Xaalada anshaxa iyo qiyamka (lacag joogtaysan, deegaanka, adeegyada lacagaha ee islaamiga ah).	

CAAWIYAHA TABABARKA D.1.2

Su'aalaha la waydiinaayo hay'adaha lacagta (ee ku aadan xalka la soo jeediyay)

DABCEECOOYINKA MUDAN IN LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'ADA LACAGTA	SUAALAHA MUDAN IN LA WAYDIIYO
DABEECADAHA HAY'ADA LACAGTA	
Dhawaanshaha dhuleed	• Ma leedahay laan ka agdhaw (gurigayga, goobtayda shaqada, amaa meel aniga igu haboon dugsiga caruurtayda ay dhigato) -Haddii ay haysato kaarka lacag bixinta, ATM ma ka heli karaa meel igu dhaw (ku dhaw gurigayga, goobta shaqada, meel igu habboon, goobta jiimka/jimicsiga)?
Sumcada iyo aaminaada hay'ada lacagta (waa su'aal mudan inaad naftaada iyo qoyskaaga aad waydiiso)	• Hay'adani lacagtu ma leedahay sumcad fiican? • Fikir noocee ah ayuu qoyskaygu ka qabaa hay'adan lacagta? • Hay'dani ma tahay mid igu dhalinaysa inaan ku lalsoonaado? • Ma jirtaa wax dhib ah oo ku saabsan hay'ada oo aan ogahay, amaa ka maqlay hay'adan oo ay ii sheegeen qoyskayga, amaa asaxaabtayda? • Ma jira qof ilaa hadda wax dhib ah kala kulmay hay'adan oo aan ogahay? Maxay tahay dhibtaasi? Sidee loo xaliyay?
Bixinta adeeg hufan oo ka baxsan ka lacagaha (sida tababarada ganacsiga, waxbarashada lacagaha iwm)	• Ma siisaan macaamiishiina/xubnihiina adeeg tababar? Haddii aad siisaan muxuu ku saabsan yahay tababarkaasi? Ayaa ka faa'iidaysta tababaradaas? Lacag fii ah miyaad ka qaadataan tababarada? • Miyaad ku jirtaan shaqooyinka samafalka, iyo inaad isboonsar garaysaan shaqooyinka bulshada u fiican? • Miyaad caawisaan shaqooyinka bini aadminimada? • Ma leedihiin qof la taliye ah oo caawiya macaamiisha, si ay u maareeyaan akoontiyadooda?
Adeegyada fog (In lacagaha ku jira akoontiyada lagala socon karo khadka internetka, in la helo karo fariimaha SMSka, adeegyada bangiga ee telefoonka) iyo wax uu yahay kharashka ku baxaaya	• Ma bixisaan adeegyada fogaanta? • Macaamiishu, lacagaha ugu hadhan akoontigooda ma ka ogaani karaan khadka internetka? • Haddii ay sidaas tahay, adeegani, ma mid lacag laga bixyaa , mse waa mid bilaash ah , lacag miyaa looga baahanyahay inuu qofku furto akoon? Haddii uusan ahayn bilash, lacag intee le'eg aya looga baahanyahay si uu u lelo adeega? • Lacagta aan bixiyaha, ma laigu soo ogaysiini karaa fariin SMS ah ?

DABCEECOOYINKA MUDAN IN LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'ADA LACAGTA	SUAALAHA MUDAN IN LA WAYDIIYO
DABEECADAHA HAY'ADA LACAGTA	
Tayada adeega iyo shaqaalaha (xiliga la sugitaanka, tixgalinta macaamiisha, luqada la isticmaalo, xawaaraha adeega iwm)	• Saacadaha uu furanyahay bangigu waa goorma? • Celcelis wakhti intee le'eg ayaa la sugaa, ka hor inta uu qofka macmiilka ay kulmin? • ATM ma ku leedihiin dhaman dalka? • Kharash miyuu igaga baxayaa inaan lacag kala baxo ATMka (meelaha kale ee dalka, wadamada dibada, amaa ATMyada bangiyada kale)?
GOAANADA AAD QAADANAYSO MARKA AAD BOOQANAYSO	
Haddii ay ku haboontahay (bulshada isku danta ah), shuruudaha ka mid noqoshada	• Miyay jiraan shuruudo hay'adiina lacagta u yaala oo ku aadan in xubin laga noqdo? Haddii ay jiraan maxay yihiin? • Waa imisa qiimaha ka mid noqoshadu? Ma waxaa lagu bixiyaa todobaadkii, bishii, sanadkii iwm? • Mudo intee le'eg ayay ku qabsoomaan shirarka xubnuhu? • Xubnuhu miyay ku qasbanyihiin in ay ka soo qayb-galaan shirarkaas ? Haddii ay sidaas tahay, ganaax intee le'eg ayaa laga qaadaa haddii xubin kasoo qaybgali waayo shirkaas ? • Intee ayay le'egtahay awooda go'aan qaadashada ee xubinku?
Cadcaddaanta ku aadan kharashka, xiliga iyo shuruudaha, tayada xogaha loo gudbiyo macaamiisha (suaalaha aad adigu iswaydiinayso)	• Kharashadaadka la qaadayo iyo shuruuduhu ma yihiin kuwo iyaga oo qoran ku dhegan gudaha xafiiska hay'adaha lacagta? • Hay'adu macaamiisha ma siisa waraaqaha yar yar ee ay ku daabacanyihiin macluulmaadyada muhimka ah ee hay'ada (ma jiraa bog khadka internetka ahi)? Haddii ay sidaas tahay, ma heli karaa macluumaadyada aan u baahanahay aniga akhrisanaaya daabaceedaha yaryar? • Luuqada ay ku qorayihiin qoraaladu, ma tahay mid si fudud loo fahmi karo ? •Sidee ayuu qofka u furan karaa amaa isaga xidhi karaa akoontigiisa? Lacag intee le'eg ayaa kaga baxaysa ?
Nakhshadaynta wax soo saarka ee loogu tala galay dadka ama kooxo gaar ah (ardayda, shaqaalaha mushaarada qaata, dadka howgabka ah)	• Ma haysaan wax soo saar adeeg lacageed oo aad si gaar ah ugu tala gasheen dadka aniga ila midka ah? (dhaliyarada, dukaanlayda, shaqaalaha, dumarka, dumarka ganacsatada ah/dumarka kale iwm)
Shaqooyinka samafalka ah ee aad qabataan (fandhiga mid midnimada iyo iskaashiga , fangaraynta waxyaabaha danta u ah bulshada iwm)	• Hay'adiinu ma ka shaqaysaa howlaha samafalka? Haddii ay ka shaqayso maxay yihiin howlahaasi? Waa ayo cida ka faa'iidaysatia(caruuta naafada ah, dadka bukaanka)?
In hay'adu ay laamo amaa wakiilo ku leedahay wadamada dibada, meelo ku dhaw dhulka ay deganyihiin qaraabadayda aan u diro lacagaha , amaa dadka iga hela lacagaha	• Hay'adiinu laamo amaa wakiilo ma ku leedahay meelaha ay ku noolyihiin qaraabadaydu (xaafadahooda, goobaha ay ka shaqeeyaan, meelaha ku dhaw), maadama oo ay ka qaadanayaan lacagaha aan anigu u diro ?

DABCEECOOYINKA MUDAN IN LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'ADA LACAGTA	SUAALAHA MUDAN IN LA WAYDIIYO
DABEECADAHA HAY'ADA LACAGTA	
In laga helo adeegyada kaydsiga lacagaha, sida ay u fududeeyaan in lacag lagala baxo	• Imisa jeer ayaan lacag kala bixi karaa? • Miyay xadidantahay lacagta lala bixi karo halkii mar? •Ma jira ganaax aan la kulmaayo haddii aan lacag kala baxo akoontiga aan ku kaydsado lacagta ?
Ku haboonaasha isticmaalka	• Macaamiishu ma helaan warbixino ku saabsan akoonadooda ay ku kaydsadaan lacagta? Wakhti intee le'eg ayay ku helaan? • Miyaad bixisaan adeegyada baanka ee khadka internetka iyo/amaa telefoonada?
Shuruudaha lagu xidhaayo furashada akoontiga kaydsiga lacagta	• Waa imisa lacagta ugu yar ee laiiga baahanyahay inaan dhigo akoontiga cusub ee aan furanaayo? • Cadaymo/dukumentiyo noocee ah ayaa la iiga baahanyahay inaan soo bandhigo?
Amaanka	• Maxay yihiin damaanadaha ay helayaan macaamishiinu si loo ilaaliyo hantidooda ?
Cadadka dulsaarka/dhalada	•Waa imisa cadadka dulsaarka/dhalada aad ka qaadaan ay macaamiishu dhigato hay'diina ? • Waa sidee xadiga, dulsaarku marka la barbar dhigo hay'adaha kale ee lacagaha? • Intee u dhaxaysa xiliyada la bixinaayo lacagta dhalada ? • Sdee loo xisaabiyaa dhalada laga qaado lacaga ay dhigtaan macaamiishu? Dhaladu miyay cayimantahay mise waa mid kala duwan?
Suurta galinimada aan heli karto adeegyo kale laga hayada lacagta	• Haddii aan la baxo wax soo saar, miyaan heli karaa adeegyo kale? Haddii aan heli karo, maxay yihiin adeegyadaasi? Ma waxan ku heli karaa qiimo i raali galiyo?
Kharashka kaydinta lacagta (kharashka , ganaaxa)	• Muxuu noqonayaa kharashku? (Kharash intee le'eg ayaa laga qaada gudbinta lacagta, in ATMka lacag lagala baxo. • Maxuu yahay kharashka loo gooyo maaraynta iyo kaydinta lacagta?
Lacagta	• Miyay fududahay in ay lacag la baxaan macaamiishu? Muxuu yahay nidaamka lagula baxo lacagtu ? • Ma labixi karaa cadad kasta oo lacag ah oo aan u baahdo? • Ma jiraa kharash qofka macmiilka la dul saaro haddii uu lacagta la baxo ka hor wakhti cayiman?
Qiimaha anshaxa ee wax soo saarka (lacag joogtaysan, horumarinta bay'ada amaa deegaank, nidaamka islaamiga ah iwm)	• Wax soo saarka lacagta ee hay'adu ma yahay mid buuxiya heerka anshaxa ee loo baahanyahay? Heerkee ayuu buuxiyaa? • Wax soo saarku ma leeyahay heer lagu qiimeeyo inuu buuxinaayo heerarka anshaxa?

TARAHAAGA

Aniga oo ka dhakaayo yodhayga, xaalada aniga ii gaarka ah, iyo baahidayda lacageed, waxa aan xulanayaa hay'ad lacageed oo leh dabeecooyinka hoos ku xusan:

Tusaale: Ku dhaw gurigayga

1. . . . . .
2. . . . . .
3. . . . . .

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Si aad u xulato hay'ad lacageed, waxaad u baahantahay inaad dib si fiican aad u fiiriso dabeecooyinka iyo noocyada wax soo saarka ee ay leedahay, waana inaad ka doorato noocyada wax soo saarka ee ku haboon marxaladaada.
- Waxaad heli qoraalada ku daabacan waraaqaha yaryar aad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan hay'ada lacagta waxaa kale oo aad su'aalo waydiin kartaa shaqaalaha hay'da lacagta.
- Marka aad xulanayso wax soo saarka kaydinta amaa daynta, waa inaad maanka ku haysaa xadiga dhalada ee laga qaadayo lacagta aad kaydsanayso amaa daynsanayso maadaama oo ay yihiin waxyaabaha ugu muhimsan.

NOTES

2. ULA TACAAMUL HAY'ADA LACAGTA SI KASLSOONI AH!!

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 1AAD

MEESHAAK IYO SHAQAALIHIISA MARK IYO JOORJI WAXAY KA HADLAYAAN HAY'ADA LACAGTA

arki iyo Joorji waa shaqaalaha Meshak. Mark, wuxuu horay aqoon ugu lahaa hay'adaha lacagta: Wuxuu aaday bangiga, isla markaasna uu waydiiyay macluumaad, waxayna shaqaalaha bangigu ku qanciyeen inuu furto akoon bangi oo si gaar ah loogu tala galay dadka qaxoontiga ah, wuxuuna bangigu lacag badan ka qaadaa qofka ka furanaya akoon bangi .Intaa waxaa dheer, wuxuu lacag ka bixinayaa adeeg uusan isticmaalin run ahaantii. Wuxuu ka xunyahay inuu qaato go'aamo degdeg ah. Wuxuu lacag badan ka bixiyaa adeeg uusan run ahaantii helin amaa ka faa'iidaysan. Wuxuu ka qoomameeyaa inuu gaadho go'aan degdeg ah oo uusan ka fiirsan. Meshak wuxuu sharaxayaa inuu booqday hay'ado badan oo ah kuwa lacagta, si uu macluumaad u helo. Waxaa ku aadkaatay inuu maya ugu jawaabo xubnaha shaqaalaha, balse waxaa u suurta gashay inuu helo macluumaad fara badan. Ugu danbayntii, wuxuu go'aansaday inuu akoon ka furto mid ka mid ah bangiyadii uu booqday. Wuxuu iyagana u soo bandhigay in ay yeelaan si taas la mid ah. Mak wuxuu go'aansdatay inuu helo macluumaad ku saabsan sida uu isaga xidhi karayo akoonkiisa, sida Meshak oo kallena wuxuu ku soo waraagay hay'adaha lacagta si uu u helo midka ugu haboon xaaladiisa.. Joorji wuxuu sheegay inuu u malaynayay in aysan jirin hay'ad lacageed oo u adeegta qaxootiga, wuxuuna go'aansaday inuu raaco mark.

SU'AALO

- **Muxuu Marki uuna u aaminayn hay'adaha lacagta?**

Adigu waa inaad ogaato si lamida macmiisha hay'ada lacagta, adiga ayay ku saarantahay masuuliyadu, balse sidoo kale waxaad leedahay xuquuq!

Aynu wax ka barano xuquuqahan!



CAAWIYAHA TABABARKA D.2.1

Kaarka sharaxaada

KAARKA SHARAXAADA 1aad

Waa in la ii buuxiyaa marka la doonayo in la furto akoon bangi. Kaddib marka aad ii buuxisid waa in aad shaqaalaha\ bangiga u soo bandhigtid waraaqahaaga aqoonsiga, si aad u dhamaytirto nidaamka. Kadib marka aad ii buuxiso , aanad soo bandhigto cadaymaha muhiimka ah, waxaad aadi kartaa lacag bixiyaha, waxaanad dhigan kartaa akoonkaaga.

KAARKA SHARAXAADA 2aad

Waxaan fadhiyaa miis yaala meesha laga galo hoolka hay'ada. Shaqadaydu waxay tahay in aan macaamiisha ka caawiyo si ay u furtaan akoon bangi. Waxaa kale oo aan kaa caawiyin karaa in aad ka go'aan gaadho, nooca akoonka bangiga ee aadka ugu haboon xaaladaada. Fadlan i waydii su'aalo ku saabsan noocyada wax soo saarka lacageed ee aan siino macaamiisha iyo nooca foomka ee aad buuxinayso. I su'aal waxa ay yihiin dhukumentiyada aad u baahantahay si aad u furato akoonti . Fadlan hay waydiinin su'aalaha sida in aad qaadato kaydkaaga lacagta amaa inaan aan ku siiyo in lacag ah.

KAARKA SHARAXAADA 3aad

Waxaan kormeeraa dhamaan shaqaalaha, si aan u xaqiijiyo in ay si sax ah ay u shaqaynayaan. Sidoo kale waxaan shaqaalahaa kuu muuqda, waa kuwa ka shaqeeya qaybta danbe ee xafiiska, waxay maamulaan akoontiyada macaamiisha, waxayna qabtaan shaqooyin kale. Fadlan ii kaalay oo ila hadal, haddii ay ku haystaan dhibaatooyin ay wax ka qaban kari waayeen shaqaalaha kale. Fadlan, ha ii iman haddii aad doonayso in aad igala hadasho akoon aad furanayso.

KAARKA SHARAXAADA 4aad

Shaqadaydu waxay tahay in aad xafido lacagta iyo dhukuntiyada/diwaanada lagula kala wareego lacagaha. Waxaan qabta lacagta dhigaalka ee macaamiisha, waxanan bixiyaa kaashka , marka ay lacag la baxayaan. Macaamiisha waxaan uga baahanahay in ay la yimaadaan cadaymahooda, iyo foom si sax ah ay u buuxiyeen, ka hor inta aanan wax shaqo u qabanin. Waaad i suaali kartaa inta ay le'egtahay lacagta kuugu jirta akoontigaaga, iyo in ay lacagi kuu soo gashay. Fadlan ha suualin in aan kuu furo akoonti bangi .

KAARKA SHARAXAADA 5aad

Shaqadaydu waa in aan ilaaliyo bangiga, shaqaalihiisa iyo macaamiisha. Si aan shaqadaas u qabto, waxaa la iiga baahanyahay in ay indhahaygu had iyo jeer ay furnaadaan, oo aan la socdo wax kasta oo gala kana baxa bangiga. Fadlan ha iwaydiin su'aalo ku saabsan sida loo furto akoontiga bangiga iyo sida loo buuxiyo foomamka.

KAARKA SHARAXAADA 6aad

Waxaan macaamiisha tusaa amaa u soo bandhigaa maclyuumaadyada ku saabsan adeegyada wax soo saarka lacageed ee uu bangigu siiyo macaamiisha, iyo kharashaadka ay macaamiishu bixinaysaa si ay u helaan adeegyadaas.

KAARKA SHARAXAADA 7aad

Waxaan hayaa dhamaan foomamka lagula kala wareego lacagta ee loo baahanyahay. Foomamkaygu waxaad uga baahantahay inaad lacag kala wareejisataan lacag bixiyaha/qaadaha bangiga.

KAARKA SHARAXAADA 8aad

Waxaad u baahantahay in aad i buuxiso, anad is saxeexdo, mar kasta oo aad u baahantahay in aad lacag kala baxdo akoontigaaga.

KAARKA SHARAXAADA 9aad

Waxaad ii adeegsan kartaa inaad qofka lacag u gudbiso adiga oo qofkaas siinaynin kaash (lacagaha warqada ee bangiga ama qadaadiicda). Marka aad ii buuxiso aanad ii saxeexdo, waxaa bangigu ku fasaxayaa inaad lacagta u gudbiso qofka magiciisu ii muuqdo. Bangigu wuxuu qofkaas siinayaa lacag laga saaro akoontigaaga.

KAARKA SHARAXAADA 10aad

Waxaad u baahantahay inaad igu buuxiso macluumaad badan, oo ay ka mid yihiin lambarka akoontigaaga, haddii aad doonaysid inaad lacag u gudbisid akoontigaaga.

Marka aad dhamayso habraacan, waxaad jawaabta saxda ah ee aad u heli doonta su'aalaha laylisyada

FARIINTA MUHIIMKA AH

- Si aad u xulatida hay'ad lacageed, waxaad u baahantahay in aad u fiirsato ogaatid dabiicadeeda waxsoo saarkooda, si aad u xulato wax soo saarkeeda lacageed, iyo inaad dooratida midda ugu haboon marxaladaha adiga gaarka kuu ah.
- Si aad uga fiirsatid dabeecadaha hay'adaha lacagta, waxaad u baahantahay inaad akhrisato macluumaadyada ku yaala waraaqadaha yaryar ee ay ku qoran yihiin adeegyada baniga ee loogu tala galay macaamiisha, waxa kale oo kuu banaan inaad shaqaalaha bangiga aad waydiiso su'aalaha aad qabtid: Ha ka baqin shaqaalaha in aad su'aal waydiiso, maadaama oo ay shaqadooda tahay!
- Inaad gudaha u gasho bangi, amaa hay'ad lacageed, macneheedu maaha in lagaaga baahanyahay in aad akoonti ka furato, waxaad bangiga iyo hay'adaha lacagta u booqan kartaa gudahana ugu gali kartaa si aad u aruursato macluumaad
- Qof walba wuxuu karaa, dabcan inuu adeegyo ka helo hay'adaha lacagta (haddii uu la yimaado cadaymaha looga baahanyahay!): Waxaa adiga lagaaga baahanyahay inaad hesho hay'ad lacageed adeegyada aad u baahantahay ee ku haboon marxaladaha adiga gaarka kuu ah.
- Haddii aad macmiil aad la tahay bangi amaa hay'ad lacageed, waxaad xaq u leedahay in aad hesho macluumaadka aad u baahantahay!

Now we are going to practice completing a form to open a bank account. We will use a generic application form.

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.2

Foomka furshada akoonka bangiga

MAGACA BANGIGAAGA

WAXA BUUXINAYO

ARJIGA FURISTA AKOONTIGA BANGIGA

AKOON QAATAHA 1aad	**AKOON QAATAHA 2aad**
MACLUUMAADKA QOFKA	**MACLUUMAADKA QOFKA**
Shacbi ah: ☐ Mudane ☐ Marwo	Shacbi ah: ☐ Mudane ☐ Marwo
Magaca awowga:	Magaca awowga:
Names:	Names:
Ciwaanka goobta uu deganyahay: Koordhka furaha:	Ciwaanka goobta uu deganyahay: Koordhka furaha:
Magaalada:	Magaalada:
Dalka:	Dalka:
Xaalada qoyska: ☐ Reer leh ☐ Kala nool ☐ Furiin ☐ Agoon ☐ Aan guursan	Xaalada qoyska: ☐ Reer leh ☐ Kala nool ☐ Furiin ☐ Agoon ☐ Aan guursan
Magaca:	Magaca:
Taariikhda iyo goobta dhalashada:	Taariikhda iyo goobta dhalashada:
Jinsiyad:	Jinsiyad:
Lambarka telefanka (guriga):	Lambarka telefanka (guriga):
Lambarka moobaylka:	Lambarka moobaylka:
Email:	Email:
XAALADA XIRFADEED	**XAALADA XIRFADEED**
Dakhli bileedka: ||||||||	Dakhli bileedka: ||||||||
☐ Shaqeeya ☐ Shaqo raadis ☐ Arday ☐ Howlgab	☐ Shaqeeya ☐ Shaqo raadis ☐ Arday ☐ Howlgab

AKOONTIGA

☐ Akoontiga joogta ah shaqsi ☐ Akoontiga joogta ah ee wadaaga ah ☐ Akoontiga kaydka

KAADHKA BANGIGA IYO ADEEGYADA

☐ Kaadhka ATMka ☐ Adeega bangiga interneta
☐ Damaanada habka ☐ Kaarka lacagta leh
☐ Kaarka daynta

SAXEEXA

AKOONKA QAATAHA 1aad	**AKOONKA QAATAHA 2aad**	**MAAREEYAHA LAANTA**

Taariikhda:

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.3

Sida lacagta loogula baxo kaarka ATMka

Hada waxaa si ficil ah aan ku baranaynaa sida loo isticmaalo kaarka ATMka, ee aad kaashka looga saaro akoontiga kaydinta lacagta

TALABADA 1AAD: **GALI KAARKAAGA ATMka**

Waxaax kaarkaaga ATMka galisaa mashiinka ATMka, (waxaa kuu soo baxaya meelo banaan oo cagaar ah, meelo banaan).

TALABADA 2AAD: **GALI LAMBARKA SIRTA AH OO KA KOOBAN 4 XARAF**

Adiga oo adeegsanayaa screenka mashiinka waxaad galisaa baaswordhigaaga ka kooban 4 xaraf. Hasa yeeshee, had iyo jeer waa in aad maanka ku haysaa, inuusan qofna arag baaswordhiga marka aad galinayso. Haddii aad in ka badan 3 jeer aad galiso lambar khalad ah, waxaa is xidhi kara mashiinka ATMka.

TALABADA 3AAD: **DOORO WAX KALA IIBSIGA**



Qaybtan, Waxaad ku arki kartaa kala xulashooyin badan oo ka muuqda shaashadaha sida la bixida lacagta, wareejinta, waydiinta baalansiga IWM. Xaaldan, waa inaad doorato la bixida lacagta.

TALABADA 4AAD:



Hadii uu kaarkaaga ATMku yahay mid ku xidhan akoontiyo kala duwan, waxaa lagaaga baahanyahay in aad xulatid, akoontiga aad doonaysid inaad lacagta kala baxdo.

TALABADA 5AAD: **GALI CADADKA**



Qaybtan, waa in aad ku qortaa cadadka lacagta ee aad la baxayso, kadibna aad riixdo batanka.
Hasa yeeshe, waxaa lagaaga baahanyahay in aad marka hore aad xaqiijisid in lacagta aad la baxayso ay tahay mid aan ka badnayn lacagta kuu taala, haddii kale kuuma suurta galayso inaad lacag aad la baxdo.

TALABADA 6AAD: **QAADO LACAGTA**

Halkan, waa in aad lacagtaada aad ka qaadato, qaybta hoose ee mashiinka.

TALABADA 7AAD: **XULO LACAG LA QAADASHO KALE, AMAA XIDH HOWSHA**

Halkan, waxaad xulan kartaa lacag qaadasho/la bixid kale haddii aad doonayso, amaa waxaad dhamaystiri kartaa hawsha. Marka aad taabato batanka "dhamaystir", xaqiiji inaad mashiinka kala baxdo kaarkaaga ATMka.

Marka aad macmiil aad la tahay hay'ada lacageed, waa in aad ogaataa in ay kaa saarantahay masuuliyad, balse aad hadana leehahay xuquuqo.

NOTES

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.4

Kaararka sharaxaada–Mabaadii'da daryeelka macaamiisha

KAARKA SHARAXAADA 1aad

Waxaan leeyayahay beer amaa marshuuc digaag ah.
Waxaan heshiiska daynta mashruuca digaaga aan la galay mid ka mid ah hay'adaha bixiya lacagaha yar yar bixiya (maykrofaynansi) oo ku dhaw gurigayga. Xadiga lacagta ah ee aan helay, waa intii aan u baahnaa ee aan codsaday. Saddex bilood gudahood, waxaan iibin doona digaaga aan soo saaro waxaana ka heli doona lacag aad u badan. Hasa yeeshe, waxaa la iiga baahanyahay in aan hay'ada maykrofaynansiga ee aan lacagta ka amaahday aan u celiyo daynta anigoo bil kasta qayb celinaaya. Hadda, mashruucayga igama soo galo dakhli ii suurta galiya inaan bixiyo daynta. Waxaa hadda ii muuqata inaan qaatay dayn aan ku haboonayn marxaladayda.

Arrintani ma tahay mid caadi ah oo dhici karta?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KAARKA SHARAXAADA 2aad

Waxaan heshiis dayn lacageed ah aan durba la galay laba bagi. Mdi wuxuu u saabsanyahay iib guri, halka kan kaena uu ku saabsan yahay bixinta xaflad diimeedkii la qabtay kal hore.
Waxaan hada rabay inaan gato dhug-dhuglay yar, si ay iigu fududaato inaan wareegoI. Bangigaygu wuxuu ii diidanyahay inuu i siiyo daynta sadexaada.

Arrintani ma tahay mid caadi ah oo dhici karta?

Maxaan ka qaban karaa arrintan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KAARKA SHARAXAADA 3aad

Waxaan macmiil u ahay hay'ad lacageed.
Waxaan isku dayay inaan wax ka ogaado xiliga soo celinta daynta, shuruudaha iyo kharashaadka kala duwan ee la socda wax soo saarka daynta. Hasa yeeshe, waraaqda ay ku yaalaan macluumaadka hay'addu waa mid aad u yar, dhamaan waxa ku qoran ee ku saabsan xiliga ay qaadanayso daynta waan fahmi kari waayay.

Maxaan ka qaban karaa arrintan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KAARKA SHARAXAADA 4aad

Waxaan leeyahay akoonti joogta ah iyo midka kaydinta lacagtaa, waxayna iiga furan yihiin hay'ada lacageed
Ma faraxsani anigu, sababta oo ah waxaa la iiga baahanyahay in aan bixiyo kharash aad u badan oo lagu maamulo akoontigayga, iyada oo dhinaca lacagta igu jirta akoonka la iga siiyo amaa aan ka helo dhalo/dul saar aad u yar. Arrintan waxaan u arkaa mid aan xaq ahayn.

Arrintani ma tahay mid caadi ah oo dhici karta?

Maxaan ka qaban karaa arrintan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KAARKA SHARAXAADA 5aad

Waxaan ahay qof aan aad u qaamaysnayn, mana awoodo inaan sii wado bixinta daynta la igu leeyahay, sababta oo ah, waxaan lumiyay shaqadaydii.
Waxaan ka wal-walsanahay tilaabada uu bangigu iga qaadi doono, haddii aan ku guul daraysto bixinta daynta la igu leeyahay.

Ma laga yaabaa in ay yimaadaan gurigayga, ka dibna ay igala wareegaan hantidayda amaa hantida kale ee qoyskayga, amaa ay iga qaadaan tilaabo taas ka sii xun?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KAARKA SHARAXAADA 6aad

Waxaan bagigayga kuwaafiqi waayay arinta dhacday.

Yaan arintaas la socodsiiya? Ma jiraa qof bangiga jooga oo iga caawin kara arintan?

WAXBARASHADA

KAARKA SHARAXAADA 7aad

Shaqaalaha bangiga ee gacanta ku haya akoontigayga joogtada ah, ayaa ogaaday in bishii la soo dhaafay ay soo gaadhay lacagta aad u badan.

Suurta gal ma tahay inuu xubno qoyskayga kamida kala hadlo lacagtan isaga oo aan iga helin fasax?

WAXBARASHADA MAAL

Habka loo nakhshadeeyo wax soo saarka haboon, iyo sida loo gaadhsiiyo macaamiisha

Hay'ahada lacagaha waxaa looga baahanyahay in ay xaqiijiyaan in wax soo saarkooda iyo nidaamkooda gaadhsiinta macaamiishu uu yahay mid aan dhibaato ku keenin macaamiisha iyo danahooda. Waxaa looga baahanyahay in ay ku xisaabtamaan dabeecooyinka macaamiishooda marka ay nakhshadaynayaan wax soo saarkooda iyo nidaamka ay ku gaadhsiinayaan macaamiisha.

Ka hortaga qaanta xad-dhaafka ah

Waa run, arrintani waa mid caadi ah oo la samayni karo. Run ahaantii, ma jiro wax ka fudud inaad qaadato lacag dayn ah. Bangigu wuxuu ilaaliyaa macaamiishiisa. Waxaa loo baahanyahay, mabaadii ay qaataan hay'adaha lacagtu, oo ku saabsan in macaamiisha la siin karo dayn, kaliya marka la xaqiijiyo in ay iska bixin karaan, iyo in ay dayntaasi tahay mid aan macaamiisha dayn qaatayaasha ah aysan u horseedaynin khatar ay ku galaan qaan xad dhaaf ah.

Cad-cadcaanta

Fadlan shaqaalaha bangiga waydii suaalo dheeraad ah. Tani waa xuquuq aad leedahay, iyada oo hay'adaha lacagtu yihiin kuwo ku qasban in ay si buuxda u tix galiyaan u hogaansamida, ujeedooyinkooda ku qotoma in ay macaamiisha siiyaan adeeg uu ku baxo kharash cadaan ah oo masuuliyadiisa ay qaataan. Dhinaca kale, waa in kharashyada iyo shuruudaha ku xidhan adeegyada wax soo saarka lacageed, loo qoro si cad, kadibna macaamiisha lagula xidhiidho luuqad ay si fudud ay u fahmi karaan.

Qiima dejinta masuuliyadu ay ku dheehantahay

Fadlan, bangigaaga waydii su'aalo dheeraad ah. Hay'adaha lacagta waxaa looga baahanyahay in ay xaqiijiyaan in ay kharashaadka ay ka qaadaan macaamiisha, iyo nidaamyadoodu ay yihiim kuwo ay awoodi karaan macaamiisha, waana in ay noqdaan kuwa ay bangiyada laftoodu ay ka heli karaan macaash macaquul ah. Hay'adaha lacagtu waa in ay dadaal dheeraad ah ay ku bixiyaan in ay macaamiishu lacagaha ay dhigtaan ay u dul saaraan dhalo macquul ah.

Macaamiisha oo si macquul ah loo xushmeeyo

Hay'adaha lacagtu waxay ku qasbanyihiin in ay sida ugu macquulsan ay u xushmeeyaan macaamiishooda. Waa in aysan haba yaraate'e u kala eexanin macaamiisha.
Waa inay xaqiijiyaan talaabooyin ku filan oo lagu ogaanayo laguna daweynayo dhacdooyinka musuqa iyo dhaqan kasta oo gardaro ah ama xadgudub ah oo ka yimaada dhinaca wakiiladooda iyo shaqaalahooda,siiba xiliga ay macaamiisha ay ka soo aruurinayaa daymahii ay horay u qaateen.

Nidaamka gudbinta iyo xalinta cabashooyinka

Hay'adaha lacagtu waa in ay yeeshaan, nidaam u dejisan oo u suurta geliya in ay si deg deg ah u dhex galaan iska markaasn ay u xaliyaan dhibaatooyinka iyo cabashooyinka macaamiisha. Waa in ay nidaamkan ay u adeegsadaan xalinta dhibaatooyinka cabashooyinka shaqsiyadeed, waa in ay nidaamka u adeegsadaan tayaynta iyo kor qaadista heerka adeeg bixinta waxsoo saarkooda.

Sirta xogaha macaamiisha

Hay'adaha lacagtu waa in ay xafidaan sirta shaqsiyadeed ee macaamiisha iyaga oo raacayaa shuruucda dalalkooda ee la xidhiidha nidaamka xafidaada sirta macaamiisha. Xogahan, waa in kaliya loo isticmaalo ujeedooyinka cayiman ee loogu tala galay, taasoo ah mid sida sharciga loo gu fasaxay, aanan la isticmaali karin iyada oo aan laga heshiinin qofka iska leh xogtaas.

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.5

Kaararka dhacdooyinka baahiyaha iman kara ee kaydinta lacagta (wax soo saarka kaydinta)

S I T U A T I O N C A R D S

DHACDADA IMAAN KARTA EE 1 AAD

Mary waxay doonaysaa in ay iibsato koombiyuutaro, ay ku qabato tababaro toos ah oo dhinaca khadka ah oo ay soo ogaatay. Koomibuutaradani waa qaali, balse, waxay bil kasta iska jari kartaa xooga lacag ah, si ay sanadkii dhamaadkiisa u hesho lacag ku filan oo ay ku gadato koombiyuutarkada. Sidaas, waxaa looga baahanyahay in ay ka fogaato wax kasta oo ku qasbi kara in lacagta ay dhiganayso ay u isticmaasho howlo kale. Waxay ugu danbaytii go'aansatay in furato akoonti Joogta ah si u gaadho yoolkan iyadoo ku soconaysa taakteeda.

Maxay tahay su'aasha aad waydiinayso hay'ada lacagta, si aad u ogaato wax soo saarka ku haboon marxalada Mary?

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E D

S I T U A T I O N C A R D S

DHACDADA IMAAN KARTA EE 2 AAD

Joseph wuxuu qaatay casharo ku saabsan wax barashada maaliyadeed oo ay soo qabanqaabiyeen urur isxilqaamay oo uu isagu xubin ka yahay. Mowduuca casharku wuxuu ahaa "Lacag u kaydso xiliga roobka".
Wuxuuna hada go'aansaday inuu xoogaa lacag ah dhigato bil kasta, xataa haddii ay tahay cadad aad u yar.
Waxaa kale oo uu go'aansaday inuu akoonti kaydsi wadaag ah la furto Marta, oo siyaabo kala dudwan loo isticmaali karo.

Maxay tahay su'aasha aad waydiinayso hay'ada lacagta, si aad u ogaato wax soo saarka ku haboon marxalada Joseph?

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E D

S I T U A T I O N C A R D S

DHACDADA IMAAN KARTA EE 3 AAD

Meshak wuxuu qado la yeeshay saaxiibkiis, waxayna ka wada tashadeen howl gakooda ah. Waxay labadooduba go'aan sadeen in ay dhigtaan lacag ay isticmaalaan xiligooda howlgabka, si ay u xaqiijiyaan helitaan lacag ay ku noolaadaan marka ay noqdaan howl gab.
Meshak marna ma doonaayo inuu lacagtaas uu kaydsanayo uu la soo baxo, maadaama oo uu rabo inuu ka helo dhalada ugu faraha badan ee uu lacagtiisa ka heli karo.
Markii ugu horaysay saaxiibkii qorshahan kuma uusan waafaqin, balse waxay ugu danbaytii ay ku heshiiyeen inuu Meshak furto akoonti kayd ah oo leh wakhti cayiman.

Maxay tahay su'aasha aad waydiinayso hay'ada lacagta, si aad u ogaato wax soo saarka ku haboon marxalada Meshak?

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E D

S I T U A T I O N C A R D S

DHACDADA IMAAN KARTA EE 4 AAD

Jane hooyadeedwaxay doonaysaa in xoogaa lacag ah ay ka aruursato lacagaha ay u soo dirto inanteeda jane ee ay kaga bixinayso daaqad cusub oo gurigeeda ay ku samaysanayso.
Waxay doonaysa in bil kasta ay kaydsato lacag cayiman, mudo dhan hal sano. Madoonayso in lacag ay hesho u adeegsato waxyaabo kale, waxayna ka fakaraysa in ay furato akoon xaaladeeda ku haboon oo u suurta galisa in ay gaadho ujeedooyinka qoyskeeda. Waxay doonaysa in muddo sanad ah ay kaydsato lacag cayiman bil kasta. Hasa yeeshe, ninkeedu ma doonayo in ay hay'adaha lacagta ay ka furtaan akoon ay ku kaydsadaan lacagta.
Sidaa awgeed, Wada hadal ay mudo badan arrintan kala yeesheen Jane kadib, waxay waalidiinta Jane ay go'aansadeen in ay furtaan akoonti heshiis ku salaysan, kaas oo u suurta galiya in ay furtaan, kaas oo ay bilkasta dhiganayaan lacag cayiman xilli cayiman.

Maxay tahay su'aasha aad waydiinayso hay'ada lacagta, si aad u ogaato wax soo saarka ku haboon marxalada waalidiinta Jane?

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E D

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.6

Foomka warbixnta booqashada hay'adaha lacagta

HAY'ADA LA BOOQDAY: *1/3*

DOORKA QOFKA LA WARAYSTAY:

Ku buuxi shaxdan hoose wax soosaarkasta oo ay bixiso hay'ada lacagta ee la booqday.

WAX SOO SAARKA:

DABEECOOYINKA LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'AD LACAGEED	JAWAABAHA LAHELAY MARKA BOOQASHADA LAGU JIRAY
DABEECOOYINKA HAY'ADAHA LACAGTA EE LOO FIIRSANAAYO	
Dhawaanshaha	
Sumcadda, daacadnimada iyo xaaladeeda lacageed	
Adeegyada kale ee ka baxsan kan lacagta ee ay bixiso (tababarka ganacsiga, aqoonta isticmaalka lacagta...)	
Adeegyada fogaanta (in macmiilku lacagta ugu jirta akoonkiisa uu kala socda internetka, digniinta bixinta lacagta iyada oo SMSka, adeega bangiga ee telefoonka	
Tayada adeeg-bxinta, jajabnaanta shaqaalaha, (saacada la sugayo adeega, ixtiraamka macamisha, luaqado lagu hadlo, xawaaraha adeeg bixinta...)	
Haboonaashaha shuruudaha ka mid noqoshada, (is diiwaangalinta, inta mar ee shirarka la qabto, awoodda go'aan qaadashada ee xubinka...)	
Cadcadaanta, ku aadan kharashka laga qaado, mudada iyo shuruudaha, tayada xogaha loo gudbiyo macaamiisha	

W A X B A R A S H A D A M A A L I Y A D E E D

DABEECOOYINKA LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'AD LACAGEED	JAWAABAHA LAHELAY MARKA BOOQASHADA LAGU JIRAY
DABEECOOYINKA HAY'ADAHA LACAGTA EE LOO FIIRSANAAYO	
Nakhshadaynta wax soo saarka ee loogu tala galo macaamiisha gaarka ah (sanduuqa ardayda, shaqaalaha mushaarka qaata, dadka hawl gabka ah...)	
Shaqooyinka samafalka ah ee la qabto (sanduuqa iskaashiga samafalka, maalgalinta shaqooyinka samafalka iyo kuwa bulshada...)	
In ay hay'adu ay loomo ku leedahay dalka gudihiisa iyo dibadiisa, iyo dhawaashaha ama fogaanta ay u jirto hoyga ay ku noolyihiin qaraabada ka qaadanaysa ee loo diro lacagaha	
DABEECOOYINKA ADEEGYADA WAX SOO SAARKA HAY'ADAHA LACAGTA EE LOO FIIRSANAAYO (DHINACA KAYDSIGA LACAGTA	
Sida loo heli karo adeega kaydsiga lacagta/fududaynta la bixitaanka lacagta ku jirta akoontiga	
In adeegu yahay mid u fudud oo qofku isticmaalayo	
Shuruudaha furashada akooontiga kaydsiga lacagta	
Amniga	

DABEECOOYINKA LA FIIRIYO MARKA LA XULANAAYO HAY'AD LACAGEED	JAWAABAHA LAHELAY MARKA BOOQASHADA LAGU JIRAY
DABEECOOYINKA ADEEGYADA WAX SOO SAARKA HAY'ADAHA LACAGTA EE LOO FIIRSANAAYO (DHINACA KAYDSIGA LACAGTA	
Inta ay le'ega faa'iidada dulsaarka/dhaladu	
Suurta galnimada in hay'ada lacagta laga heli karo wax soo saarada kale ee ay bixiyaan hay'adaha lacagtu	
Kharashka ku baxa kaydsiga lacagta (khaarashka la qaado, ganaaxa)	
Xaddiga kaashka ay leedahay hay'adu	
Adeegyada qiimaha (adeeg lacageed oo haboon, bay'ada, adeegbixnta habka islaamiga...)	

WAXBARASHADA MAALIYADEED

NOTES

JAWAABAHA LAYLISYADA

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.1

Kaararka sharaxaada

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 1aad

Foomka arjiga ee furashada akoontiga

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 2aad

Wakiilka adeegista macaamisha

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 3aad

Maareeyaha laanta

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 4aad

Shaqaalaha buuxinta foomasha iyo qoraalada (karaani) ee bangiga

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 5aad

Waardiga bangiga

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 6aad

Boodhka ogaysiiska ee bangiga

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 7aad

Armaajada lagu soo bandhiga dukumentiyada

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 8aad

Foomka la soo bixida lacagta

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 9aad

Jeegga

JAWAABTA KAARKA SHARAXAADA 10aad

Reesiitka lacag bixinta

CAAWIYAHA TABABARKA D.2.5

Oo wata xalka

KAARKA SHARAXAADA 1aad

Waxaan leeyahay beer/mashruuc digaag ah. Waxaan hadda heshiis la galay hay'ada mikrofaynaasiga ugu dhow. Cadadka Lacag ahaan aan ka helay mikrofaynasigu waxay dhantahay cadadkii aan u baahnaa. Mudo Saddex bilood kadib, waxaan bilaabi doonaa inaad suuqa u iib geeyo wax soo saarka marshruuca, waxanan heli doonaa lacag badan.
Hasa yeeshe, waa in aan hadda dib isaga bixiyaa dayntii aan soo qaatay oon u celiyaa hay'addii mikrfaynaanisga ahayd ee aan ka soo daynsaday, aniga ku bixinaya calaa bil. Hasa yeeshe, wakhti xaadirkan ah, ma jiro wax dakhli ah oo isaga soo galay wax soo saarka beerta oo aan isaga bixiyo daynta la igu leeyahay. Waxay hadda arrinta iila muuqata in aan qaatay dayn aan ku salaysnayn baahiyahayga.

Ma tahay mid caadi ah?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Nidaam ku haboon naqshadaynta wax soosaarka iyo gaadhsiinta

Hay'adaha lacagu waa in ay xaqiijiyaan in adeegyada wax soo saarka ee ay bixinayani iyo habka ay u bixinayaani yahay mid aan dhibtaato ku u horseedaynin danaha macaamiisha. Waxaa looga baahanyahay in ay ku xisaabtamaan dabeecooyinka iyo baahiyaha macaamiisha marka ay nakhshadaynayaan noocyada wax soo saarka iyo habka bixinta.

KAARKA SHARAXAADA 2aad

Waxaan hada heshiis qaadasho dayn ah aan la saxeexday laba bangi oo ka shaqeeya bixinta daynta: Mid ka mid ah daynta aan qaatay, waxaan ku iibsanayaa guri, halka tan kale aan isaga bixinaayo kharashkii sanadkii la soo dhaafay ku baxay xaflad diimeed aan qabanay.
Hada waxan doonayaa in aan iibsado dhug dhuglay yar, oon si fudud ugu war wareego.Hasa yeeshe, bangigu waxuu iga diiday in aan qaato daynta sadexaad. Arrintani ma dhici kartaa?

Maxaan ka qabaa arrintan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Kohortaga in macaamiishu ay si xad dhaaf ah u qaamoobaan

Shaqadani waa mid caad ah. Ma jiro, wax aan sax ah oo aan ahayn in aad lacag daynsato. Bangigu isaga oo macaamiisha ka ilaalinaaya in ay qaamoobaan, waxaad adiguna ka mid tahay dadka uu ilaaliyo bangiggu. Arrinta, waxay ka mid tahay mabaadiida u baahan in ay ku dhaq-maan bangiyada, si loo xaqiijiyo in qofka la siiyo dayn, kadid marka ay caddaato in uu yahay qof iska bixini kara dayntaas, iy ay dayntaas uu qaatay mid an galinaynin halista inuu six ad dhaaf ah uu u qaamoobo.

KAARKA SHARAXAADA 3aad

Waxaan macmiil u ahay hay'ada lacagadeed.
Waxaan isku dayay inaan fahmo mudada, shuruudaha, iyo kharashaadka galaaya kaydinta lacagta. Hasa yeeshe, qoraalka ku waraaqda uu bangigu ku soo bandhigo macluumadka shaqadiisa, si fiican waan u fahmi kari waayay maadaama oo ay ku qorantahay far aad u yar yar, ooaan akhiryi kari waayay isla markaasna aan fahmi waayay ereyada ku qoran qaarkood.

Arrintani ma dhici kartaa?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Cadcadaanta

Waa in aad shaqaalaha bangiga aad waydiisid su'aalo dheeraad ah. Sababta oo ah waxaad xaq aad u leedahay in aad sidaas yeesho, maadama oo ay hay'adaha lacagtu ay ku qasbanyihiin in ay u hogaansamaan mabaadii'dooda ah in ay si cad oo masuuliyadi ku dheehantahay u siiyaan xoga macaamiisha. Dhinaca kale, waxaa loo baahanyahay in kharaashyada ay macaamiishu ay ka bixinayaan noocyada wax soo saarka, waa in lagu qoraa luuqad fudud oo cad oo ay macaamiishu ay si fudud u fahmi karaan.

KAARKA SHARAXAADA 4aad

Waxaan leeyhay akoonti joogta ah iyo mid kaydsi oo aan ka furtay hay'adaha lacagta.
Aniga hadda kuma faraxsani, inaan furto akoonadaas, sababta oo ah, waxaa laiiga baahanyahay inaan bixiyo kharash aad u badan oo laiiga qaadayo maamuka akoonka joogtada ah, halka akoonka kaydsiga laiga siiyo dhalo amaa dul saar aad u hooseeya.

Tani waxay u muuqataa arrin aan macquul ahayn. Arrintani waxay tahay mid caadi ah?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Qiima goynta masuuliyada ku salaysan

Waa in aad shaqaalaha bangiga aad waydiisid su'aalo dheeraad ah. Hay'adaha lacagaha waxaa looga baahanyahay in kharashyada ay qaada-yaan, shuruudaha iyo nidaamyada ay ku shaqee-yaan uu yahay mid ku haboon macaamiisha oo ay awoodi karaan, isla markaasna u saamixi karo in ay ka helaan macaash macquul ah. Dhinaca kale hay'adaha lacagaha waxaa looga baahanya-hay in ay xaqiijyaan in lacaga ay dhigtaan macaamiishu ay soo saaraan dhalo amaa dul saar macquul ah.

KAARKA SHARAXAADA 5aad

Waxaan ahay qof si xad dhaaf ah u qaamaysan, mana awoodo inaan sii wado bixinta daynta baaqiga igu ah, maadaama oo aan lumiyay shaqadaydii.
Waxaan ka baqayaa talaabooyinka uu bangigu iga qaadi karo haddii aan ku guul daraysto inaan iska bixiyo daynta laigu leeyahay

Ma laga yaabaa inay yimaadaan gurigayga, oo ay igala wareegaan hantidayda amaa mida qoyskayga, amaa mid ka sii daran?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Macaamiisha oo si macquul ah oo ixtiraam leh loola dhaqmo

Hay'adaha lacagtu waxay ku qasbanyihiin in ay macaamiisha ula dhaqmaan si macquul ah oo ay xushmadi ku dheehantahay. Waxa ka reebaan in ay u kala eexdaan macaamiishooda, amaa ay ku dhaqmaan nooc kasta oo eex iyo nic jeclaysi ah. Waa in ay xaqiijyaan in ay jiro nidaam shaqo uu suurta galin kara in la ogaado isla markaasna la xaliyo dhacdooyinka musuqa ah, iyo dhaqanada cadhada iyo ihaanaysiga ku salaysan ee ay shaqaalaha hay'adu ay kula kacaan macaamiisha, siiba marka ay macaamiisha ka soo aruurinayaan daymaha lagu leeyahay.

KAARKA SHARAXAADA 6aad

Waxaan bangiga ku waafaqi waaway arrin dhacday. Waa ayo cidda ku haboon in aan u gudbiyo dhacdadan?

Ma jiraa qof bangiga ka tirsan oo wax igala qaban karaa dhacdadan?

WAXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Nidaamka xalinta cabashooyinka

Hay'adaha lacagaha waxaa looga baahanyaha in ay leeyihiin nidaam u suurta galiyo in ay si deg deg ah u soo dhex galaan marka ay dhacaan dhibaatooyin ama ay cabashooyin ay ka yimaadaan macaamiisha. Waa in ay nidaamka u adeegsadaan xalinta dhibaatooyinka shaqsiyadeed si ay kor u qaadaan adeegbixinta wax soo saarada hay'adaha lacagta.

KAARKA SHARAXAADA 7aad

Shaqaalah bangiga ee haya akoonkayga shaqsi ee joogtada ee aan ku leeyahay bangiga ayaa ogaaday in helay lacag aad u fara badan bishii la soo dhaafay.

Shaqalahu xubno qoyskayga kamida ma la wadaagi karaa arrinta, isaga oo aan iga haysanin wax fasax ah?

AXBARASHADA MAALIYADEED

KU DHAQANKA MABAADII'DA ILAAINTA MACAAMIISHA

Sirta Xogaha macaamiisha

Hay'adaha lacagtu waa in ay xafidaan sirta shaqsiyadeed ee macaamiisha iyaga oo raacayaa shuruucda dalakooda ee la xidhiidha nidaamka xafidaada sirta macaamiisha. Xogahan, waa in kaliya loo isticmaalo ujeedooyinka cayiman ee loogu tala galay, waana sida ay tahay mid, aan la isticmaali karin iyada oo aan laga heshiinin qofka iska leh xogtaas.

R

MAARAYNTA KHATARAHA IYO CAYMISKA

WAXBARASHADA SU'AALO MAALIYADEE

R1. Khataraha hoos ku xusan, tee ayaa aan wax xidhiidha ah la lahayn khatarta?

- ☐ **b.** Ganacsigaaga oo kaca.
- ☐ **t.** In aad murugooto.
- ☐ **j.** Shaqada oo uu shil ku yimaado.
- ☐ **x.** Dab ku dhibaateeya.

R2. Wax yaabaha hoos ku xusan waa middee tan aan la xidhiidhin talaabada lagaga hortago khatarta?

- ☐ **b.** Kaydsiga lacagta.
- ☐ **t.** Inaad caymis ku biirto.
- ☐ **j.** Inaad lacag dirto.
- ☐ **x.** Inaad isticmaasho mara kaneecada.

R3. Caymisku wuxuu kuu suurta galiyaa in aad ka hor tagto khasaaraha kugu imaani kara. ☐ **b.** Run ☐ **t.** Been

R4. Maxay yihiin waxyaabaha ka baxsan heshiisku?

- ☐ **b.** Waa dhukumenti lagu wareejiyo cida haysata siyaasada shirkada caymiska, ee qeexaysa mudooyinka iyo shuruudaha heshiiska lala galayo caymiska.
- ☐ **t.** Waxyaabo cayiman, marxalado, amaa xaalado ku cad heshiiska oo aanan qusaynin amaa ay shirkada caymisku bixinaynin amaa daboolaynin.
- ☐ **j.** Codsiga lacagta lagu bixinaayo khasaaraha dhacay ee ku cad boolisga ama siyaasada shirkada caymiska.

Jawaabaha sualaha: R1:t; R2:j; R3:b; R4:t

1. MAAREE HALISTA

Halistu waa masiibo inta badan ka qarsoon dadka, taas oo dhaawici karta inaga iyo qoyskeenaba. Kharta waxay u dhacdaa siyaabo kala duwan, oo ay ka dhashaan cawiiqibyo kala duwan, oo heerka dhaawacoodu u dhexeeyo kuwo fudud iyo kuwo culus, iyada oo ay taasi ku salaysantahay dabeecooyinka khatarta, marxaladaha dadka iyo goobaha ay saamaynta ku leedahay .

QEEXID

Khatartu waa marxalad ay hu dhganyihiin shurta galinmada amaa cabsida in ay dhici doonaan waxyaabo aan wanaagsanayn.

CAAWIYAHA TABABARKA R.1.1

Kaarasha halisaha

Xanuuka



Geerida

Dabka

Adiga oo ku salaynaaya halisaha adiga iyo qoyskaaga soo waajihi kara, waxaad shaxda hoos ku xusan aad ku qortaa halisahaas, adigoo saadaalinaaya inta jeer ee ay soo noq noqon karaan iyo kharashka ay soo kordhin karaan. Tusaale, geeridu, waa dhacdo u imaani karta si dhif ah (mar!), balse waxaa ku baxa kharashaad aad u badan.

		KHARASHKA		
		Aad ahmiyad u leh	Ahmiyad dhex-dhexaad ah leh	Aad ahmiyad u leh
INTA JEER	Soo noq-noqda			
	Dhex-dhexad			
	Dhif ah			Tusaale: Geerida

Sida kuu muuqata, waa suurta gal in ay dhacaan halisaha kala duwan, waxayna la yihiimaadaan cawaaqibyo kala duwan oo heerkoodu u dhexeeyo fudayd ilaa halis aad u badan u kala saamaysa xaalada qofka iyo goobta.

MAANKA KU HAY

Waxaa jira talaabooyin deg-deg ah oo aad qaadi karto si lafahaaga uga ilaaliso halisaha, waxaana talaabooyinkaas ka mid ah:

- Inaad meesha ka saarto/amaa aad ka fogaato halista (Tusale. Ilkahaaga oo aad burush iyo saabuun ku cadaydid).
- Halista oo aad cid sadexaad u xawishid (Ururada faa'iido wadaaga amaa shirkadaha caymiska).
- Inaad saadaaliso, una diyaar garowda halista (tusaale lacag aad kaydsato).

Waxaa jira talaabooyin kala duwan oo aad qaadi karto, si aad naftaada iyo qoyskaaga aad uga ilaaliso halisaha. Waxaad taxdaa talaaaboyinka iyo cidda aad la hoos galayso amaa aad kaga hoos gabanayso

CAAWIYAHA TABABARKA R.1.2

Kaarasha halisaha

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Inta aad nooshahay halistu waa lama huraan.
- Halisaha qaarkooda waa la saadaalin karaa, waxaana lagaa rabaa in ad qaato talaabooyin aad ku yaraynayso waxyeeladooda.
- Waxaa muhim ah in aad meel iska dhigto lacag aad ugu tala galashay xaaladaha deg degga ah, si aysan dhibaatooyin fud fududi ay waxyeelo badan kuu gaadhsiini. Kaydsiga lacagtu waa furaha aad hoos ugu nuglaashahaaga.
- Marka laga hadlaya, arimaha kale ee deg dega ah, waxaa suurta gal ah inay kugu filaani waydo lacagta aad kaydsatay, sidaas darteed waxaad u baahantahay inaad gasho caymis.
- Waxaa lagaaga baahanyahay inaad qaado talaabooyin aad ku ilaalinayso naftaada iyo qoyskaaga

2. TILMAAMAHA AAD KU SAMAYSAN KARTO LACAGTA ARIMAHA DEG DEGA AH

• Bilow in aad lacag u dhigato arrimaha deg dega ah si shaqsi ah kuu soo food saari kara maalintii, todobaadkii iyo xitaa inta aad nooshahay, xataa haddii ay lacagtu yartahay. Sababta oo ah, lacagtani waxay noqondoontaa mid badata marba marka ka sii danbaysa.

• Dhig lacagtaada meel amaan ah, waxaa fiican in ay meeshaasi tahay mid ka baxsan hoygaaga, oo ay cidna gaadhaynin. Waxaa fikir wanaagsan ah inaad furato akoonti, haddii ay suurta gal tahay.

• Ku biiri kaydkaaga cadad lacag ah oo kala duwan, adiga oo ku xisaabtamaaya, dakhliga ku soo galo xiliyada kala duwan.

• Samee wax kasta oo aad ku yarayni karto kharshka aan loo baahnayn. Waxaad ogaataa inuu qof kastaa uu kaydsani karo lacag, si kastaa oo ay u yartahay lacagta soo gasha, xataa lacag yar ayaa la iska goyn karaa oo la kaydsan karaa marka uu dakhligu yaryahay.

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 1AAD

LACAGTA ARRIMAHA DEG DEGA AH EE MARY

Mary waxay go'aansatay in ay dhisto lacagteeda arrimaha deg degga ah. Si ay taas u yeesho, waxay go'aansatay in samayso shax, ay ka muuqato dhamaan dhakhligii sanadkii hore soo galay qoyskeeda.Wuxuuna u muuqdaa sida hoos ku xusan:

Dakhliga soo galay qoyskayga mudo hal sano ah

Bilaha	Cadadka (Dollars)
Janiweri	1470
Febiruweri	1400
Marj	1470
Abriil	1400
Mey	1550
Juun	1550
Julay	1550
Awgest	1470
Sebtember	1400
Ogtober	1470
Nofember	1400
Desember	1510
Wadarta guud	**17840**

Su'aalo ku aadan Mary iyo qoyskeeda:

- Marka la isku geeyo, lacag intee le'ega ayaa soo gashay qoyska Mary 12 bilood gudahood (ku xisaabtan in ay jiri karaan dakhli cayiman iyo mid kala duwan)?
- Muxuu yahay celceliska dakhliga bishii soo gala qoyska?
- Cadad intee le'eg oo lacag ah ayay u baahanyihiin in ay meel iska dhigaan arrimaha deg-dega ah?

MAANKA KU HAY

Lacagtaada arrimaha deg dega ah, waxaa loogu tala galay in aad ku dabooshid kharashyada degdegga ah ee yaryar. Waxaad u badan tihiin dad aan isku karaynin in ay lacag u dhigaan arrimaha degdegga ah ee waawayn, sida daawaynta wakhtiga dheer qaadata ama dhimashada ku timaada xubnaha qoyska.

Haddii aad qorshe u samaysato arrimaha deg dega ah, waxaa inta badan kuu suurta gala inaad gaadho hadafkaaga/yoolkaaga. Haddii ay kuu taalo lacagta arrimaha deg dega ah, waxay taasi kaa samata bixin kartaa suurta galnimada inaad ku fakato lacagaha kale ee kuu yaala ee aad ugu tala gashay bilaabista ganacsiga, dhismaha guryaha, horumarinta guryaha, maalgalinta wax barashada, (caruurtaada iyo naftaada). Waxaa kale oo aad ka badbaadi kartaa inaad raadsato dayn lagugu siiyo dul saar aad u badan.

3. FAHAM SIYAASADDA SHIRKADAADA CAYMISKA

CAYMIS: Fikir noocee ah ayaad ka haysataa?

Mabda'a ay shirkadaha caymisku ku shaqeeyaani waxay tahay in ay inaga difaacaan halista ina soo food saari kara (shilalka, xanuunka, tuugada iwm).

QEEXID

Caymis: Waa shirkad leh nidaam ay ku shaqayso oo u taagan ilaalinta qof kasta oo ka mid ah amaa ka haysta heshiis caymis ah, kaas oo mag dhow lacageed laga siiyo, marka ay ku soo food saaraan haliso ay ka mid yihiin shil amaa wax kasta oo lagaga hortagi karo iyada oo la raacaayo heshiiska caymiska iyo waxyaabaha uu daboolaayo ee ku goran heshiiska.

Ururka faa'iido wadaaga: Waa urur wadaaga wixii faa'iida ah, oo aan ahayn faa'iido raadis, oo ay si gund u leeyihiin dadka ku bahoobay amaa xubnaha ka ahi. Wuxuu caymis siiyaa xubnaha ka tirsan, wuxuu ku shaqeeyaa kolba sida uu yahay rabitaankooda ugu fiican.

Shirkada Caymiska: Shirkada caymisku waa hay'ada ganacsi, oo bixisa adeegyada caymiska. Wuxuu hadafkeeda amaa yoolkeedu yahay inay sameeyso macaash.

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 2AAD

MARTHA OO DHAWAC KA SOO GADHAY GACANTA

Maalin maalmaha ka mid ah, oo ay ku sugnayd beerta/mashruuca digaaga, Martha waxay gashay shil ka dhashay qalabka ay u isticmaalaysay hagaajinta shabagyada celiya digaaga, waxayna wax ka noqotay gacanta. Waxay aad ugu dadaashay in ay joojiso dhiiga ka yaacayay boogta iyada oo xidhaysa. Waxay isku dayday in ay u adkaysato xanuunka, balse waxaa fiidkii aad u barartay gacantii uu dhaawacu ka soo gaadhay. Maalinta xigtay waxay aaday shaqada, balse waxay dareentay xanuun aad u badan. Marta, haba yaraate masuulkeeda lamaysan socodsiinin xanuuka haya, maadaama oo ay ka baqaysay in ay sidaa ku waydo shaqadeeda, sababta oo ay masuulkeedu waa haweenay aad u xanaaqda marka ay shaqaaluhu waydiistaan fasax. Waxa kale oo ay ka baqday suurta galnimada in ay ilaaliso shaqaalaha mashruuca digaaga sida Marta oo kale gasho raaji kharash badan ku kaca, faashad lagaga xidho gacanta, mana haysato lacag ku filan oo ay isaga bixiso kharashkaas. Waxay ogtahay inuusan jirin caymis wax u tara shaqaalaha ay ka mid tahay Marta. Waxa soo food saaray walwal, ku aadan wax ku imaani kara, haddii ay ubaahato daawayn qaali ah, amaa ay u baahato lacag ay ay ku aado Dhakhtarka si loo daaweeyo. Maxaa la gudboon in ay yeesho? Waxay go'aamsatay inay sugto xoogaa maalmo ah, hadii loo baahdo, waxay shaqaalaha waydiisan lahayd in ay siiyaan lacag ay ku daboosho kharashka ay isku daawaynayso. Waxay jeceshahay in ay meesha ka saarto in ay lacag ka daynsato shaqaalaha, haddii ay mustaqbalka ay soo food saarto dhibtan oo kale.

DARAASAD MOWDUUCEEDKA 3AAD

MESHAK AYAA DHAAWAC KA SOO GAADHAY LUGTA

Meshak wuxuu shalay shil ku galay beertiisa. Waxa lugta kaga istaagay sac uu doonaayay inuu qabto. Markii ugu horaysay, ma jirin dhib badan oo soo gaartay lugtiisa, hasa yeeshe, fiidka waxaa aad u barartay lugtii. In muddo ah, isaga iyo shaqaaluhu waxay waxay ahaayeen shaqaale si rasmi ah ugu diiwaan gaashan beerta. Isaga oo ka duulaya talo uu ka soo helay beer kale, wuxuu shaqaaleeyay shirkad caymis ah oo ka daboosha kharashyada la xidhiidha shilalka iyo waxyaabaha kale sida daawada, talooyinka dakhaatiirta ee cusbitaalada ay booqanayaan shaqaaluhu. Waxaa jirtay lacag yar oo laga jarayay mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha, taas oo loogu tala galay in lagu daboolo dhibaatooyinkan oo kale. Waa markii ugu horaysay ee uu Meshak la kulmo shil inta uu helay damaanad qaadka caymiska. Wuxuu go'aan saday inuu u yeedho shirkada caymiska si uu u su'aalo geedisocodka iyo nidaamka uu raacayo. Meshak wuu bogsooday, wuxuuna ka maarmay inuu jeebkiisa ka bixiyo kharashkii daawaynta.



CAAWIYAHA TABABARKA D.2.1

Ciyaarta (gaym) khasnada dhariga ah

CIYAARTYA KHASNADDA DHARIGA AH

3 Calamad



DAAWO

WAXBARASHADA MAALIYADEED

CIYAARTYA KHASNADDA DHARIGA AH

7 Calamad

CUSBATAL

WAXBARASHADA MAALIYADEED

CIYAARTYA KHASNADDA DHARIGA AH

CAAFIMAAD FIICAN

WAXBARASHADA MAALIYADEED

CIYAARTYA KHASNADDA DHARIGA AH

4 Calamad

TAKHTAR

WAXBARASHADA MAALIYADEED

Waligaa ma ogaan kartid, marka amaa inta lacag ah ee kaaga baxaysa caafimaadkaaga. Markarka qaar kharashka kaaga baxaaya caafimaadku wuxuu noqon karaa mid aad u balaadhan, oo aadan awoodi karaynin. Waa midaas ta keentay, ahmiyada in la galo caymis si meel la isugu geeyo halisaha dhici kara.



Sirta ka daynbaysa in meel la isugu geeyo halistu waxay tahay hantida qof kasta waxa uu hayo la isgu geeyo hal dhari oo loo la wada wadaago. La inoogama baahno inaan mar kasta aan lacag kala soo baxno dharigan. Caymisku wuxuu si fiican u shaqayni kartaa haddii marka si wada jir wax loo wada bixiyo.

Waxaa lagaaga baahanyahay in aad qadinto lacagta caymiska, si ay kuugu suurta gasho in aad hesho adeegyada caafimaadka iyo waxyaabaha kale ee uu kaa daboolaayo caymisku. Inta uu le'egyahay adeegyada caafimaad ee aad helaysid waxa uu ku xidhan yahay, inta ay le'eg tahay lacagta aad ku tabarucday amaa aad bixisay. Mar kasta oo aad wax badan ku tabarucdo, waxaa badanaaya adeegyada aad helayso.

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Caymisku: Waa aalad lagu ilaaliyo dakhliga, laguna daryeelo bulshada.
- Caymiska ood gashaa waxay ka dhigantahay inaad ka hortagto halisaha ku soo food saari kara.
- Caymisku: Waa halisaha oo meel la isugu wada geeyo.





⚠ **Fiiro gaar ah:** Shaqaalaha qaarkood siiba kuwa mushaaraadka ka qaata shirkadaha, (tusaale ka qaata shirkadaha, ka diiwaan gashan hay'adaha adeegyada ee dowlada bixiya kuwaas oo bixiya cashuurta) waxay leeyihiin caymis, balse ma ogo waxa laga daboolayo iyo sida looga daboolayo. Mararka qaar, shaqaalaha shirkadaha caymisku, si cad u faahfaahiyaan nidaamka cayminta, waxayna isticmaalaan foomam lagu wareero.

Maanka ku hay: Aqoontu waa awood. Waa in aad ogaata nooca caymiska (waxyaabaha uu daboolayo, lacagta la bixinaayo, sida loo codsado caymiska). Had iyo jeer waa in aad kaargaaga caymiska aad gacanta ku haysato, haddii aad leedahay.

4. KA FIIDAYSO SIYAASADA CAYMISKAAGA

Dadka waxaa la soo gudboonaada, haliso farabadan, inta ay nool yihiin, iyada oo xili kasta ay la kulmi karaan tiro halisa ah oo kala duwan Halisaha qaarkood waxay yihiin kuwa si guud u soo food saari kara qof kasta, halka halisaha qaarna ay yihiin kuwa si gaar ah ugu dhaca dadka qaarkood.

CAAWIYAHA TABABARKA R.3.1

Kaararka halisaha





Suaalo

- Maxaad ka taqaan siyaasada shirkadaha caymiska? Haddii aadan ogayn, ma doonaysa inaad ogaato? ☐ Haa ☐ Maya
- Maxaad ka taqaanaa ereyada muhimka ah ee caymiska? ☐ Haa ☐ Maya

Hadda aan fiirimo ereyada muhimka ay iyo sharaxaadooda

EREYAYADA AASAASIGA AH EE CAYIMSKA	
Mag-dhowga, kafalaada	*Waa cadadka lacagta ee ay hay'ada caymisku siiso qofka ku jira caymiska, marka ay soo food saran waxyaabihii uu ku galay heshiiska caymiska (sida badan sida halisaha: shilka, dabka, xanuunka iwm), taas oo helaayo marka uu la yimaado codsi sharci ah.*
Siyaasad	*Waa heshiiska dhex mara shirkada caymiska iyo qofka galaya caymiska (macmiika) Siyaasadu waxay soo bandhigtaa mudada, shuruudaha, inta oo jiraayo heshiisku, halisa uu daboolaayo caymisku iyo waxyaabaha uusan daboolaynin).*
Kharashka	*Waa qiimaha ku xusan siyaasada caymiska, oo ingta badan loo kala jajabiyo laguna bixiyo bil, rubuc.*
Caymisan (Qof) / xubin / ka faaiidayste	*Waa qofka xaqa u leh inuu qaato magdhowga amaa kafalaada caymiska, marka ay halista uu la kulmay ay tahay mid uu daboolaayo heshiiska caymisku.*
Codsi	*Waa codsi qoraal ah oo lagu codsanaayo magdhow, ka dib marka uu dhacdo kharaare ku xusan siyaasada caymiska.*
Kaadhka caymiska	*Kaadh ay soo saarto shirkada caymisku oo ay ugu tala gashay in ay ku xaqiijiso qofka haysta heshiiska caymisku uu iska bixiyay lacagtii laga rabay.*

Si aad us samayso codsi guulaysta, amaa la aqbalo, waxaa lagaaga baahanyahay in aad marto xoogaa talaabooyin ah. Maanka ku hay inaad u baahantahay in aad buuxiso foomka codsiga, kaddiba aad dirto adiga oo raacinaaya dhamaan dhukumentiyada loo baahanyahay.

CAAWIYAHA TABABARKA R.3.2

Heeraka uu maro codsiga caymisku

HEERARKA CODSIGA CAYMISKA

Buuxi foomka codsiga sida ugu dhakhsaha badan, ka dib marka ay ku dhaawac/khasaare dhaco 12 bilood gudahood.

(iyada oo laga duulaayo mudada ku xusan heshiiska caymiska).

WAXBARASHADA MAALIYADEED

HEERARKA CODSIGA CAYMISKA

Soo gudbinta waxyaabaha looga baahanyahay.

Dhukumentiga: Arjiga codsiga caymiska oo uu saxeexayo qofka wata heshiiska caymiska, xubinimada, kaarka xubinimada, nuqulka aqoonsiga, dhukumentiyada kale IWM.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

HEERARKA CODSIGA CAYMISKA

Haddi lagu siiyay magdhow ka yar intii aad filaysay , waa in aad soo bandhigto cabashadaada, aanad ogaato sababta, iskuna daydid in wax laga qabto.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

HEERARKA CODSIGA CAYMISKA

Xaqiijinta in magdhowga la bixiyay yahay mid u dhigma faiida aad u qalanto inaad hesho.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

HEERARKA CODSIGA CAYMISKA

Hadii aan magta lagugu siinin 7 maalmo gudahood (amaa mudada ku xusan heshiiska caymiska, la xidhiidh shirkada caymiska markale si aad u hubiso horay usocodkeeda.

WAXBARASHADA MAALIYADEED

FARIIMAHA FURAHA AH

- Si aad u hesho wax soo saarka caymiska ee ku haboon waayahaaga, waxaad u baahantahay marka hore inaad ogaato halisaha idin soo wajihi kara adiga iyo dadka aad doonayso in aad galiso caymiska.
- Caymiska wuxuu adeegsadaa ereyo cayiman- Waxaa lagaaga baahanyaha in aad fahantid kadibna aad adiga oo wax og xulatida, noocyada wax soo saarka caymiska ee jira.
- Each insured risk may require different documentation when making a claim.

5. XULO WAX SOO SAARKA CAYMIS OO KU HABOON MARXALADAADA

Waxaan doonaynaa in aan dadkeena aan ka caawino in ay xal u helaan, shakiga ay ka ay ka qabi karaan heshiisyada caafimaadka ee caymiska ee ay kiraystaan.

CAAWIYAHA TABABARKA R.4.1

Daraasad mowduuceed ku saabsan caymiska caafimaadka

DARASAD MOWDUCEDKA #1 Mary aabaheed

Mary aabeheed ayaa wuxuu galay heshiis ah caymis caafimaad ay ku jiraan isaga iyo hooyadii. Waxuu isticmaalaa qayb ka mid lacagta kaalmada ah ee ay u soo dirto inantiisa Mary wuxuuna lacagtaas ku bixiyaa caymiska.

Sanadkii ugu horeeyay, midna lama kulmin wax dhibaato caafimaad ah.
Mary aabeheed wuxuu u haystay in loo celin doono xoogaa ka mid ah, lacagta uu ku ku iibsaday caymiska, maadaama oo uusan qaadanin adeegii caafimaad ee ku galay heshiiska caymiska.

- **Mary aabaheed xaq miyuu u leeyahay in loo celiyo lacagtii uu ku iibsaday caymiska? Maxay tahay sababtu?**

DARAASAD MOWDUUCEEDKA #2 Meshak

Meshak wuxuu qaatay caymis caafimaad. Xiligii jiilaalka, waxaa u yimid mid ka mid ah ilma adeeradii si uu ula noolaado, isla markaasna uu ka caawiyo beerta. Ina adeerkiis waxaa ku dhacay hargab aad u daran oo xanuunkiisa la galay cusbitaalka.

- **Meshak caymiskiisu ma noqon karaa mid daboola adeega caafimaad ee la siinaayo ina adeerkii? Maxay tahay sababtu?**

DARAASAD MOWDUUCEEDKA #3 Jane

Jane waxay ka cabsi qabtaa, inaysan awood u yeelan doonin inay iska bixiso kharashka caymiska ee heshiiska cusub ee caymiska caafimaadka, ee loo soo bandhigay.

Balse, waxay ogtahay, in ay u baahantahay in sanadka danbe laga qalo jilibka, oo ay ka xanuunsanaysay muddo badan.

In kasta oo kharashka ay bixisay ay ku heli karto inay ka daboosho caafimaadka mudo sanad ah, jane waxay doonaysaa in ay gasho heshiis caymis oo jira mudo saddex bilood oo kaliya oo ka bilowda 3 bilood ka hor inta aysan galin qaliinka lagaga samynaayo jilibka.

- **Jane ma gadan kartaa heshiis caymis oo socda mudo saddex bilood oo kaliya? Maxay tahay sababtu?**

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

- Caymisku wuxuu u muuqan karaa mid lagu wareero. Hasa yeeshe waxaad hada fahansatahay waxyaabaha aasaasiga ah, ee aad ku qiimayni karto sida uu kuu ilaalin karo caymiska aad gashay, iyo inuu istaahilo in la iibsado oo lacag laga bixiyo.

- Haddii aad doonayso inaad iibsato heshiis caymis oo caafimaad, waxaa lagaaga baahanyahay inaad go'aamiso kuwa ay yihiin xubnaha ka mid noqonaaya heshiiska. Heshiisyada qaarkood, waxay xubin kasta oo galaaya caymiska ay ku soo dalacaan kharash dheeraad ah.

- Heshiisyada caymiska maaha kuwo isku wada mid ah. Waxaa lagama maarmaan ah in aad fahanto heshiiska iyo shuruudaha ku xidhan, ka hor inta aadan galin heshiiskaaas. Noqo qof isku kalsoon marka aad la hadlaysid shirkada caymiska, cidda aad u shaqayso, wakiilada ururka ganacsiga haddii ay jiraan waxyaabo aad shaki ka qabto.

- Haddii aad danaynayso inaad iibsato heshiis caymis, amaa aad qabto wax su'aal ah, waa in aad si degdeg ah aad kala hadasho wakiilka caymiska, cidda aad u shaqayso iyo wakiilada ururkaaga.

NOTES

LIFAAQA IYO DHUKUMENTIYADA MUHIMKA AH

CAQABADAHA KU JIRA IN LACAG LOO DHIGO ARIMAHA DEG DEGA AH	TALADA
Waxaan door bidaa in dhamaan lacagta aan helo aan u diro waalidkay iyo qoyskayga (waajibaadka iga saaran qoyska, siida da'yarta iyo wakiiladayda).	• Kadso lacag aad ugu tala gasho arimaha degdega ah, si aad naftaada wax ugu qabato marka aysan jirin cid wax kuu qabata (siiba kuwa ku nool dhulka ka fog halka aad ku nooshahay). • Bilow inaad si maalinle, todobaable ah iwm aad u kaydsato lacag kolba in yar dhigto si aad u adeegsato arrimaha degdega ah ee ku soo food saara. Lacagtaas yari waxay noqon doontaa mid badata marba marka ka sii danbaysa.
Marka aan lacagta dhigto gurigayga, waxaan ka baqaa in laiga xado, amaa ay iga lunto.	• Dhigo lacagtaada meel amaan ah, waxaa fiican meel ka baxsan guriga, si ay cidina u helin. • Furo akoon aad ku kaydsato lacagta, (aad ugu tala gashay arrimaha degdega ah, waxaa xal ah inaad ka furato mid ay dhib yartahay isticmaalkiisu oo aad lacagta kala bixi karto mar kasta oo aad rabto.
Dakhligaygu maaha mid isku mid ah (wuxuu ku salaysan yahay xili roobaadka).	• Kaydso lacag ay cadadkeedu kala duwan yahay, adoo ku salaynaaya inta lacag ah ee ku soo gasha ee lagu siiyo, xiliyo cayiman.
Waa in lacagta isoo gasha aan u isticmaalo, in aan isaga bixiyo daynta la igu leeyahay.	• Diyaari jadwal xilile ah, oo aad isaga bixiso daynta lagugu leeyahay, bilow inaad marka hore iska bixiso daynta ay kaaga socoto dhalada badani. • Xili kan la mid ah, waa in aad bilowdaa in aad lacag u kaydsato arrimaha degdega ah ee kugu imaani kara si maalinle ah, todabaad leh, xitaa haddii lacagta aad dhigaysaa tahay mid yar. Waxaa kori doona kaydkaaga si kasta ha u yaraato lacagta aad kaydsanayso.
Waxaa igu adag inaan iska bixiyo kharashka baahiyaha aasaasiga ah.	• Samee wax kasta oo suurto gal ah oo aad ku yarayni karto kharashka aan loo baahnayn. • Qof kasta wuxuu kaydsan kara lacag, si kasta oo ay u yartahay, ama si kasta oo uu yaryahay dakhligu (bal sheeg lacag yar oo ah mida laga isticmaalo deegaanka iyo inta ay noqonayso marka la dhigo maalin todobaad, ama bil).

JAWAABAHA SUAALAHA CAAWIYAHA TABABARKA R.4.1

JAWABTA DARAASAD MOWDUUCEEDKA #1

Mary aabaheed xaq miyuu u leeyahay in loo celiyo lacagtii uu ku iibsaday caymiska? Maxay tahay sababtu?

Mary aabaheed xaq uma laha in dib loogu celiyo lacagta, sababta oo ah ujeedada loo galay caymiska caafimaadku waxay ahayd in laga hortago halisaha caafimaadka. Looma cilinaayo kharashka uu ku iibsaday caymiska, haddii uu xanuun ku dhici waayay qof ka tirsan qoyska, oo loo baahan waayay in la aado Dhakhtar.

JAWABTA DARAASAD MOWDUUCEEDKA #2

Meshak caymiskiisu ma noqon karaa mid daboola adeega caafimaad ee la siinaayo ina adeerkii? Maxay tahay sababtu?

Maya, heshiiska Caymiska ee meshak maaha mid si cad u daboolaya ina adeerkiisa. Heshiiskani wuxuu yahay mid si cayiman u daboola xubnaha qoyska aadka ugu dhaw (afada, sayga, iyo caruurta), kaliya meeshaak waxaa loo samayn lahaa tixgalin, haddii uu horay u bixin lahaa kharash dheeraad ah oo ina adeerkii u suurta galiya inuu helo caymis caafimaad.

JAWABTA DARAASAD MOWDUUCEEDKA #3

Jane ma ma gadan kartaa heshiis caymis oo socda mudo saddex bilood oo kaliya? Maxay tahay sababtu?

Qofkani ma gadan heshiis caymis ah oo soconaayo muddo saddex bilood ah, maadaama oo lacagta heshiiska lagu saleeyay muddo hal sano ah. Sidaas darteed, waxba kama badali karto tirada bilaha, waana in ay bixisaa kharashka heshiiska caymiska ee ah sanad buuxa.

Mary iyo Mousa

Aynu ugudubno kharashka. Qaybtanu way adagtahay, waxaan dareemayaa inaynu kharashgaraynayno wax badan.
Aynaan iloobin lacagtaan waalidiintayda udiro ee kor ugu kacday 100 laga bilaabo bishii hore.
Xusuuso inaad rabtay inaad mobeelkaaga badasho. Waankuu eegay qiimaha oo waxay noqotay 120.
Haa waanku daray taas waa kharash ikhtiyaari ah. Aynu firino inaynu bishan awoodi karno.
Bas way dhamaatey. Waa inaynu lasacono dakhliga oo dhan iyo kharashkaba maadaamooy isbadbadalaan.
Waad saxsantahay, wayna fiicantahay. Aynu tixraacno.
MIISAANIYADA QOYSKA MARY
ILAHA DAKHLIGA
Dakhliga joogtada ah
Cadadka
Mushaarka Mousa (dukanka qalabka nijarada)
$600
Lacagta ay Mary ku biiriso miisaaniyada qoyska
$800
Isugaynta dakhliga joogtada ah
$1400
Dakhliga isbadala (aan joogtada ahayn)
Dakhliga laga helo iibka alaabooyinka guryaha iyo xafiisyada n
$70
Isugaynta dakhliga isbadala
ISUGAYNTA DAKHLIGA
$70
$1470
KHARASHKA
Oiyaasta qarashka aasaasiga (baahiyaha)
Kirada
$220
Gaaska wax lagu karsado, biyaha, laydhka
$80
Cunada
$350
Safarka iyo qaadiidka (gaadiidka dadwaynaha)
$90
Daryeelka caafimaadka / daawada
$50
Isgaadhsiinta (diilka telefonka)
$30
Fiida dugsiga barbaarinta caruurta (KG)
$100
Lacagta loo diyaayo Maryhooyadeed
$100
Isugaynta kharshka (baahiyaha)
$1020
Kharashaka laga maarmi karo (rabitaanka)
$120
Mobaylka cusub ee loo iibinaayo Mary
Isugaynta lacagta (rabitaanka)
$120
ISUGAYNTA KHARSHAKA
$1140
DAKHLIGA OO LAGA JARO KHARASHKA (KAYDKA)
$330

Maalin kale
Mousa igu caawi dib u eegida risiidhyadan. Waxaan umaleyin inaynu kharashgareyney intaynu qorshaynay inka badan.
Haa, waxaa sababay baan umaleyin guriga joogitaanka badan ee uu subabay saf marenka, lacag baadan baynu cunto iyo adeegyo kale ku bixinay. Gaadiidka isticmaalkiisana waynu yareyin kari waynay sababto ah tagaasidii aynu marmar isticmaali jirnay.
Haa, waxa nagasoo galo dukaanka oo yaraadayna wuuna saameeyey.
Haye, aynaan soo gadin moobeel oo aynu eegno kharashyada aynu yareyin karo. Markas wax kasta caadi bay noqon.
Maanta waxaan lahadlayey shaqaalaha kale ka shaqeeya dukaanka nijaarnimada. Waxay isku wada raaceen in dukaankaaga la balaariyo ooynu saa sameyno.
Haa qaali waan ogahay. Laakiin hadda misaaniyada ayaa yaro waa inaynu waxyaabahan muddoyinka dheer aynu ku sameyin karno u yar kaadinaa.
Maynu tijaabino badeeco kaydin ookaa karta lacag dhigitaanka bil kasta si joogto ah.
Ma waxaad kawadaa badeeco aan bil kasto ku tabaraco lacag kooban? Haa, taasi waa fikir fiican markaasna waxay u isticmaali lahayin dukaanka.
Haa, waakan waxaa la dhahaa akoonka kaydinta ee qandaraaska ah. Tanna aad bay ugu fiican tahay
Waanka helay fikradda. Laakiin waxaa jira ….inooma jilicsano sidaynu u helo badeeco bangiyeed. Waan lahadli marka hore oo waan ogaan waxa loo baahan yahay iyo inay qasab tahay tagi taankaygu iyo inkale. Bal aynu aragno waxay dhahaan.

Haye, waadku mahadsantahay macluumaadka. Waan fahansanahay inayna dhib yareyn todobaadkan soo socda dhammaadkiisa Ayaan idiin iman
si aad u eegtaan warqadahayga rasmiga oo dhan iyo inaan ka furan karo akoon bangigiina.
Waanu ku sugi
BANK
Mousa hadda Ayaan lahadlayay bangiga. Waxay dhaheen wayku adkaatay kaar deymeed laakiin waxay u badan tahay inaan akoon keydis inaan furan karo.
Waa war wanaagsan.
Marwo Mary markaan tix raacno warqadaha rasmiga ah eed noosoo xareysay wax dhib ah majiro si aad ufurato akoon kaydis ah oo caadi ah si aad u isiticmaasho adeegyadaayada. Lacag yar ayay kaaga baahan kaar toos ahna xaq baad u leedahay.
Mahadsanid, taaso waa war wanaagsan. Hadda waan saxeexayaa oo baroosaska waan bilaabayaa.
Kawaran akoonka kaydis ah ee qandaraaska? Adeega ma mid aad bixisaan baa? Deyinna? Sababtoo ah waxaan aad u xiisaynayaa inaan balaariyo dukaankayga.
REDUCING POVERTY
Waanku fahansanahay. Laakin wakhti xaadarkan waxaan kuu furi karaa uun akoonkan kayid ah ee caadiga ah. Wakhti kabacdina, waynu wada fariisan doonaa ooynu eegi doonaa adeegyada kale ee aad heli karto. Dukaankaagu wuu fiican yahay marka waxaan filayaa in bil gudaheed aad deyin ku heli kartid.
Aad baad u mahadsantahay!
Mousa waxaan furtay akoon kaydis oo caadi ah. Tanu waa talaabo aad u dheer aad baana ugu faraxsanahay.
Waan kugu faanaa, markastaad heshaa waxaad rabtid.

Wakhti yar kabacdi
withdraw
deposit money
20
40
50
200
In yar kabacdi
Waxaan ka helay kabahaas cagaarka ah ee tiniska oon la rabaa wiilkaygo 7 jir ah. Laakiin dhibku waxaa weeyaan wax lacag ah mawato.
Dhib male kaar waan aqbalaa, ma leedahay kaar?
Waxaan u baahanay 40 si aan bari usiiyo adeeg bixiyahayga. Hadda waxay iwaydiin lambarkayga.
Haa taasu waa si fiican. liga dhig lambarka 29.
Tanu waa si haboon hadda mar dhow Ayaan kaarkan qaatay.
Haa sanad kahor ayaanu bilawnay aqbalida kaarka. Waana si fiican sababto safmarka ayaa jiro waxay noo saamexeysa inaanu yareyno taabashada lacagta caddaanka ka ah, taaso ammaanka ruux kasta ufiican.
Haa waxaan kalooba ka fikirayaa inay tanu ufiicnaan doonto macalaa dukaankayga.
Maxaa ku jira boorsadaas?
Waxaan kabo usoo gaday beter. Waxaanan isticmaalay kaarka bangigayga, aad bay u haboontahay.

Hooyo, daqiiqado kabacdi Ayaan kusoo diri doonaa lacagtaan kusoo diri jiray. Laakin fadlan sug ilaa aan kuu sheegayo, sababto waxaan tijaabinayaa xawilid cusub.
Haye qaali, waxaan sugi fariintaada. Laakin fadlan lasoo dhakhso lacagta dagdag ayaanu ugu baahanahaye.
Fadlan buuxi foomkan, aad buu u dhib yaryahay markaana utag lacag hayaha xaggaas isagaa ku diriye.
QUICK TRANSFER
5 daqiiqo kabacdi
Haye, waxaad rabtaa inaad dirto 100, waxaan kaa rabaa 105, 5ta waa inta lagu dirayo.
Haye, laakin hooyadey waxay heli 100 soo ma aha?
Haa, wax qarsoon majiro.
Hooyo waa inaad tagtaa suuq weynaha ABC, waa wakiilo lacagta ayaad xaggaas ka heli kartaa. Waxaa jira mid kuyaala geska gurigaaga.
Taasi waa si fiican
Wakhti yar kabacdi
Hadda Ayaan helay 100 kii. Aad bay u dhib yartahay.
ABC Supermarket
Aad baan ugu faraxsanahay inay shaqeysay tanu. Waynu wada hadli doonaa. Is ilaali.
END

Josef iyo Marta




Kama danbeyin waxay isiiyeen lacagtii todobaadkii hore oo dhan. Meesha digaaguna aad bay u wacantahay.
Si fiican weeyan
Waxaana lagayaabaa inay iibaahdaan maalinkasta todobaadkan soo socdana
Taasi waa sii fiican
Waankuu sheegay. Shaqo badni, dulqaad iyo iimaan ayaa markasta horey noo wadi. Aniga xataa lacagtaydii waansoo qaatay wax yarna way noogu dareen maadaamooy qiimaha khudaartu kor ay u kacday.
Waxaan kuridayaa 20kan bashqadda keydka. Ma aha inaynaan isticmaalin lacagtan waxkasto dhaca.
Waxaa fiicnaan laheyid. Waxaan aaminsanahay inaynu haysano wax kufilan beerta digaaga, aad bay u fiicnaan lahayd.
In yar kabacdi
Waxaan ka fikirayaa. Waa inaynu furanaa akoon bangi. Lacag dhigitaanka xaruntu waa khatar.
AGRICULTURAL BANK
Haa josef, waankugu raacsanahay. Waxaan maqlay inay bangiyo badan inoo furi karaan akoon. Waxay naga caawin lahayid edebsanaanteena iyo sida aynu si hadafsan oogu isticmaali laheyn.
Way igu adagtahay inaan fahmo macluumaadkan oo dhan. Waxay oogu tala galeen dadka meesha dagan bas ah.
Waxaan ka maqlay dadka xarunta inay furteen akoon. Aynu maalin imaano aynuna oogaano warqadaha aynu u baahanahay si aynu akoon u furuno.


Maalmo kabacdo
Waa inaynu hellaa furaashyadoo dhan, keyidkeen ayaa gadi kara 1 ama 2 furaash.
Waxaan rajeynayaa ineynaan ku isticmaali keyidkeena kan. Aynu eegno inay furaash nawada siiyaan.
Waxaan umaleyin inay saxsantahay isticmaalitaanka inyar oo keyid ah. Waan ogahay inayna fiicneyin maadaamoon isku ogeyn inaynu u isticmaalno lacagtan beerta digaaga laakin tanaa inoo fiican intaynu gali laheyin deyin.
Haye aynu kasoo gadano 2 kale magaalada dhexdeeda. Waxaa jira dukaan riqiis ku gada.
Haye, laakin sided rabtaa inaad u bixiso? Soo ma fiicno inaynu lacag ka amaahano dadka xerada intaynu isticmaali laheyin keyidkeena?
Haa waad saxsantahay Josefow
Haa waxaan umaleyin inay nagu filantahay. Waan tagiyo waan lasoo gorgortami si aan qiimo fiican oogusoo helo maadaamooyna hadda wada siineyno qarshi ahaan.
Si fiican Josefow
Wakhti yar kabacdi
Shaqadeena si fiican ayay usocotaa. Haka warwarin markaaba waynu soo celin doonaa keyidkan aynu isticmaaley.
Waxaan umaleyin inay wakhti nagu qaadan laakin aynu si adag isoogu dayno.
Waynu kasoo bixi. Cidnana dulsaar ma siinayno. Wax cadaadis ahna majiro keydin sii wadataanka mooyaane.

Beerta dhexdeed
Joseefoow waxaad ubaahantahay kabo cusub. Kuwaasu waxay leeyihin daloolo, maamulkuna taas ma jeclo.
Haa nasiib wanaag. Lacag yar Ayaan u ururiya kharashyadan oo kale. Maalmahan soo socda Ayaan raadin kabo cusub.
Haye waxaan qaadan kuwan oo lambar 43 ah.
Sax, ma lacag caddaan ahaan ayaad kubixin mise koodhka QR adigoo isticmaaleya borsada jeebka ah ee dijitaalka ah.
Maalmo yar kabacdi
Pay here with QR Code
Ma waxaan ka faa'iidi baa jira isticmaalka boorsada jeebka ah ee dijitaalka ah?
Ma jiro wax kala duwanaansho oo ah xagga qiimaha. Laakin lacag caddaan ah mataabeneyno labadeenaba way inoo fiicantahay taasi.
Haye sax waxaan isku dayi boorsada jeebka ah ee dijitaalka.
Fadlan iskaan garee koodhkan QR ah oo lacagta ayaa si toos ah looga jarayaa boorsada jeebka
Haye ma saasaa?
Haa
Mudane waa bas. Lacagtaadaa waan helay. Way dhib yareyid. Waa sifiican.
Waa cajiib. Markasta waan isticmaali. Way dhib yartahay.

END

Meshak

Meesha sara iyo Meshak
Marka maanta deriskeena Miriam ayaa imanaysa?
Haa aad bay u walbahaarsantahay. Waxaan rajaynayaa inay waxkasto ay fiican yihiin. Saddexdeena Ayaan qado inoo diyaarin.
Daqiiqado kabacdi
Ganacsigu si fiican ayuu usocdaa. Bilawgii wuu yar adkaa laakin hadda wuu fiican yahayo faa'ido badan ayaa kasoo xaroota.
Marka maxaa khaldan saaxiibadayee? Waad walwalsantahaye.
Haa, ma faraxsani. Aad baan ugu dadaalay si u dukaanku ukori lahaa marka todobaadkii hore Ayaan guriga imid. Waxaan arkay ma kuu sheegaa? Gaariga cusub ee John.
Gaari cusub a? wuxuu iisheegey inaysan Sandakan fiicneyin beertuye. Side buu usoo gatay gaadhi cusub?
Sababtaas Ayaan u xanaaqsanahay. Lacagtayda ayuu isticmaalay. Wuxuu yiri waa fursa fiicano wuxuu isticmaalay lacagtii aan kudhihi jiray akoonka bangiga noogu shub. Waad oogtahay inaan jeclayin tagitaanka bangiga sababtaas ayaan isaga lacagta oogu aaminay.
Waa inaad bangiga tagtood hubiso inta kuugu jirta akoonka.
Waykasii dari meshak qaaliyoow. Shalay baan taas sameeyey. Magaca akoonka bangiga waa kiisa bas ah. Marka kamasoo saaran karo waxa ku haray xattaa.
Taasu wax la aqbali karo ma ah. Waan lahadaliyo si uu ufahmo waxa xun ee uu sameeyey. Waanan isku dayi inaan ku qanciyo inuu gaadhiga iibiyoo oo soo celiyo lacagta.
Haa Miriam sikastoon awoodno waanku caawinaynaa.
Aad baad umahadsentahay. Hal waxo kale ma iisameyin karta: maalin bangiga ma ii raaci kartaa?


Waxaan miisaaniyada usameynayaa dukaanka adeegga iyo beerta. Ma iga caawin kartaa?
Waa waraaqado badan wax dhib ahna kalamasoo kulmin.
Haa laakin xaggan eeg Meshakoow. Akoonka dukaanka adeega waxaa ka maqan 40 dollar.
Waxaa fiican inaynu lambaradeena eegno markasta.
Haa waa sax waxa kaliya ee naga dhimman waa warbixinta bangiga sababto ah baryahan waad iska tuurtay adoonan furin feriimahaba.
Alla aan sida ugu dhakhsaha badan oola hadlo. Waligey ma isticmaalin bangi guriga oo ma aqaano sida loo eego adoonan isticmaaleynin waraaqadaha.
40 kaas maanaan kasaa ranin waxay ahayid inay ku jirto akoonkaayaga.
Waa inaad akoonkaaga eegtaa ood ka heeshaa lacagtaad sheegatay.
Daqiiqado kabacdi
Doqon baan ahay, waxay aheyd inaan tuurin warbixinnada bangiga. Waad saxsaneyid.
Taasi maxay ka dhigen tahay? Lacagta maynu khasaarnay?
Waxay dhaheen waxaan bilaabi karaa baroosaska xareyinta sheegasho rasmi ah, laakiin wakhti badan ayay qaadan.


Maalmo kabacdi, beeerta Meshak
Way fiicantahay qiimaha lo'dan. Waa qiimo loogu tala galay macaamiil fiican.
Mahadsanid Meshak, bil kabacdi aynu is aragno.
Saacado kabacdi
BANK
4
CUSTOMER SERVICE
005
Meshak, ilaa iyo hadda waxaad leedahay waxaan dhahno akoon keydis oo caadi ah. Akoonkaasoo kale waa mid aad ku shubato lacagtaad kayidsato. Waan arkaa inay akoonkaaga lacag fiican kuugu jirtee. Maxaad rabtaa inaad ku sameyso?
Waxaan rabaa inaan gato booska deriskeyga. Qiimaha waanku heshiinnay, lacag ku filanna waan haayistaa oo waxaan udiri sanad kabacdi.
Waa si fiican Meshakoow. Marka waxaan kula wadaageyaa inaad furato dhigaal wakhti go'aan ah oo 1 sano ah. Waa badeecada ugu dulsaarka fiican.
Waa si fiican. Ma waxaa jira wax dhibaato igalasoo kulmi karta?
Majiro. Laakiin lacagta kalama bixi kartid sanadkaas. Sababtaas darted ayey u fiicantahay haddaad inaad isticmaaleyso sanad uun.
Waa waxaan ubaahnaaba. Wax kale kuma qabsanayo lacagtan. Iidiyaari waraaqadaha loo baahanyahay oo dhan todobaadka soo socda Ayaan iman.


Dukaankani si fiican ayuu usocdaa, maynu mid labaad furano.
Haa waad saxsantahay meshakoow. Waa inaynu saas sameynaa.
Ma garanaysa qiyaasta inta ku bixi karta kirada dukaan kale iyo diyaarintiisa? Lacag noo taalo nagu filan mahaysanaa?
Haa waan hayaa qiyaasta lacagta aynu ubaahannahay. Laakin ma isticmaali karno lacagtaan dhigannay. Waxay kujirtaa akoon aan laga saari Karin sannad.
Kasoo gadashada booska dariskeena. Waa inaynu waydiisano amaah, sidii aynu sameyney dukaankii horeba.
Isla fiidkaas gurigooda
Waxaan eegay shuruudaha bixiyayaasha adeega maaliyadda ee kala duwan. Waxaan is barbar dhigay bangigeena, machadka maalgelinta yaryarka ah iyo shirkadda cusube ee maaliyadda ee amaahda siisa ganacsatada.
Kee nagu habboon?
Waa inaan si fiican u qiimaynaa. Waa inaan ka fikiraa dulsaarka, lacagta markasta nalaga rabo, mudada nimcada iyo helitaanka adeegyada kale. Waa inay wakhti fiican siinaa qiimeyinta, ma aha basa ta raqiisan.
Maalmo kabacdi
Waxaan umaleyin in ay deyintani idinku habboontahay waxaan huba inayna dhib idinku ahayin lacagta intan le'eg bishiiba.
Labadiinuba waa inaad xaggan saxeexdaan.
Waa talaabo noo fiican. Mahadsanid maadaamood na taagertay.


Bilo kabacdi
Meshak, kaarkaaga deyintu waa kuu diyaar. Maadaamood tahay macmiil fiican waanu ku faraxsanahay inaan faa'iidadan kusiino.
Caawintanu aad bay noogu fiicantahay. Gaar ahaan hadda madaamoon labadaayaduba leenahay dukaan adeeg.
Guud ahaan waa 400 oo dollar. Ma waxaad isticmaali kaarka markale Meshakoow?
Haa sidii malinkii hore kaar Ayaan ku bixin.
EVERYTHING FOR YOUR FARM
SEEDS
Todobaadyo kabacdi
Si taxaddar la'aan ah Ayaan u isticmaaley kaarka deyinta. Waxaan isu ballanqaaday inaan eegayo maaliyaddayda oo aan kharashkoo dhan kaarka deyinta u isticmaalayo laakiin saas ma sameyin.
Meshaakoow waa lacag badan, xaggaynu ka keeni?
Waxaynu isticmaali karnaa inyar oo ah keyidkaynu haysanay si aynu u bixino inta oogu yare ee nalooga baahan yahay.inta hadhayna iyaga ayeynu sitoos ah ula bixineynaa. Hadda kabacdi waanka taxadariyo miisaaniyadeena Ayaan tix raaci.

END

Jane

Meesha Jane
Qaali, markaan saas u dhameeyo xisaabeyintan, waxaan inoo sameyin casho.
Seetahay Hawwa, waanku faraxsanahay maadaamoon codkaaga maqlay.
Xaalad dagdag ah ayaa ilasoo kulantee. Lacag makaa amaahan karaa ? dawo bagteriyaan rabaa inaan usoo gado Anita, aad bay u xanuunsanaysaa wax lacag ahna mahayo.
Wax badan mahaye laakiin soo gal. Waxaan kusiinayaa 30 dollar oo aanan u baahanaynin maalmahan soo socda.
Ho. Fadlan dhakhso dawada usoo gad Anita si ay u bogsato.
Mahadsanid, waad i badbaadisay. Waxaan kuu iman daqiiqado kabacdi
Ho. Fadlan dhakhso dawada usoo gad Anita si ay u bogsato.
Haa, mahadsanid. Waxaa ballan ah inaan kuusoo celiyo todobaadka soo socda
Haa, waa gaas gubaha. Waa inaan badalaa. Waxay igu qaadan ilaayo 25 dollar.
Ufff, badanaa! inyar isug waxaan lahadlayaa ruux si aan lacagta u helo.
Hawwa, qaaliyeey. Lacagta iisoo celi. Foornadaa iga xumaatey.
Ah, waanka xumahay ilaayo hadda lacagta kuuma hayo Janey. Wakhti ayaan u baahanahay.
Saasaa, aniga aad bay iigu xuntahay. Waxaan waydiin dariskayga hadday lacag isiin karaan.

Jane koox bay latahay haweenka kale ROSCA.
Majiraa ruux ku leh bangiga akoon keydis ah oo aanan xaggan bas ah ku keyidsanin? Waan xiisaynayaa.
Anigaa leh Janey, aad baana ugu faraxsanahay. Waa wax habboon.
Maalin ba maalinka kasii dambeya waxaan ka fikiraa inaan yeesho akoon aan lacag gaar ugu dhigi karo dukaankayga. Takale lahaanshaha kaarka bangiguna aad buu ii anfici lahaa.
Haa Jane, waxyaabahaas oo kale ayaan u isticmaala akoonka bangigayga. Aad baana ugu faraxsanahay.
Oo ma umaleyin inay akoon bang ah ii sameyin doonaan?
Haa, weebsayidkooda fiiri ama si toos ah ula hadal si aad uhubiso warqadahay ubaahan yihiin. Sidaad moodeysid ooma adka.
Haye, waxaan xareeyay foomka khadka ah ee weebsayidkooda. Marka hadda waan fahmo waa inaan utagaayoon warqadahayga rasmiga tusaa, soo saas ma aha?
Waad saxsantahay. Todobaadka soosocda uun lakaaley aqoonsigaaga oo wax bixin oo xaggaaga markaas waan kuu dhameyis tiraynaa.
Way iska dhib yareyid. Buuxinta foomka khadka kabacdi, waxaan latagay warqado marka labo todobaad kabacdi waan heli kaarkayga iyo warqado kastoo laxariira akoonkayga. Aad baan u faraxsanahay.

Maalmo kabacdi
Waan dagdagsanayaa. Waxaan rajaynayaa inay dhakhso iigu dhamaato.
TAKE YOUR MONEY PLEASE
Alla, waxaan umaleyin inay yahay dhalashadii Amine.
To confirm your withdrawal, please enter your PIN
Alla, may, waxay ahayid sanadkaan dhashay!
INCORRECT PIN. Please try again.
Alla, tay ahayid ! Mar labaad si khaldan ooma sameyin karee.
!?
Ma aamini karo wax igu dhacaya.
INCORRECT PIN. FOR SECURITY REASONS YOUR CARD WILL BE RETAINED BY THIS ATM. PLEASE CONTACT YOUR BANK


Jane waxay booqanaysaa saaxiibadeed Fatima,
TROPICAL CUISI
Fatimaay, aad baan ugu faraxsanahay inaynu sheekeysano. Markasta wax baynu ku jeednaa.
Haa, aynu ku istareexno shaah iyo sheeko.
Waan arkaa inaad tahay haweeneey taajirtey waxaana rabaa inaan wax dheeraad ah ka oogaado ganacsigaaga iyo sidaad u maamushid.
Janeey, ma taajirin. Laakin aynu sheekeysano, markasta waxaan isku dayaa inaan ogaado kaaga sababto ah kaagu markasta wuu korayaa.
Marka waxaan ku bilaabay lacag aan keyid saday oo aan kala imid magaaladan ku dhashay iyo lacag yar ooy qaraabaday ay safarka iisiiyeen. Aad bay ugaabisaa, laakin waxaan dhigtaa 30 dollar todobaad kasta. Aayar aayar waxaan dareemayaa inay u korayso.
Taasu waa si wanaagsan. Waxan hayistay kayid yar bilawgii laakin inta badan waxaan isticmaaley deyn badan oo ka amaahdey bangiga taasoo ii saamaxsay inaan dib u habeeyo dukaankeyga. Aad baan u koray laakiin cadaadis badan ayaa ka jiray xagga dib u bixinta deyinta.
Haa, laakiin waxaan filayaa inay si fiican arintu usocoto, sababto ah hadda waxaad ku leedahay dukaan meesha ugu mashquulsan ee magaalada.
Haa, tanu waxay ahayid fursad aanan diidi karin. Laakin waxay noqotay inaan seedigay lacag ka amaahdo, madaamoon ilaa iyo hadda dib u bixinayo amaahdii kale.
Waanku fahmay. Laakin way fiicantahay. Waxaad markasta ka fikirta koritaanka. Waadna sameysaa.
Haa, laakin waxaa la socda cadaadis xagga dib u bixinta ah wax aad uyar baan uruurin karaa. Waxaan umaleynayaa ineyna jirin si fiican iyo si xun oo loo ganacsado, laakiin taadana waanka helaa.
Aad baan ugu faraxsanahay imaatinkaaga.
Wax badan ayaan faa'iiday. Markale aynu kulano.


Wakhti yar kabacdi
Seetahay hooyo, ma fiican tahay.
Waxay ubadantahay. Duufaan ayaa shalay magaalada ka dhacay. Hadda saqafkaayagu wuu burbursanyahay. Maalmahan soo socda lacag ma noosoo diri kartaa?
DRIIING DRIIING
Hooyooy, taasu way xuntahay. Dhageyso, wax badan mahayo, laakiin waxaan kuusoo diri 50 dollar, waxan rajaynayaa inay ku caawiso.
Haye jacayilkeygiiye, taasu waxay naga caawin soo gadashada alaab aan ku hagaajino. Aabaha ayaa si uun dhihi.
Haye, hadda ayaan istashinka basaska tagi. Maanta waa jimce oo waxaa la heli bas xaggaaga usocda xilli qadada.
Hal saac kabacdi
Haye si wanaagsan. Marka fadlan bashqaddan hooyaday Asma ugee. Waxay kugu sugi meesha lagaga dago. 3dan dollarna adaa iskaleh maadaamood waxan iisameyneysid.
342
Hooyo, waxaa jira bas xaggaaga usoo baxaya. Lambarkisu waa 342, waana cagaar. Darawalka ayaa haya bashqadda ay lacagtu ku jirto. Wuxuu iisheegay inuu 6da galabnimo idinsoo gaareyo. Fadlan ku sug meesha lagaga dago.
342
Kadib isla fiidkaa
Haa, xattaa waanka horeyeyba. Waxaan waydiiyay ruux iibiya cuntada wuxuuna iisheegay inuusan baskaas wali arkin.
Hooyooy waa 8.30 fiidnimo. Ma hubtaa inaad meesha tagtay wakhtigeeda?
Ma hubo inaan sugitaanka siiwado uun. Malaha baskaa xumaaday?
Waxay ahayd inaan lacagta sikale usoo diro, waanka xumahay hooyo.

END

QEEXID

QEEXID GUUD

YOOL

- Yoolka waa meel aad hiigsanaysid inaad gaadhid mustaqbalka.

RASMI AH/AAN RASMI AHAYN

- Guud ahaan, wax kasta oo rasmi ahi wuxuu tix galiyaa nidaamka, taas oo ka dhigan wuxuu ku shaqeeyaa nidaamka u degan, qaab-dhismeedkiisa amaa sharciga. Hay'ad kasta oo rasmi ahi waxay tahay mid sharci ku dhisan oo ay dowladu aqoonsatahay.
- Dhinaca kale waxaa aan rasmiga ahayni, ma tix galiyo shuruuccda iyo nidaamka dawliga ah, amaa qaab dhismeedka. Tusaale sektarada aan rasmiga ahayni, waxay arursadaan oo ay ka shaqaystaan shaqooyinka aan u diiwaangashanayn dowlada, mana bixiyaan wax cashuur ah.

MIISAANIYADA

- Miisaaniyadu waa aalad lagu go'ooan qaato, si loo qorsheeyo loona isticmaalo lacagaha si loo gaadho yoolka la hiigsanaayo.

HESHIISKA SHAQAALAYNTA

- Waa heshiis (sharci) ah, oo ay wada galaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, waxaana ku cad shaqooyin iyo masuuliyado cayiman iyo fa'iidooyinka ay helayaan labada dhinac.
- Waa in heshiiska ay ku jiraan sharaxaada shaqada, masuuliyada iyo xuquuqaha. Wuxu si cad u cayimaa xaalada shaqaalaynta iyo shaqada, sida lacagta la bixinaayo, saacadaha shaqada.
- Heshiiska waa in ay rabitaankooda ku saxeexaan labada dhinaca ee wada galay.
- Waxaa fiican oo la doorbidaa inuu heshiiska shaqadu noqdo mid qoraal ah, oo ku qoran luuqad fudud oo ay wada fahmi karaan labada dhinac. Waana in ay saxeexaan labada dhinac, waxayna labada dhic ay qaadanayaan nuqulka asalka ah ee heshiiska.

HAY'ADA LACAGTA

- Hay'ad ganacsi oo ay dawladdu leedahay amaa si gaar ah loo leeyahay, taasoo bixisa adeegyada lacagaha, Sida waxay dhaqdhaqaajinta kaydka, bixinta daymaha iyo soo celintooda.

ISKAASHATADA KAYDSIGA LACAGTA IYO DAYMAHA

- Iskaashatada kaydinta iyo daymahu waa urur heer deegaan ah oo ay ku bahoobeen ayna maamulaan xubno ka shaqeeyo in ay naftooda caawiyaan, si ay u buuxiyaan baahiyaha lacageed ee xubnaha ku bahoobay. Waxaa iskaashatada iska leh isla markaasna maamula xubnaha ku bahoobay.

AKOONKA KAYDINTA/DHIGAALKA LACAGTA

AKOONKA JOOGTADA AH EE KAYDSIGA

- Akoonka Joogtada ah ama buug bangiga (sidoo kale loo yaqaan akoonka dalbashada dhigaalka) hay'ada lacagtu waxa ogoshahay in sitaha akoonku uu samayn karo dhigaal iyo lacag la bixis xilli kasta. Cadadka iyo wakhtiga aan la sii cayimin. Kaydinta waxaa lagu lambariyaa iyadoo loo eegayo heerka dulsaarka (badanaa sanadle). Akoonkan kaydintu badanaa looma isticmaalo inuu sameeyo bixin toos ah.

AKOONKA KAYDSIGA LACAGTA EE WAKHTIGA KU SALAYSAN

- Akoonka kaydsiga lacagta ee heshiiska ku salaysan ee hay'adaha lacagtu, wuxuu qofka leh akoontiga u saamaxaa inuu shaqadiisa kaydinta lacagta uu ku saleeyo hadafkiisa iyo yoolasha lacageed ee cayiman uu rabo inuu gaadho. Qofka macmiilka ee iska leh akoontigu, wuxuu si joogtaa mudo cayiman isaga oo dhigaaya lacag cayiman. Marka uu gaadho xiliga hana qaadka kaydka dhigaalka lacagtga (xiligii lagu heshiiyay), wuxuu qofka akoonka kala baxayaa dhamaan lacagta ugu jirta, iyada oo lacagtaasna ay ula socoto dhalo amaa dulsaar horay loo sii cayimay. Waxaa la ogolayn amaa ganaax lagu mutaystaa in akoonka lacag lagala baxo kar xilliga lagu heshiiyay.

DAYNTA XADIGA DHALADA

• Akoonka kaydisga lacagta ee wakhtiga ku salaysan ay bixiyaan hay'adaha lacagtu waxuu qofka iska leh akoontiga u saamaxaa in uu dhigto cadad lacag ah oo uusan la bixi karaynin ka hor xilliga cayiman. Qofka macmiilku wuxuu xulan karaa mudda cayiman ee uusan taaban karaynin lacagta uu dhigto akoontig. Maadaama oo akoontigani uu yahay mid guud ahaan xayiran, waxaa qofka iska leh loo saaraa dhalo ka badan wax soo saarada kale ee kaydsiga lacagta.

XADIGA

DULSAARKA DAYNTA

• Waa xadiga lacagta ee qofka lacagta amaahday uu siiyo qofka lacagta amaahiyay, taas ku ka baxsan lafaha lacagta la amaahday, waxaana lacagta dhalada laga bixiyaa isticmaalka lacagta daynta.

RAASAMAAL/LAFAHA

• Waa cadadka lacagta daynta ah oo ay ku jirin dhaladu.

MUDADA DAYNTA

• Waa xiliga uu qofka dayn qaataha ahi uu ku qasban yahay inuu ku isticmaalo daynta, kuna soo celiyo.

DAMAANAD

• Waa shay leh qiimo, oo qofka dayn qaataha ahi, uu ku wareejiyo dayn bixiyaha, si ay suurta gal u noqoto inuu lacagtiisi helo haddii uu dayn qaatuhu ku guul daraysto inuu iska bixiyo lacagta. Damaanad waxaa noqon kara (dhul, gaadhi, kayd lacageed).

XILIGA NAFISKA

• Waxaa xiliga ka danbeeya wakhtiga la qaadanaayo daynta iyo inta ka horayso marka ugu horaysa ee la bilaabayo soo celinta daynta.

DIB UGA FIIRSASHO

• Waa burinta heshiiska ugu horeeya ee daynta. Wadamada qaarkood, heshiiska kaydinta looma arko mid sharci ah ilaa ay maalmo amaa todobaadyo badan ay ka soo wareegto xiliga la saxeexay heshiiska Xilliga, ma jirto wax lacag ah oo uu dayn bixiyuhu uu siinaayo dayn qaataha. Waxay tani xaqiijisaa in uu si wax ku ool ah looga hortaga isbadalka ku imaani kara gadashada daynta.

DAYN CELINTA XILLIGA HORE

• Dayn qaatuhu wuxuu had iyo jeer u madax banaan yahay in daynta uu qaatay uu gabi ahaan amaa wax ka badh uu iska bixiyo ka hor inta aysan dhamaan mudada heshiiska dayntu, mana jirto wax ganaax ah oo u la kulmi karo hadii uu sidaas yeelo.

DAMAANAD BIXIYE

• Waa qofka, ka bixinaaya daynta aad qaadanayso haddii aad ku guulaysan waydo inaad iska bixiso; qofkan waxaa looga baahan karaa in qayb ka noqdo heshiiska aad la saxeexanayso dayn bixiyaha.

SI XAD DHAAF AH U QAAMOOBID

• Waa karti ku timaada qofka ee u horseeda inuu la taacaali kari waayo daynta lagu leeyahay.

HABKA BIXINTA LACAGTA

KAARKA LACAGTA CADAANKA AH

• Waa kaar uu ku siiyo banigaaga aad ku leeadahay akoontiga, wuxuuna kuu saamixi karaa in aad lacag kala baxdo akoontigaaga aiga oo isticmaalaya mashiin gaar ah oo loo yaqaano ATM oo ku xidhiidhsan akoontigaaga, waxaanad kala bixi kartaa kaashka aad doonayso. Ka sokow, lacagta aad kala baxayso, ATMka waxaa kale oo aad ka ogaani kartaa cadadka lacagta ee kuugu jira akoontiga, lacagaha aad ka xawishay akoontigaaga, lacagta aad ku xaraysay. ATMyada qaarkood, waxay gadaan calaamadaha, daynta ku hadalka telefanka, waxuuna kuu saamaxaa in aad bixiso biilalalka qaar (sida laydhka iwm Bangi kastgaa wuxuu leeyahay network ku xidhan ATM, balse waxaad inta badan aad isticmaali karaysa kaliyaa ATMka bangigaaga, Hasa yeeshe, mar kasta oo aad isticaasho ATM ku xidhan neet work bangi kale ah, wuxuu bangigaagu ka jari karaa lacag.

KAARKA AMHAAHDU

• Kaarka amaahdu waa nidaan kale oo elektaroonik ah oo bangiyada u isticmaalaan isdhaafsiga. Ka sokow inaad lacag kaga soo saaran karitid ATMka, waxaad kaarka daynta aad u isticmaali kartaa inaaad dukaanada aad kaga iibsatid alaabooyin. Waa in ay lacagi kuugu jirto akoontigaaga marka aad wax ku iisanaysid kaarkan. Waxaa lacagt aad wax ku iibsatay si awtomaatika ah looga jarayaa lacagta ku jirta akoontigaaga. Wuxuu banigu had iyo jeer kuu soo dirayaa warbxin ku saabsan akoontigaaga uu ay ka muuqdato cadadka lacagta ee lagaa goynaayo, iyo baaqiga kuugu hadhay akoontigaaga.

KAARKA DAYINTA

• Guud ahaan, kaarka dayinta wuxuu kuu ogolaanayaa inaad fuliso macaamilada sida lacag caddaan ah iyo karaka lacagta tooska ah oo kale. Waxa wayn ay ku kala duwan yihiin waxaa weyaan waxay kalooy kuu saamexeysa inaad heshid deyin deg deg ah. Marka si kale loo dhahana, hadaadan haysan lacag waxaad rabto waad gadan kartaa adigoo amaah ka qaadanaya machadkaad kaarka dayinta kaa iibiyey. (machadyada maaliyada bas ma ahe subermaarkeedyada, dukaamada, iyo qaar kaleba).

• Iyadoo ku salaysan nooca heshiiska ee kaarka deyinta, akoonkaaga ayaa laga jari intaad wax ku gadatay (hal waji ama kabadan, dulsaar inta badan ka sareya badeecadaha daymaha ee caadiga ah...). Waxaad heli bayaan joogto ah oo ka imanaya machadka ku siiyaya kaarka deyinta,taaso kutusaysa lacagta laguguleyahay, intaad iska bixisay iyo dulsaarkaba.

XAWILITAANKA

BIXIYAYAASHA ADEEGA XAWILITAANKA EE AAN RASMIGA AHAYN

• Ururadani ma aha kuwa ay dowladu dabagasho ama kormeerto. Kuwa adeegano kale bixiya waxaa kamid ah, dukaamada tafaariiqda, saaxibadaa iyo wax kala gudbiyayaal.

BIXIYAYAASHA ADEEGA XAWILITAANKA EE RASMIGA AH

• Ururadani waa qaaray dowladu dabagasho ama kormeerto. Kuwa adeegano kale bixiya waxaa kamid ah, Hawilwadeenada wax xaawila (MTOs), bangiyada, machadyada maalgelinta yaryar, lacag ururinta iyo iskaashatooyinka amaahda, iyo adeeg bixiyayaasha mobeelka.

KHATARTA IYO CAYMISKA

KHATARTA

• Khatartu waa suurtagalnimada waayitaanka ama dhaawaca.

CAYMISKA

• Caymiska waa qeyb kamid ah ilaalada, oo ruux kasto qandaraas caymis galay isticmaali karo, magdhaw lacag ahaan ah markuu shil dhaco ama dhacdo kasto oo ay caymisku saamexeyso.

SHIRKADDA CAYMISKA

• Shirkadda caymisku waa ganacsi (faa'ido doon) kaaso bixiya adeegyada caymiska.

URURKA LAWADA FAA'IDAYO (ISKAASHATADA)

• Ururka lawada faa'idayo (iskaashatada) waa urur lawada faa'dayo oo aanan u taagtneyin faa'ido, taaso siisa caymis xubnaheeda.

SIYAASADDA

- Dokumeenti ay shirkadda caymisku ay u dhiibto macmiilka taaso sheegaysa shardiga iyo shuruudaha qandaraaska caymiska.

LACAG JOOGTO AH

- Lacagta u macmiilku siinayo shirkadda caymiska si uu uhawilgaliyo siyaasadda caymiska oo ay ansax u ahaato.

FAA'IDOOYINKA

- Lacagta ay shirkadda caymisku ay bixiyaan ayna siiyaan ruuxa wax sheegtay ama faa'ideyistayaashiisa.

FAA'IDEYISTAYAASHA

- Waa ruuxa lacagta caymiska hela marka ay dhacdo caymisan dhacdo.

SHEEGASHO

- Codsi lacag bixineed taasoo looga jeedo wax khasaaray oo caymisan.

KAARKA CAYMISKA

- Waa kaar u bixiiyo bixiyaha caymiska taaso cadaynisa inuu macmiilku uu bixiyay lacagta joogtada ah.

WAXA LAGA REBAYO

- Marxalado, xaalado, ama waxyaabo taaso inta badan lagu xuso qandaraaska oo aan la cayminin.

BUUGYARAHA TABABARAHA

AQOON DHAQAALEEDKA LOOGU TALA GALAY QAXOOTIGA EE ILO, IDP IYO BULSHOOYINKA QAABILEYA

Buugyarahan loogu tala galay tababaraha waa lagu soo diraariyey qaabdhismeedka mashruuca ILO: iskaashi loogu tala galay wanaajinta marxaladaha dadka qasab lagu barakaciyey iyo bulshooyinka qaabilaya (PROSPECTS). PROSPECTS waa hindise iskaashi oo u hor dhacayo dawladda Netherlands waxayna isu keenta Shirkadda Caalamiga ah ee Maaliyada (IFC), Ururka Caalamiga ee Shaqooyinka (ILO), Waakalada u qaabilsan Qaxootiga Qaramada Midoobey (UNHCR), ta u qaabilsan Maalgelinta Ciyaalka (UNICEF) iyo Bangiga Aduunka.

Buugyarahan tababaraha eek u saabsan aqoonta xagga dhaqaalaha waxaa loogu tala galay qaxootiga, dadka wadankooda jooga laakin barakacsan iyo bulshooyinka qaabileya kuwaaso raba inay sare uqaadaan aqoonta kusaabsan sida loo maamulo lacagta. Buugyarahani waxuu ka hadlaa mawduucyadan soo socda: dhigitaanka himilo maaliyadeed, si kalsoni leh u xidhiidhitaan, fahan qaybaha maaliyada ee ugu muhiimsan (kaydadka, amaahaha, lacag bixin, boorso dijital ah, caymis), fahan oo la gorgoritaanka machadyada maaliyada, lacag dirid iyo maamulitaanka khatarta.

Waxaad ka heli macluumaad kasto oo ku saabsan jilayaasha khayaaliga ah, kiisas barasho, laylisyo iyo tixraacyo khaas ah oo kusaabsan koox la bartilmaamsaday. Buugyarana wuxuu kalo oo uu ka kooban yahay dhibcaha oogu muhiimsan ee tababarka iyo xirfadda loo baahan yahay si u qof u istimaalo una haysto lacagta si xikmad leh. Waxaa loo qoray nimanka iyo dumarka ka qeyb galaya koorsooyinka tababarka. Waa in loo isticmaalo buug laylis ahaan marka koorsigu socdo marka dambana buug xigasho ahaan oo haga. Waxaa kujira sawiro majaajilo ah oo taabanaya mawduucyada ugu muhiimsan ooku salaysan khibrada jilayaasha khayaaliga ah. Buugyarahan waxaad ke heli laylisyo iyo xaashiyooyin shaqo oo ay ka qayb galayaashu ay iskooda ubuuxin karaan.

IISBN: 9789220341827 (Print)
ISBN: 9789220341834 (Web PDF)

International Labour Organization

Ministry of Foreign Affairs of the Netherlands